

WARBIXINTA CAALAMIGA AH EE KORJOOGTEYNTA WAXBARASHADA OO KOOBAN

2021/2

Xoogagga Aan Dowladda Ahayn ee qaybta ka ah waxbarashada:

YAA SOO XULA? YAA WAX KU WAAYA?

unesco

Sustainable Development Goals

Global Education Monitoring Report

WARBIXINTA CAALAMIGA AH EE KORJOOGTEYNTA WAXBARASHADA OO KOOBAN

2021/2

Xoogagga Aan Dowladda Ahayn ee qaybta ka ah waxbarashada

YAA SOO XULA? YAA WAX KU WAAYA?

Baaqa Incheon ee Waxbarashada 2030 iyo Qaab-dhismeedka Waxqabadka waxaa uu qeexayaa in waajibaadka Warbixinta Korjoogtaynta Waxbarashada Caalamiga ah uu yahay in ay noqoto "habka korjoogtaynta iyo ka-warbixinta ku saabsan Yoolka 4aad ee Horumarka La Joogteyn Karo (SDG 4) iyo waxbarashada ku saabsan Yoolalka Horumarka La Joogteyn Karo ee kale" iyada oo ka mas'uul ah "in ay ka warbixiso fulinta istiraatiijiyadaha qaran iyo kuwa caalamiga ah si ay gacan uga geysato in lagala xisaabtamo dhammaan la-hawlgalayaasha ay khuseyso ballanqaadkooda iyada oo qayb ka ah la-socoshada iyo dib-u-eegista guud ee Yoolalka Horumarka La Joogteyn Karo (SDG)". Waxaa diyaariyay koox madax-bannaan oo ay martigelisay hay'adda UNESCO.

Magacyada lagu adeegsaday daabacaaddan iyo qoraallada halkaa lagu soo bandhigo ma tusinayaan wax fikrad ah nooca ay doontaba ha ahaatee oo ay qabto UNESCO oo la xiriira sharciyada dal, dhul, magaalo ama degaan, ama maamulkiisa, ama la xiriira xudduudihiisa.

Kooxda Warbixinta Korjoogtaynta Waxbarashada Caalamiga ayaa ka mas'uul ah doorashada iyo soo-bandhigidda xaqiiqooyinka ku qoran buuggan iyo aaraada halkaa lagu soo bandhigo, kuwaas oo aanay mar kasta ka turjumin aragtida UNESCO oo Hay'addana ma doonayso in ay fikirkeeda ka dhiibato. Mas'uuliyadda guud ee fikradaha iyo aaraada lagu soo bandhigay Warbixinta waxaa qaadaya Agaasimaheeda.

Kooxda Warbixinta Caalamiga ah ee Korjoogteynta Waxbarashada

Agaasimaha: Manos Antoninis

Daniel April, Bilal Barakat, Marcela Maria Barrios Rivera, Madeleine Barry, Katherine Black, Nicole Bella, Celia Eugenia Calvo Gutierez, Daniel Caro Vasquez, Anna Cristina D'Addio, Dimitra Dafalia, Dmitri Davydov, Francesca Endrizzi, Constanza Ginestra, Chandni Jain,

Priyadarshani Joshi, Maria-Rafaela Kaldi, Josephine Kiyenje, Craig Laird, Katie Lazaro, Kate Linkins, Camila Lima De Moraes, Kassiani Lythrangomitis, Anissa Mechtar, Claudine Mukizwa, Yuki Murakami, Manuela Pombo Polanco, Judith Randrianatoavina, Kate Redman, Maria Rojnov, Laura Stipanovic, Ulrich Janse van Vuuren, Juliana Zapata, Lema Zekrya and Jiaheng Zhou.


Warbixinta Korjoogtaynta Waxbarashada Caalamiga waa daabacaad madax-bannaan oo sannadle ah. Warbixinta GEM waxaa maalgeliya koox dowlado ah, hay'ado badan iyo mu'asasooyin gaar ah waxaanna fududeeyay oo taageeray UNESCO.

Rukhsadda hadda jirta waxaa ay gebi ahaanba la halmaashaa qoraallada. Isticmaalidda sawirrada, waxa ay u baahan tahay in oggolaansho hore loo helo. Qoraallada ay UNESCO daabacdo waxaa la soo geliyaa internet-ka, iyaga oo lacag la'aan ah iyada oo loo marayo keydka dikumentiyada ee UNESCO. Marka ay dhacdo in UNESCO ay iibiso waxa ay daabacdo waxaa ay uga jeeddaa keliya in lagu soo celiyo kharashkii dhab ahaan ku baxay daabacaadda ama fotokoobiyeynta ama cajalado (CDs) ku duubidda, ama qaybinta. Ma jirto ujeeddo faa'iido-doon ah oo laga leeyahay.

Ka-mahad-celinta daabacaaddan waxaa loo qorayaa: UNESCO. 2021. *Global Education Monitoring Report* Summary 2021/2022: Non-state actors in education: Who chooses? Who loses? Paris, UNESCO.

Daabacaaddan waa mid furan oo uu qof kasta heli karo waxaana loo baahiyay si waafaqsan shatiga Attribution-ShareAlike 3.0 IGO (CC-BY-SA 3.0 IGO) (http://creativecommons.org/licenses/by-sa/3.0/igo/). Marka la adeegsanayo daabacaaddan, adeegsadayaasha waxaa ay oggol yihiin in ay u hoggaansamaan shuruudaha isticmaalka Kaydka Furan ee UNESCO (http://www.unesco.org/open-access/terms-use-ccbysa-en).

Rukhsadda hadda wuxuu si gaar ah u khuseeyaa qoraallada daabacaadda. Isticmaalka agab kasta ee aan si cad loo tilmaamin in ay leedahay UNESCO, oggolaansho hore waa in laga codsado: publication.copyright@unesco.org ama UNESCO Publishing, 7, place de Fontenoy, 75352 Paris 07 SP France.Daabacaaddan waxaa loo tixraaci karaa: UNESCO. 2018. Warbixinta Korjoogtaynta Waxbarashada Caalamiga ah oo Kooban 2019: Haajiridda, Barakaca iyo Waxbarashada – Dhisidda buundooyin, halkii laga dhisi lahaa derbiyo. Paris, UNESCO.



© UNESCO, 2021
Dhammaan xuquuqdu waa ay dhowran tahay
Daabacaadda labaad
Waxaa 2021kii daabacay Hay'adda Qaramada Midoobey ee Waxbarashada, Sayniska iyo Dhaqanka
7, Place de Fontenoy, 75352 Paris 07 SP, France

Waxaa qoraallada garaacay UNESCO
Graphic design waxaa sameeyey Optima Graphic Design Consultants Ltd
Layout-ka waxaa sameeyey Tubali Limited

Sawirka Jaldiga: Jaap Joris Vens
Super Formosa Photography
Qoraalka sawirka: *Waddooyin kala duwan oo loo maro dugsi, dalka Netherlands.*

Sawirrada waxaa leh Housatonic Cartoons waxaana sameeyey Julio Carrión Cueva (Karry) iyo Miguel Morales Madrigall

Infographics by Housatonic SRL Unipersonale

ED-2021/WS/38

Taxanaha Warbixinta Caalamiga ah ee Korjoogteynta Waxbarashada

2021/2	Xoogagga Aan Dowladda Ahayn ee qaybta ka ah waxbarashada: Yaa soo xula? Yaa wax ku waaya?
2020	U-dhammaanshaha iyo waxbarashada : Dhammaan macnaheedu waa dhammaan
2019	Haajiridda, Barakaca iyo Waxbarashada – Dhisidda buundooyin, halkii laga dhisi lahaa derbiyo
2017/8	Isla-xisaabtanka waxbarashada: Ka soo bixidda ballanqaadkeenna
2016	Waxbarashada dadka iyo meeraha: In dhammaan loo abuuro mustaqal waara

Taxanaha Warbixinta Korjoogtaynta Caalamiga ah ee EFA

2015	Waxbarashada Dhammaan 2000-2015: Guulaha iyo caqabadaha
2013/4	Baridda iyo barashada: Gaaridda tayada dhammaan
2012	iyo xirfadaha: Shaqo-gelinta waxbarashada
2011	Dhibaatada qarsoon: Colaadaha hubeysan iyo waxbarashada
2010	Gaaritaanka kuwa la garbiyo/faquuqo
2009	Ka gudbidda sinnaan la'aanta: Sababta uu maamulka muhiih u yahay
2008	Waxbarashada Dhammaan ee 2015: Miyaan ku guulaysan doonaa?
2007	Aasaaska adag: Waxbarashada iyo kobaca carruurta yaryar
2006	Akhris-qoraalka nolosha
2005	Waxbarashada Dhammaan: Tayada muhiimka ah
2003/4	Jinsiga iyo Waxbarashada Dhammaan: Kor-uqaadista sinnaanta
2002	2002 Waxbarashada Dhammaan: Dunida maku socotaa dhabbaha saxda ah?

Warbixintan kooban iyo dhammaan agabka kale ee la halmaala waxaa laga soo dejisan karaa halkan: http://bit.ly/2021gemreport

Xoogagga Aan Dowladda Ahayn ee qaybta ka ah waxbarashada III

Farriimaha ugu Muhiimsan 1

Taageerada loo hayo waxbarashada ay dowladdu bixiso waa ay xooggan tahay 3

Ra'yi kala duwanaan jirta ayaa sababeysa doodo lagu taageerayo ama looga soo horjeedo waxbarasho ay dowladdu bixiso 4

Khuraafaad ku saabsan xoogagga dowladeed iyo kuwa aan dowladda ahayn ee ku lug leh waxbarashada ayaa jira 6

Bixinta Waxbarashada 10

Maamulidda iyo nidaaminta 12

Maaliyadda 13

Saameynta 16

Xannaannada iyo waxbarashada carruurta yaryar 17

Tacliinta sare 18

Waxbarashada farsamada, mihnadda iyo tan dadka waaweyn 20

Talo-soo-jeedin 21

Korjoogteynta Waxbarashada ee Yoolalka Horumarinta ee Waara 27

Korjoogteynta Waxbarashada ee Yoolalka Horumarinta ee Waara 27

COVID-19 28

Beegsiga 4.1. Waxbarashada dugsiyada hoose/dhexe iyo sare 31

Beegsiga 4.2. Waxbarashada xannaanada ah ee carruurta yaryar 31

Beegsiga 4.3. Waxbarashada farsamada, tan mihnadda, tacliinta sare iyo tan dadka waaweyn 32

Beegsiga 4.4. Xirfado shaqo lagu beddesho 34

Beegsiga 4.5. U-sinnaanta 34

Beegsiga 4.6. Barashada akhris-qoraalka iyo xisaabta 35

Beegsiga 4.7. Horumarka joogtada ah iyo muwaadinimada dunida 35

Beegsiga 4.a. Xarumaha waxbarashada iyo deegaannada barashada 36

Beegsiga 4.b. Deeqaha Waxbarashada 37

Beegsiga 4.c. Macallimiinta 37

Waxbarashada Ku Jirta Yoolalka Horumarka Waara (SDGs) ee kale 38

Korjoogteynta Maaliyadda 39



CREDIT: UNICEF/Olivie Asseli

FARRIIMAHA UGU MUHIIMSAN

Ma jirto qayb waxbarashada ka mid ah oo aaney xoogag aan dowlad ahayn ku lug lahayn.

Haddii si fudud loo sheego, haddii aaney jiri lahayn xoogagga aan dowladda ahayn, waxbarashada 350 milyan oo carruur dheeri ayaa mas'uuliyaddoodu ay dusha u ridan lahaayeen dowladaha. Laakiin ku lug lahaanshaha xoogaga aan dowladda ahayn ayaa sidoo kale raad ku leh buugaagta akhriska ee ay adeegsadaan, cuntada taalla makhaayadahooda, taageerada dheeriga ah ee ay helaan, xirfadaha ay bartaan iyo wax ka sii badan.

Dadka badidoodu waa ay taageeraan waxbarashada ay ahaato mid ay dowladdu bixiso.

Afar meelood saddex dadka ku nool 34 dakhligoodu dhexdhexaad yahay iyo kuwo uu sarreeyo ah ayaa door-bida in kharash inta hadda ka badan lagu bixiyo waxbarashada, iyada oo taageeradu ay la sii kordheyso marka sinnaan la'aanta dalka ka dhex jirta ay sarreysaba. Ku dhowaad 9 ka mid ah 10kii qofba ayaa qaba in waxbarashada ay aasaasiyanba ahaato mid ay dowladdu bixiso..

Laakiin taageeradii noocaas ahayd ayaa si tartiib-tartiib ah meesha uga baxdey dalal badan oo ka mid ah kuwa dakhligoodu uu hooseeyo iyo kuwa uu dhexdhexaadka yahay.

Meelaha ay dugsiyada dowladdu ku yaraayeen oo ay tayadooduna sii xumaatey, ayaa qoysas badan ay ka calool-goosteen. Saamiga macaahidda dowladda ee guud ahaan dunida ayaa kordhey boqolkiiba 7 dhibcood muddo ku dhow 10 sano: oo gaarey 17% sandakii 2013 oo ah waxbarashada asaasiga ah iyo ilaa 6% oo uu gaartey 2014kii waxbarashada dugsiga sare. Ku dhowaad si joogto ah ayaa ay sidaa u ahayd tan iyo waqtigaas. Bartamaha iyo Koonfurta Aasiya ayaa saamiga ardayda isqora dugsiyada gaarka ah 36% dugsiyada aasaasiga ah iyo 48% oo ay tahay dugsiyada sare.

Waxbarashada dowladdu bixiso ma aha mid bilaash ah.

Qoysaska ayaa bixiya 30% wadarta kharashka waxbarashada ee guud ahaan dunida iyo 39% oo ka bixiyaan tan dalalka uu dakligoodu hooseeyo iyo kuwa uu dhexdhexaadku yahay. Qayb ahaan waxaa taas sababey in qoysaska hodanka ah ay isku dayaan in ay carruurtooda siiyaan fursado ay kaga badin karaan kuwa kale. Laakiin qayb badan oo ka mid ah kharashkaas waxaa uu ku baxaa waxbarashada ka-horreysa tan aasaasiga ah, tan dugsiyada aasaasiga ah iyo dugsiyada sare ee ay dowladuhu ballanqaaddey in ay lacag-la'aan ku bixinayso. Ilaa 8% qoysaska ayaa soo qaata deyn si ay ugu bixiyaan kharashka waxbarashada, taas oo kor u kacayso oo gaareysa 12% dalalka uu dakhligoodu hooseeyo iyada oo 30% ama ka badan ay gaareyso dalalka Haiti, Kenya, Filibiin iyo Uganda.

Waxbarashada dowladdu bixiso badanaa ma aha mid loo dhan yahay.

Qaar badan oo ka mid ah nidaamyada waxbarashada ay dowladdu bixiso ayaa ku guuldarreysta in ay ka hortagaan kala-sarsarreynta bulshada iyo kala-takoorridda. Cabbir lagu eegey kala-duwanaanshaha bulsho ee dugsiyada, oo ku dhisnaa xogta Barnaamijka Qiimeynta Caalaamiga ah ee Ardayda (*Programme for International Student Assessment*), ayaa lagu ogaadey in dalalka Argentina, Brazil, Chile iyo Mexico ay lahaayeen heerar isku dhowdhow oo kala-sarsarreyn bulsho oo xooggan sanadkii 2018kii, inkasta oo dalka Chile un u badan yahay in lagu eedeeyo saamiga sarreeya ee macaahidda gaarka loo leeyahay ee ku dhex jira nidaamkiisa waxbarashada..

Ma jiro nooc adeeg-bixiye gaar ah oo bixiya waxbarasho ka taya wanaagsan kuwa adeeg-bixiyeyaasha kale.

Xog laga heley 30 ka mid ah dalalka dakhligoodu hooseeyo ama dhexdhexaadka yahay ayaa muujineysa in, marba haddii lagu xisaabtamo tilmaamaha qoysaska, faa'iidada muuqata ee laga helo dugsiyada gaarka loo leeyahay ay hoos u dhacayso kalabar ilaa saddex-meelood laba. Muunad ka koobneyd 49 dal, ayaa ku dhowaad 10 jeer ay uga badan tahay in kuwa ugu hodonsan ay tagaan dugsiyada gaarka loo leeyahay marka loo eego kuwa saboolka ah. Waxaa jirta in waalidiinta fursadda u hela ay dugsiyada ku xushaan diinta ay aaminsan yihiin, u-sahlanaantooda iyo tilmaamaha kooxaha bulsho ee ay ka tirsan yihiin (*demographic characteristics*) ardayga ee aaney ku xulan tayada, taas oo ay dhif tahay in macluumaad ku filan ay ka haystaan.

Waxaa ay u badan tahay in awoodda nidaaminta, korjoogteynta iyo fulinta ay hooseeso halka ay baahidu sarreyso.

Lafaguris lagu sameeyey 211 nidaam waxbarasho iyada oo la adeegsanayo barta internet-ka ee PEER ayaa muujineysa in xeer-nidaamiyeyaashu ay u badan tahay in ay diiradda saaraan diiwaangelinta, ansaxintaa ama rukhsad-siinta (98%), shahaaddo-siinta macallimiinta (93%), kaabayaasha (80%) iyo saamiga ardayda/macallinkii (74%). Xeer-nidaamiyeyaasha ayaa ay aad u hooseysaa in ay diiradda saaraan tayada ama sinnaanta: 67% waxaa ay diiradda saaraan goynta heerka ujuurada, 55% waxaa ay ka-hortagaan habraacyo cid gaar ah lagu soo xulayo marka arday loo qaadanayo dugisyada aan kuwa dowladda ahayn, 27% waxaa ay mamnuucaan in faa'iido laga sameeyo oo keliya 7% ayaa leh qoondooyin gacan ka geysata sidii ay ku soo geli lahaayeen kooxaha dhibaatooyinku haystaan. 48% dalalka ayaan lahayn xeer-nidaamiyeyaal la halmaala ardayda sida gaarka ah wax loogu dhigo oo keliya 11% dalalka ka mid ah ayaa arrintaa lagu nidaamiyey xeer-nidaamyada la xiriira ganacsiga.

Xoogagga aan dowladda ahayn ayaaba ku badan bixinta waxbarashada carruurta aadka u yaryar, farsamada, tacliinta sare iyo waxbarashada dadka waaweyn.

Tani ayaa mararka qaar waxaa ay dhibaato ku ah u-sinnaanta iyo tayada. Waxbarashada carruurta aadka u yaryar ee ay bixiyaan xoogagga aan dowladda ahayn ee badanaa qaaliga ah ayaa macnaheedu waxa uu yahay in ay macaahiddaa u bataan dadka wax haysta ee deggan magaaloooyinka. Dalka Mareykanka, jaamacadaha ku dadaalaya in ay kor u qaadaan faa'iidada soo gasha ayaa lala xiriiriyey in ay sii xumaadaan natiijooyinka ardayda. Macaahidda gaarka loo leeyahay ee tababar ku bixiya suuq lagu tartamo ama bixiya nidaamyo kobciya xirfadaha, sida barnaamijka amaahda siiya ardayda farsamada ee TVET FEE-HELP ee dalka Australia iyo Sharikadda National Skill Development Corporation ee dalka Hindiya, ayaa ku khasbanaadey in ay dib uga fekeraan geeddi-socodyada isla-xisaabtanka iyo korjoogteynta si ay u kordhiyaan tayada adeegga ay bixiyaan macaahidda gaarka loo leeyahay iyo in ay sii wanaajiyaan shaqo-helidda.

Dowladuhu waa in ay dhammaan macaahidda waxbarashada, ardeyda iyo macallimiinta u arkaan in ay qayb ka yihiin nidaam keliya.

Jaangooyooyinka, macluumaadka, dhiirrigelinta kala duwan iyo isla-xisaabtanku ayaa ay tahay in ay dowladaha gacan ka siiyaan in ay ilaaliyaan, ixtiraamaan ayna ka soo baxaan xuquuqda waxbarasho ee ay u leedahay cid walba iyo in ay ka hortagaan in ay indhahooda ka duwaan in meelaha qaar ay ka dhacdo cid loo roonaado ama dhiig-miirasho. Waxbarashada ay dowladdu kharashkeeda bixiso ma ah khasab inay bixiyaan hay'ado dowladeed, laakiin kala-duwanaanshaha geeddi-socodyada waxbarashada, natiijooyinka ardayda iyo xaaladaha shaqo ee macallimiinta ayaa loo baahan yahay in si toos ah wax looga qabto. Hufnaanta iyo hal-abuurku waa in aaney noqon sir ganacsi; taas beddelkeeda, waa in la baahiyaa ayna cid walba ku dhaqanto. Si taas loo xaqiijiyo, waa in la joogteeyaa daahfurnaanta iyo bedqabka (integrity) geeddi-socodka siyaasadda waxbarashada ay dowladdu bixiso.

Mar walba dowladuhu ma hoggaamin jirin waxbarashada. Taariikhiyan, waxbarashada waxaa si aan horey loo sii qorsheyn oo aan rasmi ahayn qabanqaabin jirey diin, qoys iyo ururro bulsho. Laga soo bilaabo waqtiyadii dambe ee qarnigii 18aad, dowladaha ayaa arkey fursado ay ku kobcin karaan dhaqaalahooda iyada oo loo marayo shaqaale aqoon leh iyo in dugsiyada dowladdu leedahay loo adeegsan karo kobcinta iyo sii xoojinta midnimada ummadda. Dowladaha ayaa u diyaar ahaa in ay dhabarka u ritaan kharashka badan ee ku baxa bixinta waxbarashadan sababta oo ah faa'iidooyinka ballaaran ee ay u leedahay bulshooyinka iyo dhaqaalaha. Dalalkii markaa un xoroobey ee qarnigii 20aad, ayaa dhisidda nidaam waxbarasho oo ay dowladdu leedahay uu calaamad u ahaa ka-xoroobidda gumeysiga. Waxbarashada dowladdu bixiso ayaa gebi-ahaanba looga jeeday dhiirrigelinta mabaa'dii wanaagsan ama aydiyolajiyado xukun. Qaab-dhismeeyada cusub ayaa ka xoog-batey oo liqey qaab-dhismeeyadii waxbarashada soo-jireenka ahayd.

Taas marka laga tago tago, waxbarashada ayaa sidoo kale ah badeeco gaar loo leeyahay. Helidda waxbarasho intii hore ka badan waxaa ay sii wanaajisaa fursadaha shakhsiga ah waxaana ay fursadaha noocaas oo kale ah ay ka hor-istaagi kartaa kuwo kale. Kuwa ay u suurowdo in ay kor u raacaan jaran-jarada waxbarashada ayaa kaga wanaagsan in ay helaan nolol tayadeedu sarreyso iyo dhaqaale badan. Maaddaama nidaamyada waxbarashadu aaney cid walba u keeneyn in ay heerar sare gaadho, haddan qoysaska ayaa wax walba oo ay karaan sameeya si ay u hubiyaan in duriyadooda ay noqdaan kuwa gaara halka ugu sarreysa. Tartanka noocaas ah ayaa ay ka dhalaneysaa baahi, taas oo dhinaca kale keeneysa in la helo cid bixisa agab iyo adeegyo waxbarasho. Iyada oo hadba ku xiran xaaladda iyo tilmaamaha qaranka, ayaa laga yaabaa in ay soo if-baxaan suuqyo si toos ah u bixiya adeegyo waxbarasho oo laga faa'iideysto.

TAAGEERADA LOO HAYO WAXBARASHADA AY DOWLADDU BIXISO WAA AY XOOGGAN TAHAY

Noocyada kala duwan ee waxbarashada la kala xulan karo ayaa go'aaminaya sida ay noqoneyso nolosha carruurta. Waalidiintu waa in aaney keliya si fudud u xisaabinin kharashka maaliyadeed ee ku baxa iyo faa'iidooyinka laga helo ee waa in ay sidoo kale tixgeliyaan cunsurro badan oo isku xiran. Kala-xulashada la xiriirta waxa la barayo, sida loo barayo, cidda bareysa iyo halka lagu barayo ayaa muujinaysa aragtiyaha kala duwan ee ay ka qabaan dunida iyo waxyaabaha ay ku haminayaan waalidiinta iyo daneeyeyaasha kale ee waxbarashada. Waxaa ay la halmaalaan laba dhinac oo waaweyn: gacan-ku-haynta iyo qaybinta kheyraadka, iyo qiyamka iyo waxyaabaha ay aaminsan tahay bulshada is-beddeleysa. Kala doorashada noocyada kala duwan ee waxbarashada waa mid aad ugu xiran siyaasadda waxaana ay si cad iyo si maldahanba uga muuqdaan ajandayaasha siyaasadeed. Marka laga soo tago cunsurrada kala duwan ee aydiyoolajiyadeed iyo kuwa xaaladeed, ayaa fahamka dhibaatooyinka bulsho iyo sida dowladda, dadka iyo macaahiddu (hay'aduhu) ay u wada xiriirayaan ay ku kala duwan yihiin dalalka kala duwan. Fahamkaasi ayaa ayaa saameyn ku leh sida fikirka lagu wajahayo siyaasadaha ay tahay in dowladdu ay xaqiijiso iyo cidda ay tahay in ay ka faa'iideystaan.

Cilmi-baarista la xiriirta taageerada waxbarasho ee ay dowladdu bixiso ayaa inteeda badan laga sameeyey dalalka uu dakhligoodu sarreeyo. Sahan la xiriira fahamka ay dadku qabaan oo dhowaan laga sameeyey Denmark, Faransiiska, Jarmalka, Ireland, Talyaaniga, Spain, Sweden iyo Ingiriiska ayaa muujiyey in marka la-wareystayaasha la weydiiyey mid ka mid ah saddex arrimood oo ay tahay in dhaqaale dheeri ah lagu kharash-gareeyo, waxbarashada ayaa ahayd tan ugu sarreysa ee ay dadku door-bideen oo heshey 28%, iyada oo daryeelka caafimaadkuna ahaa arrinta labaad oo heshey 22%. Halka 77% la-wareystayaashu ay door-bidayeen in la dooran karo nooca dugsiga, in ka badan 60% waxaa ay ka soo horjeesteen in dugsiyada gaarka loo leeyahay door weyn laga siiyo hannaanka waxbarashada ee qaranka.

Lafaguris lagu sameeyey xog naamuunad gaar ah oo ka mid ahayd Barnaamijka Caalamiga ah ee Sahanka Bulshada / *International Social Survey Programme* (*ISSP*) ee 2016kii oo ku saabsaneyd doorka dowladda, oo loo dalbadey warbixintan daraaddeed, ayaa muujisey taageerada loo hayo waxbarashada dowladdu bixiso oo lagu eegey 35 dal, oo ay ka mid yihiin 10 dal oo dakhligoodu dhexdhexaad yahay. Guud ahaan, 89% ka mid ah dadkii waaweynaa ee la wareystey ayaa yiri mas'uuliyadda aasaasiga ah ee bixinta waxbarashada dugsiyada waxaa leh dowladaha, halka 6% ay sheegeen in ay leeyihiin qoysaska iyo 5% oo sheegey in ay leeyihiin hay'ado kale (sharikado gaar loo leeyahay iyo ururro faa'iido-doon ah; ururro aan faa'iido-doon ahayn, ururrada samafalka iyo iskaashatooyinka; iyo ururro-diimeed). Laakiin, iyada oo ay ka muuqato in ay waayo-aragnimo xooggan u leeyihiin waxbarasho aan dowladi bixin, ayaa dadkii lagu wareystey Hindiya (46%), Filibiin (63%) iyo Chile (76%) waxaa ay muujiyeen in ay taageerada ugu hooseysa ay u hayaan waxbarasho ay dowladdu bixiso **(Jaantuska 1aad)**.

1 Warbixin-goboleedka gaarka ah ee warbixintan ku saabsan xoogagga aan dowladda ahayn waxaa si gaar ah loogu eegi doonaa gobolka Koonfurta Aasiya..

RA'YI KALA DUWANAAN JIRTA AYAA SABABEYSA DOODO LAGU TAAGEERAYO AMA LOOGA SOO HORJEEDO WAXBARASHO AY DOWLADDU BIXISO


Kuwa taageersan iyo kuwa ka soo horjeeda xoogagga aan dowladda ahayn ee ku lug leh waxbarashada ayaa dooddooda la-halmaashaa awoodda ay xoogagga aan dowladda ahayn u leeyihiin iyo sharciyadda ay u haystaan dhiirrigelinta hufnaanta, u-sinnaanta iyo u-dhammaanshaha, iyo hal-abuurka waxbaashada. Arrimahan waxaa lagu eegey aragtida ay dadku ka kala qabaan in waxbarashadu ay tahay badeeco ama adeeg lagu soo saarayo suuqa iyo in loo baahan yahay in dadku ay awoodaan in ay xushaan waxbarashada ay doonayaan.

Xoogagga aan dowladda ahayn ma ku fiican yihiin hufidda kharashka waxbarashada? Kuwa taageersan in waxbarashadu ay ku lug yeeshaan cid aan dowladda ahayn waxaa ay ku doodayaan in ay aan sinna looga maarmin maaddaama aaney dowladdu wada bixin karin dhammaan baahiyaha kala duwan ee waxbarashada. Iyada oo aan loo eegin in xoogagga aan dowladda ahayn uu wado samafal, waxa ay aaminsan yihiin iyo fikrado, ama faa'iido, haddiiba ay bixinayaan badeecooyin iyo adeegyo waxbarasho oo ka jawaabaya baahi jirtey, markaa suuq ayaa suuragal ah – xataa haddii uusan ahayn suuq caadi ah, ugu yaraan waxaa uu noqon karaa mid la qorsheeyo. Iyaga oo suuqa loo marayo, ayaa laga shaqeyn karaa xaqiijinta ujeeddooyinka hufnaanta dhinaca kharashka.

Kuwa ka soo horjeeda in xoogag aan dowlad ahayn ku lug yeeshaan waxbarashada waxaa ay ku doodaan in, haddiiba ay jiraan hab-dhaqannada lagu hufayo kharashka, ay tahay in lagu ballaariyo guud ahaan hannaanka waxbarashada ayna ku dhaqmaan dhammaan dugsiyada, haddii ay yihiin kuwa dowladda iyo kuwa kaleba. Haddii lagu doodi karo in macalimiinta dal gaar ah la siiyey mushaar aad u badan, arrintaa waa in lagu xalliyaa siyaasad qaran, ee aaney noqon sabab lagu beddelo habka loo bixinayo waxbarashada. Xoogagga aan dowladda ahayn ayaa laga yaabaa in ay kordhiyaan hufnaanta kharashka iyaga oo shaqaaleysanaya macallimiin dhallinyar ama aan u tababarneyn shaqada, taas oo aan ahayn xal waara. In si habboon la isu barbardhigo dugsiyada dowladda iyo kuwa aan dowladdu lahayn waa ay adag tahay. Dugsiyada dowladdu waxaa ay u badan yihiin in

JAANTUSKA 1AAD: Dalalkii la diraaseeyey badidoodu, in ka badan 80% waxaa ay taageersan yihiin in waxbarashadu ay dowladdu bixiso

Dadka waaweyn inta ay boqolkiiba inta sheegtey in mas'uuliyadda koowaad ee waxbarashada ay dugsiyadu bixiyaan ay saaran tahay dowladda, 2016



Isha laga soo qaatey:
Edlund iyo Lindh (2021) oo ku saleysan barnaamijka 2016 ISSP.

ay u adeegaan dadka saboolka ah, kuwaas oo waxbaristoodu ka kharash badan tahay kuwa wax haysta.

Xoogagga aan dowladda ahayn waxbarashada ma u bixiyaan si caddaalad ku dhisan oo loo dhan? Kuwa taageersan in waxbarashada ay bixiyaan xoogag aan dowlad ahayn waxaa ay ku doodayaan in kuwa waxbarashada bixiya ee aan dowladda ahayn ay gacan ka geystaan xaqiijinta xuquuqda waxbarasho. Meelo badan, ayaa xoogag aan dowlad ahayn ay buuxiyeen kaalin dhab ah oo ka banaaneyd bixinta waxbarasho, badanaana waxaa ay siinayeen kooxaha saboolka ah ee ay dayaceen nidaamyada dowladda. Dowladaha ayaa badanaa ka warwareega in ay dugsiyo ka dhisaan degsiimooyinka aan rasmiga ahayn, sida ka dhacdeyba Pakistan. Xoogagga aan dowliga ahayn waxaa ay sidoo kale gacan weyn geystaan marka ay jiraan dhibaatooyinka iyo xaaladaha degdegga ah, sida dhacdeyba ka dib dhul-gariirkii ba'naa ee ka dhacay Nepal sanadkii 2015kii. Dalka El Salvador, degaamada magaalooyinka ah ee ay ka jiraan rabshadaha iyo kooxaha qowlaysatada ah, saamiga ay ardayda dhigata dugsiyada aan ahayn kuwa dowladda waa laba-laab tan celceliska heerka qaran..

Kuwa ka soo horjeeda dugsiyada aan ahayn kuwa dowladda waxaa ay farta ku fiiqaan dhibaatooyinka ka dhasha fursadda kala xulashada dugsiyada. Haddii waalidiintu ay dooran karaa dugsiga ay doonayaan, iyada oo aaney jirin xeer-nidaamiyeyaal haga, markaa waxaa ay u badan tahay in dadka ugu hodonsan ay awoodi doonaan in ay iska bixiyaan kharashaadka dugsiyada ugu wanaagsan, oo badanaa ah dugsiyo aaney dowladdu lahayn, taas oo uga sii dareysa sinnaan la'aanta, kala-sarreynta dabaqadaha iyo takoorka. Go'aan-qaadashadu waalidiintu waxaa ay u baahan tahay macluumaad wanaagsan, laakiin macluumaadka la xiriira tilmaamaha dugsiyada lama hayo ama, haddii uu jiro, si aan sinneyn ayaa loo helaa, iyada oo dadka saboolka ah ay u helaan si ka yar sida dadka kale. Intaa waxaa dheer, waxaa jira dad badan oo ku nool meelo ay gaaristoodu adag tahay oo dadka bixiya waxbarashada ay ka warwareegaan in ay adeegyo gaarsiiyaan.

Qaar ka mid ah kuwa ay la tahay in dowladdu aaney door aasaasi ay ku yeelan bixinta waxbarashada waxaa ay ku doodaan in maamulka dowladeed uu go'aan ka qaato waxa la baranayo ama awoodda uu u leeyahay waxbarasho heerkii la rabey gaarsiisan. Waalidiinta ayaa dooddooda ku aaddan in loo baahan yahay dugsiyo gaar ah oo aan ahayn kuwa dowladda sababta oo ah welwelka ay ka qabaan in dugsiyada dowladda ee degaanka ku yaalla ay halis ku yihiin qiyamka, dhaqanka, akhlaaqda, bulshooyinka luuqadeed iyo kuwa diimeed ee ay carruurtooda ku dhex korsanayaan. Laakiin dowladaha ayaa ku doodi kara in tani ay ka hor-imaaneyso dadaalkooda ay ku hubinayaan in la helo waxbarasho loo siman yahay oo loona dhan yahay iyo in ay wax-u-dhimeyso sida ay jaangooyooyin isku mid ah ay ugu dejin lahaayeen si waxbarasho isku tayo ah loo siiyo dhammaan carruurta, iyaga oo aan la kala reebin.

Xoogagga aan dowladda ahayn hal-abuur dheeri ah miyey ku soo biiriyaan waxbarashdaa? Kuwa taageersan in xoogagga aan dowladda ahayn ay ku lug yeeshaan waxbarashada waxa ay sheegaan in ay gacan ka geysaneyso kordhinta hal-abuurka. Fikrado badan oo wax-ka-beddeley fahamkii laga qabey waxbarashada (pedagojy) waxaa ay ka soo if-baxeen daafaha nidaamyada waxbarashada dowladda ama xataa dibaddeeda. Nidaamyada waxbarashada dowladdu waxaa ay isu rogeen xafiisyo maamul oo meel dhexe laga xukumo oo aan war u haynin dadkii ay ahayd in ay u adeegaan. Dhaliil badanaa loo soo jeediyo ayaa ah in ay yareeyaan hal-abuurka, in ay khasbaan jaangoyn isku mid ah waxaana ay niyad-jebiyaan ardayda iyo macallimiinta.

Waa hawl ku adag nidaamda waxbarashada dowladdu ay bixiso in ay keenaan hal-abuur. Is-beddelladu waxaa ay u baahan yihiin in la tijaabiyo oo la eego in la ballaarin karo. Culeysyada waxaa ka mid ahaan kara caqabado maamul, wax ka dhimman kartida hay'adeed, jiritaan la'aanta dhiirrigelinta macallimiinta, waalidiinta, xaddidnaan awoodda maaliyadeed iyo faragelin iyo ka-hor-imaansho siyaasadeed. Haseyeeshee, nidaamyada waxbarashada ee dowladdu ma aha kuwo markii horeba ku talogaley in aaney hal-abuur yeelan. Waxaana qaar ka mid ah xoogagga aan dowliga ahayn tijaabinayaan in hal-abuurrada (ikhtiraacaaadka) qaarkood loo adeegsan karo waxbarashada dowladda..


Doodda laga galo hal-abuurka waxaa badanaa mugdi geliya in fikradaha loo sheego siyaabo iska-hor-imaanaya. Jaangooynta waxaa sumcadda ka dila kuwa ka soo horjeeda waxa ay u arkaan ad-adeyga, i-soo-raacda iyo kala-duwnaaan la'aanta nidaamyada waxbarashada ee dowladda, laakiin waxaa difaaca kuwa taabacsan manaahij aasaasi ah oo hubiya in dugsiygu ay xaqiijiyaan heerar jaango'an oo la isku ogyahay iyo kuwa sheega in culeyska la xiriira tartanka, oo badanaa saameyn ay ku leeyihiin dugsiyada gaarka loo leeyahay, uu yahay kan dedejiya in lagu dadaalo i-soo-raacda. Ugu dambeynta, in isku-jaangoynta ay niyad-jeiso hal-abuurka iyo in kale waxaa ay ku xiran tahay in la qeexo kuwa ay yihiin jaangooyooyinka. Ereyada ay ka mid yihiin 'isla-xisaabtan', 'madax-bannaani hoose' iyo 'xulasho' ayaa lagu amaaney oo laguna ceebeeyey ahaanshahooda mabaa'dii hay'adeed ee waxbarasho. Inkasta oo fikradahaan lagu qiimeyn karo waxa ay ku wanaagsan yihiin, haddana khasab ma aha in ay u-qiilsameynayaan in xoogagga aan dowladda ahayn, gaar ahaan kuwa gaarka loo leeyahay, door ka weyn ka hadda laga siiyo bixinta waxbarashada.

KHURAAFAAD KU SAABSAN XOOGAGGA DOWLADEED IYO KUWA AAN DOWLADDA AHAYN EE KU LUG LEH WAXBARASHADA AYAA JIRA

Toban khuraafaad oo soo noqnoqda oo ku saabsan xoogagga dowladeed iyo kuwa aan dowladda ahayn ee ku lug leh waxbarashada ayaa lagu eegey guud ahaan warbixintan dhexdeeda.

KHURAAFAADKA 1AAD.

Xoogagga Dowladeed iyo kuwa aan dowladda ahayn ayaa si cad loo kala garan karaa.



Munaaqashada ku saabsan xoogagga aan dowladda ahayn ee ku lug leh waxbarashada ayaa badanaa la halmaasha abla-ableyn laba qaybood loogu kala dhigo: dugsiyo dowladdu leedahay iyo kuwo gaar loo leeyahay. Dhabtu waxay tahay, in xaaladda jirta ay tahay xaalad intaa ka kakan iyo in farqiqa lagu kala garto aanu aad u caddeyn. Xoogagga aan dowladda ahayn ayaa ah kuwo aad u kala duwan. Waxaa ay waaxda waxbarashada ugu soo biiraan sababo kala duwan oo la xiriira fikrado, qiyam, waxa ay aaminsan yihiin iyo danaha ay leeyihiin. Qaar badan waxaa ay qabanqaabooyin hay'adeed oo rasmi ah ama aan rasmi ahayn la yeeshaan dowladda, kuwaas oo ay ka mid yihiin qandaraas-siin iyo iskaashi maamulka iyo ganacsiga gaarka loo leeyahay dhex mara, oo mugdi geliya meelaha ay ka bilowdaan waxyaabaha ay ku kala duwan yihiin

KHURAAFAADKA 2AAD .

Ilaa xadka ay gaarsiisan tahay wax gaar loo leeyahay ka-dhigista waa la garanayaa..



Sharaxaadda sida uu yahay doorka xoogagga aan dowladda ahayn waxaa uu badanaa la halmaalaa saamiga macaahidda gaarka loo leeyahay ay ka yihiin wadarta tirada ardayda diiwaangashan. Sidee dalalku u sifeyn karaan macallimiinta dugsiyada dowladda oo si ay u kaabaan dakhligooda saacadaha dugsiga ka dib wax u dhiga ardayda? Sidee loo dhihi karaa waa mid ay dowladdu leedahay nidaam waxbarasho oo buugaagta akhriska, qiimeynta ama maareynta xogta, ama xataa cuntada iyo gaadiidka cid kale ka qaata? Siyaasad dowladeed oo uu qof galaangal iyo xodxodasho leh uu ku shaqeysto (lobbyist) ma la dhihi karaa waa mid dowladeed?

KHURAAFAADKA 3AAD.


Waaxda gaarka loo leeyahay ayaa sababtey in waxbarashada ay bixiso cid aan dowlad ahayn.



Inta ugu badan dugsiyada gaarka loo leeyahay waxaa leh hal qof. Waxaa soo if-baxooda u sabab ahaa welwel dhab ah oo ay waalidiintu ka qabeen tayada dugsiyada dowladda ee hoos ugu dhacdey dayacaad daraaddeed. Markii hoos-u-dhaca tayada uu muuqdey, ayaa dadka hodonka ah iyo, xoogaa, qoysaska saboolka ah ay ka tageen nidaamkii waxbarashada dowladda, taas oo wiiqdey taageeradiisa oo keentey in aaney helin maaliyad ku filan. Isla weynaanta hoggaamiyeyaasha siyaasadeed ayaa kordhisey in aaney waxba u arkin sinnaan la'aanta waxaana ay yareysey sida ay u doonayaan in ay ilaaliyaan waxbarashada dowladda iyo dadka saboolka ah ee ka-faa'iideysanayaba.

KHURAAFAADKA 4AAD.

Waxbarashada dowladdu waa mid loo siman yahay .



Qoysaska ayaa badanaa uu kharash badan kaga baxaa waxbarashada kaas oo ah ujuurooyin qarsoon, lacago jeebka toos looga bixiyo oo laga baaqsan karey iyo kharashaad dheeri ah oo kaga baxa waxyaabaha dheeriga ah ee aaney bixin dugsiyada dowladdu leedahay. In kasta oo ay badan tahay in la eedeeyo nidaamyada waxbarashada ee albaabada u furey dugsiyo aan ahayn kuwo dowladdu, taas oo uga sii dareysa sinnaan-la'aan, haddana qaar badan oo nidaamyada waxbarashada ee dowladda ayaa ka hortegi waayey dhalashada dabakhado iyo takoor.

KHURAAFAADKA 5AAD.


Waalidiintu waxaa ay dugsiyada ku xushaan macluumaad xooggan oo ku saabsan tayada.



Kuwa taageera dugsiyada aan dowladdu lahayn iyo in la helo dugsiyo la kala xusho waxaa ay aasaasiyan maskaxda gashadeen in waalidiinta, maaddaama ay iyagu waxbarashada u baahan yihiin, ay heli karaan macluumaad ku saabsan dugsiyada ugu wanaagsan oo macluumaadkaasna u adeegsan karaa si hufan. Dhab ahaan, xogta ku saabsan raadka dugsiyadu waa mid aad ugu adag dalalka badidoodu in ay maareeyaan ayna dadka gaarsiiyaan. Waalidiintuna badanaa waa ay iska indho-tiraan xogta noocaas ah, iyaga oo sidaana ku xusha dugsiyo ku soo jiita sababo kale: diinta ay aaminsan yihiin, u-dhowaanshaha iyo tilmaamaha kooxaha bulsho ee ay ka tirsan yihiin (demographic) ardayda.

KHURAAFAADKA 6AAD.

Tartanka ayaa sababa in uu sii wanaagsataado dugsiga.



Isla-xisaabtanka iyo tartanka caafimaadka qaba ayaa dhiirrigeliya in dadku sida ay yihiin ka sii wanaagsanaadaan. Dhinaca dhaqaalaha, sharikadaha ayaa tartama si ay u baaqi ahaadaan, maaddaama sababta ay u jiraanba ay tahay in ay faa'iido sameeyaan. Laakiin ma cadda sida xaaladahaasi ay ku yihiin waxbarashada. Daraasadaha muujinaya raadadka uu tartanku ku leeyahay guud ahaan nidaamka waxbarashadu waa ay yar yihiin, taas oo ay sabab u tahay in mowduucu uu yahay mid kakan, waxyaabihii laga soo ogaadeyna waxaa ay ahaayeen kuwo aan biyo-kama-dhibcaan ahayn. Kaba sii xumee, tartanka waxaa uu keeni karaa in dugsiyada aan dowladdu lahayn ay waalidiinta ku indho-sarcaadaan waxyaabaha ay waalidiintu ku hamiyayaan, halkii ay ku dadaali lahaayeen hab wanaagsan oo carruurta wax loo baro

KHURAAFAADKA 7AAD.

Dugisyada iyo jaamacadaha gaarka loo leeyahay ayaa ka wanaagsan kuwa kale.



caddeynta ay ku tiirsan yihiin tusayaasha qiimeeya sida ay u kala wanaagsan yihiin dugsiyada sida ay u soo wariso saxaafadda ayna u akhristaan waalidiinta. Dhab ahaanse, qaadashada ardaydu waa ay kala duwan tahay, iyada oo waalidiinta ladan, aad wax u bartey oo hammigoodu aad u sarreeyo ay aad ugu badan tahay in ay doortaan dugsi gaar loo leeyahay. Dhinaca kale dugsiyada gaarka loo leeyahay ayaa laga yaabaa in ay awoodaan in ay kala saafaan ardayda si ay u xushaan kuwa kor u qaadi kara suuragalnimada ay ku heli karaan natiijooyin sare. Marka cunsurrada noocan ah raadkooda la xakameeyo, farqiqa u dhexeeya dugsiyada gaarka loo leeyahay iyo kuwa dowladda ayaa caadi ahaan yaraada ama meesha ka baxa.

Is-barbardhigga heerarka baasitaanka dugsiyada gaarka loo leeyahay iyo kuwa dowladda ayaa badanaa ah

KHURAAFAADKA 8AAD.


Dugsiyada gaarka loo leeyahay waxaa ay xal u yihiin culeyska ardayda aan dugsi dhigan



Iyada oo in ka badan 350 milyan ardayda dugsiyada aasaasiga iyo kuwa sare ah ay dhigtaan dugsiyada gaarka loo leeyahay, ayaa dhibaato ay lama huraan noqon lahayd haddii ay ardaydaas ku soo wareegi lahaayeen nidaamka waxbarashada dowladdu bixiso. Haseyeeshee, dugsiyada gaarka loo leeyahay waxaa laga jecel yahay degaamada magaalooyinka ah, halkaas oo ku dhowaaad dhammaan carruurtu ay dhigtaan dugsi. Badanaana kuma yaallaan degaannada miyiga ah. Dalalka uu dakhligoodu hooseeyo iyo kuwa uu dhexdhexaadka yahayba, carruurta qoysaska ugu ladan ee ah 20% ayaa 10 laab u badan tahay in ay dhigtaan dugsi gaar loo leeyahay marka loo eego carruurta aynigooda ah ee qoysaska ugu saboolsan ee 20% ah..

KHURAAFAADKA 9AAD.

Ganacsiga gaarka loo leeyahay ayaa xal u ah nusqaamaha maaliyadeed ee waxbarashada.



Waxaa jirta rajo weyn oo badanaa la qabo oo ah in ganacsiga gaarka loo leeyahay uu door muhiim ah ka qaadan karo maaliyadsiinta waxbarashada si uu gacan uga geysto xaqiijinta SDG 4. Ilaa hadda ma jirto caddeyn loo hayo in ganacsatadu ay doonayaan ama awood u leeyihiin in ay sidaa sameeyaan. Laakiin meelo kale ayaa ay gacan ka geysan karaan, tusaale ahaan bixinta cashuurta, gaar ahaan dalalka dakhligoodu hooseeya iyo kuwa uu dhexdhexaadka yahay kuwaas oo fursadaha heerarka cashuurta gudaha laga qaado ay hooseeyaan oo ayna aad u badan yihiin fursadaha cashuurta loola dhuuman karo ama bixinteeda looga baaqsan karo. Ganacsiga gaarka loo leeyahay ayaa si ka xooggan sida hadda u hoggaamin kara kobcinta xirfadaha adeegyada daryeelka carruurta si waafaqsan xeer-nidaamiyeyaasha qaran

KHURAAFAADKA 10AAD.

Xeer-nidaamiyeyaal dejiyo ayaa wax ka qaban kara guud ahaan welwelka laga qabo waxbarashada ay bixiso cid aan dowladda ahayn.



Waxaa la isku waafaqsan yahay in ay tahay in xeer-nidaamiyeyaal loo sameeyo hawl waxbarsho oo ay bixiso cid aan dowladda ahayn. Laakiin xeer-nidaamiyeyaashu si macno ku fadhida wax ugama qabanayaan sida loo dhiirrigelinayo u-sinnaanta iyo tayada guud ee hannaanka waxbarashada. Dowlado yar ayaa korjoogteeya in qoysaska ladan ee carruurtooda u beddela dugsiyo gaar loo leeyahay ay kala takooreyso nidaamka waxbarashada ama sida kharashka ay qoysasku ku bixiyaan waxbarashada ay u kordhineyso sinnaan la'aanta. Dowlado badan ayaa oggol in la xusho dugsiga la dhiganayo. Kuwo yar ayaa xeer ku nidaamiya casharrada dheeriga ah ama galaangal-sameynta, taas oo badanaa aan qeexneyn oo laguna hoos qariyo iskaashi. Xataa kuwo intaa ka sii yar ayaa haysta sababo ay tahay in ay si taabogal ah u hirgeliyaan oo ay u dhaqangeliyaan xeer-nidaamiyeyaasha.

Ku dhowaad 25 sano ka hor ayaa dalka Mareykanka, waxaa bilaabmey in ay soo if-baxdo caddeyn la xiriirta raadad sinnaan la'aan ah oo ka dhashey qaababka hay'adeed ee cusub ee waxbarashada dowladdu bixiso oo ku dhisan kala xulashada dugsiyada, qoreyaasha daraasad hore ayaa ku sugey markii ay wixii daraasadda lagu ogaadey ay ku soo koobeen laba su'aalood: Yaa xulanaya? Yaa wax ku waayeya? (*Fuller and Elmore, 1996*). Iyada oo caddeymo badan oo kale ay ka soo baxayso habraacyada (*Mechanics*), taaboganimada iyo raadadka ee kala-xulashada dugsiyada ee guud ahaan dunida, ayaa warbixinta the *Global Education Monitoring Report* waxaa ay su'aalahaas weydiineysaa guud ahaan dadka dunida. Afar dhinac oo ka mid ah hawsha xoogagga aan dowladdda ahayn – bixinta, nidaaminta, maaliyad-siinta iyo saameynta – ayaa loo hadlayaa waxbarshada aasaasiga (hoose/dhexe) iyo tan dugsiyada sare, taas oo la sii raacin doono in si gundheer dhinaycadan looga eego heerarka kala duwan ee waxbarashada, kuwaas oo dareen intaas ka yar la siinayo: waxbarashada xannaanada ah, tacliinta sare iyo waxbarashada farsamada, mihnadda iyo tan dadka waaweyn

BIXINTA WAXBARASHADA

Isqorista dugsiyada aan ahayn kuwa dowladda ayaa sii kordheysey. Saamiga dugsiyada gaarka loo leeyahay ee dunida ayaa boqolkiiba 7 dhibcood ay ku korodhey muddo ilaa 10 sano ah, taas ahayd 1% sanadkii 2002 oo noqotey 17% sanadkii 2013kii dugsiyada aasaasiga ah iyo min 19% oo uu ahaa sanadkii 2004 oo uu 26% noqdey sanadkii 2014kii kan waxbarashada dugsiga sare, laakiin tan iyo waqtigaas ilaa xad sidiisii ayuu ahaa. (**Jaantuska 2aad**).


Lahaanshaha, maareynta iyo maaliyadsiinta ayaa caadi ahaan ah tilmaamaha loo adeegsado qeexidda waaxda gaarka loo leeyahay. Xiriirka kuwa adeegga waxbarashada bixiya ay la leeyihiin dowladda, waxyaabaha ku dhiirrigelinaya waxbarashada iyo qiimahooda ayaa loo adeegsan karaa si loo kooxeeyo. Lafagurayaasha warbixintan ayaa ogaadey in dugsiyada diinniga ah laga heli karo 124 ka mid ah 196ka dal, badanaana meelaha ay xaaladaha degdegga ahi ka jiraan. Dugsiyada faa'iido-doonka ah waa laga tiro badan yahay, marka laga reebo meelo kooban, sida Imaaraadka Carabta ee Midoobey. Dugsiyo kala duwan

JAANTUSKA 2AAD:


Saamiyada ardayda dhigata dugsiyada gaarka loo leeyahay waxaa ay ugu badan yihiin Koonfurta Aasiya

Boqolleyda ardayda dhigata dugsiyada gaarka loo leeyahay, oo loo eegey heerka waxbarashada, 1990–2019

a. Waxbarashada dugsiyada aasaasiga ah



b. Waxbarshada dugsiyada sare



GEM StatLink: https://bit.ly/GEM2021_Summary_fig2
Source: UIS database.

oo qiimahoodu u macquul yahay, badanaana hal qof uu leeyahay oo ka jira dalalka dakhligoodu hooseeyo iyo kuwo uu dhexdhexaad yahay oo ku yaalla dalalka ka hooseeya Saxaraha Afrika iyo Aasiya ayaa loo yaqaannaa dugsiyada gaarka loo leeyahay ee ay ujuuradoodu hooseyso.

Dugsiyada dowladda iyo kuwa aan dowladdu lahayn waa ay ku kala duwan yihiin ardayda ay qaataan iyo kheyraadka ay haystaan. Waa ay yar tahay tirada carruurta saboolka ah ee heli kara fursad ay ku tagaan dugsiyada gaarka loo leeyahay. Si ay u qiimeeyaan tayada waxbarashadu, waalidiintu waxaa ay eegaan tirada ardayda ee fasalkii, tayada iyo dadaalka macallinka, sida dugsigu uu wax uga qabto arrimaha soo kordha, anshaxa iyo bedqabka, luuqadda waxbarashadu ku baxdo, diinta, sinjiga iyo dhaqanka. Dalka Ingiriiska, lafaguris lagu sameeyey 18,000 dugsiyo dalka Ingiriiska ka jira oo dugsiyada dowladda lagu barbardhigayey dugsiyo dowladeed oo cid aan dowladda ahayni maamusho ayaa lagu soo ogaadey in macallimiin aan tababarneyn ay ku badan yihiin nooca dambe. Dugsiyada dowladda iyo kuwa gaarka loo leeyahay waxaa ay ku kala duwanaan karaan kheyraadka kale. Dalalka Latin America, celceliska tirada kombuyutarrada ee halkii arday ee dhigta dugsiyada gaarka loo leeyahay ku soo aadda ay tahay laba-laabka tan dugsiyada dowladdu leedahay.

Caddeynta badideeda ayaa muujineysa in faa'iidada waxbarasho ee ku jirta dhigashada dugsi gaar loo leeyahay ay xaddidan tahay. Xogta 31 dal oo isugu jira kuwo dakhligoodu hooseeyo iyo kuwo uu dhexdhexaad yahay ayaa muujisey in qiyaasta faa'iidada laga helo dhigashda dugsi gaar loo leeyahay ay hoos u dhacdey kala-bar ilaa saddex meeloodow laba meel ka dib marka la waafajiyo dhaqaalaha qoyska. Intaa waxaa dheer, inkasta oo aqoonta aasaaska ah ee ay bixiso cid aan dowlad ahayn ay kaalimaha bannaan buuxin karto muddada dhow ama muddada dhexe, haddana waxaa ka dhalan karta kala-takoornaan iyo sinnaan la'aan. Dalka Sweden, 29 ka mid ah 30ka golayaasha degaannada ee dowladaha hoose waxaa ka jirey fasallada ugu dambeeya ee dugsi dhexe oo aad u kala soocan; 16 ka mid ah, kala-soocnaanta ayaa u muuqdey in uu inta badan sabab u ahayd kala-xulashada dugsiyada. Inkasta oo tartanka kala dhexeeya dugsiyada aan ahayn kuwa dowladda uu keeni karo in dugsiyada dowladdu ay wanaagsanaadaan, haddana keliya jiritaanka dugsiyo gaar loo leeyahay iyo dugsiyo kale ay ka jiraan meelo u dhow in aaney ahayn dhiirrigelin ugu filan in maamullada dugsiyada dowladda ay tallaabo-qaadaan haddii aaney haysan kheyraadkii maaliyadeed ama madax-bannaanidii ay kaga fal-celin lahaayeen.

Casharro dheeri ah oo gaar loo siiyo ardayga ayaa caadi ka noqdey ku dhowaad meel walba oo ka mid ah dunida. Arrintan, oo ku badneyn dalal badan oo Bariga Aasiya iyo Dalalka Carabta ah, ayaa sidoo kale ku baahaysa gobollo aan horey ugu badneyn, sida Afrikada Saharaha ka hooseysa iyo waqooyiga Yurub. Doonista casharro dheeri ah ayaa badanaa lala xiriiriyaa baahida ay ardaydu u qabaan in ay u diyaar-garoobaan imtixaanaad muhiim ah si ay u keenaan natiijo wanaagsan oo ay kuwa kale kaga hormaraan. Laakiin raadka ay casharrada dheeriga ah ku leeyihiin natiijada ardayda kala duwan ayaan ahayn nooc keliya: Daraasadaha qaarkood ayaa ogaadey in ay raad wanaagsan ku leeyihiin ardayda aadka u liidata, halka daraasade kale ay muujiyeen in casharrada dheeriga ah aaney raad wanaagsan oo nidaamsan ku lahayn natiijada ardayga. Intaa waxaa dheer, casharrada dheeriga ah waxaa ay wax u dhimi karaan sida uu u shaqeeyo nidaamka waxbarashada isaga oo raad xun ku yeelanaya hab-dhaqanka ardayga iyo macallinkaba.

Siyaasadda soo-iibsashada iyo qaybinta buugaagta akhriska ayaa kala duwan marka ay timaaddo ku-lug-lahaanshaha dowladda. Dalalka qaar, daabacaadda waxaa aasaasiyan sameeya hay'ado ay dowladdu leedahay ayna gacanta ku hayso; dalal kalena, waxaa jira hannaan nashrin (daabacaad) oo isugu jira mid dowladeed iyo mid gaar loo leeyahayba. Dalal dhowr ah oo dakhligoodu sarreeyo, oo ay ka mid tahay Spain, ayaa inta badan soo-saarista buugaagta akhriska u daaya ganacsato ka shaqeysta, iyada oo dowladduna ay siineyso dhabbe-tuseyaal ayna ansaxineysa soo-jeedimaha. Wada-tacaamulka ka dhexeeya daabacayaasha caalamiga ah, deeq-bixiyeyaasha iyo danleyda degaanka ayaa badanaa sii adkeeya in dalalka saboolka ah ay u soo wareegaan daabacayaal heer degaan ah. Tusaale ahaan, ganacsiga buugaagta akhriska waxaa xoog ku leh Edicef, garab qaabilsan daabacaadda buugaagta akhriska oo qayb ka ah sharikadda Faransiisku leeyihiin ee Hachette Livre, oo ah mid ka mid ah daabayaasha ugu weyn dunida.

Kuwa riixaya in buugaagta waxbarashada laga dhigo kuwo qaab elektaroonig ah (digital) ah u sameysan oo ay hoggaaminayaan sharikadaha nashrinta (daabacaadda) ee waaweyn iyo kuwa tiknolojiyada. Pearson, oo ah tan hoggaamisa suuqa caalamiga ah ee daabacidda/nashrinta buugaagta waxbarashada, ayaa hal-ku-dheggeeda oo ahaa 'tan dunida ugu weyn ee daabacda buugaagta akhriska iyo agabka barista ee *internet*-ka' u beddeshey 'sharikadda barashada elektaroonigga ah ee dunida', iyada oo si xooggan diiradda u saareysa waxbaridda iyo qiimeynta in la sii

mariyo *internet*-ka. marka laga soo tago daabacayaasha buugaagta akhriska ee heer gobol iyo kuwa caalamiga ah, sharikadaha aadka u waaweyn ee tiknolojiyada ayaa soo galey waaxda waxbarashada internet-ka, arrintaas oo sii xoogeysatey intii uu jirey cudurka dunida ku wada faafey ee COVID-19. Lafaguris lagu sameeyey waayo-aragnimada geeddi-socodka soo-iibsashada tiknolojiyada waxbarashada ee dalka Mareykanka ayaa lagu ogaadey in maamullada waxbarashada degmooyinka iyo kuwa dugsiyaduba ay badanaa ka saa'id-caleeyeen kumanaan qof oo suuqa ku iibiya tiknolojiyadda waxbarashada oo suuqgeyn ballaaran u sameynaya badeecooyin aad u kala duwan.

Dowladaha ayaa cid kale ka soo qaadanaya adeegyo dheeri ah oo kaaba waxbarashada. Kuwa farta ku goda adeegyada cid kale laga soo qaato ayaa ka baqa in gacan-u-gelinta ganacsatadu ay wax u dhimi karto adeegyada dowladdu bixiso iyo xirfadlenimada. Lafaguris *Australian* ah ayaa lagu soo ogaadey in kororkii qandaraas-ku-bixinta shaqaalaha nadaafaddu ay ka dhalatey in ay tiro bataan qandaraaslayaashu, ay kordhisey inta jeer ee ay dhacdo in lacago aan u qalmin la siiyo kuwa shaqada qabanaya, hoos u dhacdo saacadaha nadaafinta iyo in ay hoos u dhacaan jaangooyooyinka caafimaadka iyo bedqabka shaqaalaha hawsha ku guda jira.

MAAMULIDDA IYO NIDAAMINTA

Maamulidda kuwa aan dowladda ahayn ee adeeg waxbarasho bixiya badanaa waa mid kala googo'an. Maamul wanaagsan iyo xeer-nidaamiyeyaal taabogal ah ayaa muhiim u ah awoodda ay dowladdu u leedahay in ay bixiso waxbarasho loo siman yahay oo tayo wanaagsan. 94 dal, ayaa qorsheyaasha ama istiraatiijiyadaha waaxda ay ku xisaabtamayaan kaalin ay xoogagga aan dowladda ahayn ku yeeshaan bixinta waxbarashada ama gaarsiinta adeegyo kale. Dalalka qaar ayaa wasaarado ama waaxo ay wadaagaan mas'uuliyadda. Kala-googo'naanta, isuduwid la'aanta ama isku- wax-ku-mashquulidda ama mas'uuliyadaha oo aan si cad loo qeexin ayaa saameyn xun ku yeelan kara u-sinaanta iyo tayada. Wasaaradaha waxbarashada ayaa mas'uul ka ah xoogagga waxbarashada bixiya ee aan dowladda ahayn ee 83% dal, halka 13% ay leeyihiin hay'ado mid ka badan. Keliya 39% dalalka ayaa leh waax, qayb ama hay'ad waxbarasho oo gaar loo leeyahay ee heer qaran ah oo ka hooseysa wasaaradda waxbarashada. Wasaaradaha diinta, ayaa beddelkiii wasaaradaha waxbarashada, mas'uul ka ah dugsiyada diiniga ah ee 22% dalalka dunida – iyo 70% Waqooyiga Afrika iyo Galbeedka Aasiya.

Hababka maaliyadsiinta ayaa raad ku leh maamulidda. Xoogagga aan dowladda ahayn ayaa dowladda ka hela taageero maaliyadeed oo toos ah iyo mid aan toos ahayn oo noocyo kala duwan ah: gargaar la siiyo ardayda (79% dalalka), lacago lagu kaabo waalidiinta (19%), kabitaanka mushaaraadka macallimiinta ama qaabab kale oo hawlgaleed (ilaa 60%) iyo amaaho ama deeqo (19%). Iskaashiga maamulka iyo dowladda ayaa la halmaala wada-shaqeyn heerar kala duwan oo dhex mara dhinacada iyo sidoo kale qabanqaabooyin siyaasad iyo xeer-nidaamin ah oo kala duwan. Dib-u-eegis lagu sameeyey daraasado la xiriira hababka maaliyadsiinta ayaa lagu ogaadey in raadku uu badanaa ahaa mid xun. Ugu yaraan saddex meelood laba ka mid ah 98 daraasadood, ayaa lacagaha kaabista ah, barnaamijyada waraaqaha wax qiime leh lagu beddesho ama barnaamijyada ay dowladdu maaliyadda siiso ee ay cid gaar ahi maamusho ayaa la ogaadey in raadka ay reebayaan uu yahay mid xun.

Xeer-nidaamiyeyashu waa in ay sii wanaajiyaan tayada iyo u-sinnaanta waxbarashada. Ku dhowaad dhammaan dalalku waxaa ay leeyihiin xeer-nidaamiyeyaal qeexaya shuruudaha loogu baahan yahay sameynta iyo hawl-gelinta dugsiyo aan ahayn kuwa dowladda, oo ay ka mid tahay diiwaangelinta iyo rukhsad-siinta. 80% dalalku, waxaa ay leeyihiin xeer-nidaamiyeyaal tilmaamaya shuruudaha looga baahan yahay dhulka, sida cabbirka dhulka ama dhismaha iyo cabbirka ugu yar ee fasallada looga baahan yahay. Gobolka dalka Hindiya ka tirsan ee Haryana, dhismayaasha laga rabo dugsiyo waa in ay ahaadaan kuwo uu dugsigu yeelanayo ama u kireysan ugu yaraan 20 sano. Gobolka kale eee Uttar Pradesh, ayaa laba shuruudood ku xiraya aqoonsashada dugsi: in bedka dhulka ku soo aadaya ardaygii (9m2) iyo cabbirka fasalka (180m2). Xeer-nidaamiyeyaasha ayaa sidoo kale nidaamiya biyaha iyo fayadhowrka. 47% ka mid ah dalalka haya xogta, shuruudaha waxaa ka mid ah in musqulo u kala gaar ah labada jinsi ay lahaadaan dugsiyada aan dowladdu lahayn. 74% dalalka, waxaa ay leeyihiin xeer-nidaamiye hagaya saamiga tirada ardayda ku soo aadeysa macallinkii. Ilaa 45% dalalku waxaa ay leeyihiin xeer-nidaamiyeyaal la halmaala habraacyada qaadashada ardayda ee dugsiyada aan ahayn kuwa dowladda, halka 67% ay leeyihiin xeer-nidaamiyeyaal hagaya ujuurada ay dugsiyada aan ahayn kuwa dowladdu ka qaadaan ardayda waxbarashada khasabka ah. Tiro wax yar ka badan kalabar dalalka ayaa leh xeer-nidaamiyeyaal la xiriira manhajka. 10kii sano ee la soo dhaafey, 21 dal ayaa soo saarey xeer-nidaamiyeyaal la xiriira faa'iido ka-sameynta dugsiyada iyada oo 80 dalna ay soo saareen kuwo la xiriira shahaaddo-siinta macallimiinta.

Dhaqangelinta oo jilicsan iyo isla-xisaabtanka oo aan dad ku filneyn ayaa wax u dhimaya tayada iyo u-sinnaanta waxbarashada. Jiritaanka xeer-nidaamiyeyaal macnaheedu ma aha in hay'adaha bixiya waxbarashada ee aan dowladdu lahayn ay u hoggaansamayaan. Qaar ka mid ah dalalka dakhligoodu hooseeyo iyo qaybta u hooseysa kuwa dakhligoodu dhexdhexaadka yahay, habraacyada diiwaangelinta oo ah mid kakan, kharash badan ama aad u dheer ayaa ka cajis-geliya in kuwa bixiya waxbarashadu ay raadsadaan aqoonsi rasmi ah. Xukuumadda gobolka Lagos ee dalka Nayjeeriya ayaa wixii loo soo gaarey sanadkii 2021kii ansaxisey keliya 1 ka mid ah 4tii dugsi ilaa 20,000 dugsi oo gaar loo leeyahay. Ugu yaraan 27 ayaa istaatisko ahaan aqoonsadey jiritaanka dugsiyo aan diiwaangasheyn. Uganda ayaa dugsiyada aan ahayn kuwa dowladda u kala abla-ableysey kuwo rukhsad haysta, kuwo diiwaangashan iyo kuwo aan diiwaangasheyn: 14% dugsiyada aasaasiga ah iyo 13% dugsiyada sare ayaa aan diiwaangasheyn. Kormeer la'aanta waxaa ka dhalan kara in ardayda loo xusho si dadban. Magaalada Bogotá ee dalka Kolombia, barnaamijka *Concession School* ee lagu caawiyo ardayda baahida gaarka ah qaba ee dugsiyada ay dowladdu aaney maamulin ee ay kharashka ka bixiso, oo loogu talogaley in ay u adeegaan ardayda nugul, ayaa lahaa siyaasad hagaysa oo ku saleysan takoor-la'aan iyo dhowaanshaha degaanka; xaqiiqo ahaan, inkasta oo aaney rasmi ahayn, haddana ardayda waxaa lagu qaadanayey si ku saleysan natiijada ay ka keeneen imtixaanaadka waxbarashada.

Geeddi-socodyada iyo jaangooyooyinka hubinta tayada waa lagu kala duwan yahay. Xaqiiqo ahaan dal kasta waxaa uu jaangooyooyinka dugsiyada aan ahayn kuwa dowladda uu hirgelintooda u adeegsadaa kormeerka dugsiyada. 81% dalalku, waajibkan waxaa uu saaran yahay dhammaan noocyada dugsiyada aan ahayn kuwa dowladda; 6%, waxaa uu saaran yahay dugiysada ay dowladda kaabto. Intaa waxaa dheer, 81% dalalku waxaa ay leeyihiin xeer-nidaamiyeyaal waajib ka dhigaya in dugsiyada aan ahayn kuwa dowladdu ay ka-qaybqaataan daraasadaha ballaaran ee qiimeynta. In ka badan kalabar dalalku, waajibku waxaa uu saaran yahay dhammaan noocyada dugsiyada aan ahayn kuwa dowladda, halka 12% uu khuseeyo keliya dugsiyada ay dowladdu kaabto.

Habab isla-xisaabtan, ciqaabo iyo ka-magid oo taabogal ah ayaa sidoo kale xoojin kara in loo hoggaansamo xeerarka. Dowladdu waa in ay kuwa bixiya waxbarashada kula xisaabtanto u-hoggaansanaanta jaangooyooyinka tayada, dadaalka la gelinayo, bedqabka iyo u-dhammaanshaha. Ku dhowaad dhammaan dalalku waxaa ay soo rogaan ciqaabo, dugsiga oo la xiro ama rukhsadda oo lagala noqdo haddii dugsiyada aaney dowladdu lahayn u hoggaansami waayaan xeer-nidaamiyeyaasha. Ilaa 54% dalalku waxaa ay sidoo kale xeer-nidaamiyaan muddadaas dugsiyada la xiri karo. Ilaa 90 dal ayaa leh xeer-anshaxeed ama hab-dhaqan loogu talogaley macallimiinta iyo shaqaalaha dugsiyada, kuwaa oo badanaa ay soo hoosgelayaan kuwa aan dowladda ahayn ee bixiya adeeg waxbarasho.

Casharada dheeriga ah ee gaarka loo bixiyo ayaa ay aad u yar tahay in xeer-nidaamiyeyaal ay yeeshaan. Casharada gaarka loo bixiyo ayaan xeer-nidaamin u sameyn 48% dalalka. Keliya 53 dal ayaa xeer-nidaamin uga dhex sameeyey shuruucda waxbarashada, halka 19 dal ay xeer-nidaamin uga dhex sameeyaan shuruucda ganacsiga. 31 dal, ayaa xeer-nidaamiyeyaashu cayimaan shahaaddada looga baahan yahay macallimiinta bixiya casharada gaarka ah; 10 dal ayaa si cad macallimiinta uga xaaraantinimeynaya in ay casharro gaar ah bixiyaan. Shiinaha, ayaa sharci la soo saarey 2021 waxaa uu sharikadaha bixiya manaahinta dugsiyada khasabka ah in ay faa'iido ka sameeyaan ama ay raasamaal ka soo saaraan, kaasoo diidaya in la bixiyo rukhsado cusub. Sharikadaha ayaa looga baahan yahay in ay isu beddelaan kuwo aan faa'iido-doon ahayn si ay u sii shaqeeyaan. Dowladda ayaa abuurta waax u qaabilsan nidaaminta iyo korjoogteynta sharikadaha bixiya casharada gaarka ah.

MAALIYADDA

Dowladuhu waa ay ku kala duwan yihiin go'aamadooda la xiriira in maaliyad la siiyo iyo sida loo siinayo dugsiyada aan ahayn kuwa dowladda. Dalka Kanada, dowladdu waxaa ay bixisaa 30% kharashka dugsiyada gaarka loo leeyahay halka kuwa dowladdu ay ka bixiso 94% kharashka ku baxa. Dalka Netherlands, dhammaan dugsiyada, nooca ay doonaan ha ahaadeen, waxaa ay qayb ka helaan deeqo ay dowladdu ugu talogaley kharashaadka shaqaalaha iyo hawlgelinta iyo maaliyado dheeri ah oo ay helayaan ardayda saboolka ah ee qaba baahiyo waxbarasho oo gaar ah. Tan iyo sanadkii 2000, dalal badan, oo ay ka mid yihiin, Shiinaha, Hungary, Sweden iyo Ingiriisku, ayaa waxaa ay arkeen in uu kordhey saamiga is-qorista ardayda ee dugsiyada gaarka loo leeyahay ee dowladda ku tiirsan, kuwaas oo ah kuwa ugu yaraan 50% maaliyaddooda ka hela dowladda.

Dowladuhu waxaa ay maalgeliyaan keliya qayb ka mid ah kharashaadka dugsiyada aan ahayn kuwa dowladda. Dalka Bangladesh, in ka badan 16,000 dugsiyada sare ee aan ahayn kuwa dowladda iyo 7,600 madraso, kuwaas oo marka la isu geeyo ay dhigtaan 96% ka mid ah dhammaan ardayda, ayaa hela lacago bil kasta la siiyo

oo loogu talogaley musharaadka macallimiinta. Laakiin dalka Haiti, kaas oo 85% dugsiyada aasaasiga ah ay yihiin kuwo aan dowladdu lahayn, ma bixiyo kharashka mushaaraadka. Dalka Hindiya, keliya 6% dugsiyada aasaasiga ah iyo kuwa sare ayaa sanadkii 2019/20 heley deeqo loogu talogaley mushaaraadka macallimiinta. Dalka Indonesia, madrasooyinka iyo dugsiyada Islaamiga ah ee la seexdo, oo loo yaqaanno pesantren, oo ka dhigan 35% dhammaan dugsiyada gaarka loo leeyahay, ayaan laga hor-istaagey in ay helaan maaliyadaha qaar.

Dowladaha qaar ayaa taageera qaadashada dugsiyada gaarka loo leeyahay ee qaar ka mid ah ardayda saboolka ah. Dalka Hindiya, Xeerka Xuquuqda Waxbarashada ee soo baxay 2009kii ayaa dugsiyada gaarka loo leeyahay ku waajinayey in ay 25% ardayda loo qaadanayo fasalka 1aad ay siiyaan carruurta qoysaska uu dakhligoodu hooseeyo; waxaana ay taas ku beddelanayaan, in dowladdu ay u celiso kharashka wax-u-dhigistooda. Dhinaca kale, dalka Côte d'Ivoire, oo tirada ardayda dhigata dugsiyada sare ee laga kaabo kharashka ay afar-laab noqotey muddadii u dhaxaysay 2010/11 ilaa 2017/18, ayaan ku talogelin in waxbarashada si siman loo helo.

Qoysaska waxaa haysta culeys mug leh iyo kala-doorasho aan sahlaneyn. Marka loo eego saamiga uu ka yahay GDP-ga, kharashka waxbarashada ee qoysku waa 0.3% dalalka dakhligoodu sarreeyo iyo 1% oo uu ka yahay dalalka uu dakhligoodu hooseeyo iyo kuwa uu dhexdhexaadka yahay. Dalka El Salvador 1.2% ayuu ka yahay GDP-ga, 1.5% Morocco, 1.8% Hindiya iyo 2.5% oo uu ka yahay dalka Ghana. Iyada oo 20% qoys ugu saboolsan aaney wax kharash ah ku bixin waxbarashada dalalka Argentina, Costa Rica, Filibin iyo Zambia, haddana 20% qoys ee ugu hodonsan waxaa ay ku kharashgareeyaan 0.5'% iyo 1.7% GDP-ga.

Waxbarashada dowladdu bixiso badanaa ma aha lacag la'aan. Ku dhowad saddex-meelood-meel kharashka qoysaska dalalka dakhligoodu hooseeyo iyo kuwa uu dhexdhexaadka yahay waxaa uu ka yimaadaa qoysaska ay carruurtoodu dhigato dugsiyada dowladda. Qoysaska ay carruur u dhigato dugsiyada gaarka loo leeyahay ayaa bixiya 80% ka ah kharashaadka dalalka Guatemala iyo Pakistan. Qoysaska ay carruur u dhigato dugsiyada dowladdu leedahay ayaa 60% bixiya kharashaadka dalalka Shiinaha iyo Kenya. Degaamada miyiga ah ee Jamhuuriyadda Midowday ee Tanzania, in ka badan afar-meelood-saddex ka mid ah qoysaska ayaa u arka in uu waajib ku yahay qaaraanka ay ku biiriyaan dugsiyada aasaasiga ah, iyaga oo xusey in laga yaabo in carruurtu ay ciqaab la kulmaan haddii lala daaho lacagta lagu bixinayo dugsiga. Dalka Australia, kharashka ay bixiyaan waalidiinta ayaa uga sii dara sinnaan la'aanta dugsiyada u dhaxaysa.

Casharro dheeri ah oo gaar loo bixiyo ayaa ah kharash badan oo ka baxa qoysas badan. Dalka Shiinaha, ayaa qoysasku waxaa ay ilaa saddex-meelood-meel guud ahaan kharashka uga baxa waxbarashada uu yahay kharasha ku baxa dugsiga dibaddiisa sanadkii 2017kii, kaas oo u dhexeeya 17% qoysaska miyiga ilaa 42% qoysaska magaalooyinka. Dalka Masar, marka laga eego saamiga uu ka yahay celceliska kharashka halkii qof, ee ardayda ku jirta dugsiyada sare ee caadiga ah, boqolkiiba labaatanka ugu hodonsan ayaa 51% ku bixiya casharro gaar ah halka kuwa ugu saboolsan ay ku bixiyaan 29%. Dalka Myanmar, kharashka casharrada gaarka ah lagu bixiyo waxaa uu ka dhigan yahay 42% wadarta kharashka qoyska uga baxa waxbarashada.

Macaahidda waxbarashada ee gaarka loo leeyahay waxaa ay ku tiirsan yihiin kharashka ay tooska u bixiyaan qoysaska. Badi dugsiyada sare ee gaarka loo leeyahay waxaa ay ugu yaraan 80% dakhligooda ka helaan ujuurada ardayda laga qaado ee nidaamyada waxbarashada ee 28 ka mid ah 51 dal ee qaybta sare ee kuwa dakhligoodu dhexdhexaadka yahay iyo kuwa uu sarreeyo. Dalalka uu dakhligoodu hooseeyo iyo kuwa uu ka sii hooseeyo, waalidiinta saboolka ah ayaa istiraatiijiyado kala duwan u adeegsada la-qabsashada kharashaadka dugsiyada gaarka loo leeyahay. Caalami ahaan, mid ka mid ah lixdii qoysba ayaa hanti keydsada si ay ugu bixiyaan ujuurooyinka dugsiga, halka ilaa 8% qoysasku ay sidoo kale lacag u soo amaahdaan. Dalalka Haiti, Kenya, Filibiin iyo Uganda, ayaa 30% ama in ka badan qoysaska ay soo amaahdaan ujuurooyinka dugsiga.

Maaliyadda dugsiyada gaarka loo leeyahay waxaa saameyn mug weyn ku yeeshey COVID-19. Cudurka dunida ku wada baahay ayaa saameyn ku yeeshey dugsiyada gaarka loo leeyahay, gaar ahaan kuwa ku tiirsan ujuurooyinka ardayda laga qaado. Dalka Nayjeeriya ayaa daahrogey xirmo dhaqaale oo lagu kaabayo taas oo ay la socdaan amaaho ay dugsiyada gaarka loo leeyahay isaga bixiyaan mushaarka macallimiinta aan ahayn kuwa dowladda. Dalka Ghana, dugsiyada gaarka loo leeyahay ayaa heley taageero qayb ka ah barnaamij guud oo loogu talogaley sharikadaha yaryar iyo kuwa dhexdhexaadka ah. Dalka Viet Nam ayaa ballaariyey barnaamijyada lacagaha kaashka ah lagu bixiyo si loogu daboolo kharashka macallimiinta dugsiyada gaarka loo leeyahay. Dalka Panama, 35% ilaa 40% oo ka mid ah waalidiintu waa ay iska bixin waayeen lacagihii bisha lagu bixinayey. Dalka Ecuador, ardayda dugsiyada dowladda ayaa kor u kacay

6.5% ama 120,000 ardayda, oo ka soo beddeshey dugsiyo gaar loo leeyahay.

In lacag gargaarka lagu bixiyo waxbarashada gaarka loo leeyahay ayaa doodi ka taagan tahay. Lacagta waxbarashada loogu talogaley oo ah ku dhowaad US$1.2 bilyan, ayaa hay'adda Internatioanl *Finance Corporation* waxaa ay 15% u qoondeysey dugsiyo gaar loo leeyahay laakiin waxaa ay 2019kii joojisey maalgelinteedii la halmaashey dugsiyada gaarka loo leeyahay ee ardayda ka qaada ujuuro, ka dib markii ay culeys ku saareen ururrada bulshada rayidka ah. Iskaashiga the *Global Partnership for Education* ayaa dejiyey istiraatiijiyad loogu talogaley waaxda gaarka loo leeyahay laakiin mucaaradad laga keeney intii laga wada-xaajoonayey ayaa keentey in lagu daro faqrad mamnuucaysa in maaliyaddooda loo adeegsado in lagu taageero adeegyada waxbarashada aasaasiga ah ee faa'iidada laga raadinayo.

Deeq-bixiyeyaasha ayaa hadda tijaabinaya iskaashi wada-shaqeyn oo maamulka iyo ganacsiyada dhex mara. Dowladaha lacag-la'aantu hayso ayaa amaahdey hanti gaar loo leeyahay si ay ugu sii wanaajiyaan ayna ugu ballaariyaan kaabayaasha waxbarashada ay dowladdu bixiso ee dalalka Masar, Filibiin iyo Koonfur Afrika. Deeq-bixiyeyaasha qaar ayaa ka fekerey in ay hawsha ku bilaabaan maaliyaddooda si ay dadka u dhiirrigeliyaan si ay kor ugu qaadaan maaliyadsiinta loo marayo iskaashiga noocaas ah. Laakiin waxaa jira welwel la qabo oo ah in dowladaha nakh-shadeyn kara, hirgelin kara oo nidaamin kara iskaashiga noocaas ah ay wax intaa ka badan qaban karaan iyaga oo u sii maraya wax-soo-iibsiga dowladda si ay u xaqiijiyaan ujeeddooyinkooda.

Maaliyadda ay muxsiniintu iyo sharikadaha ay siiyaan waxqabadyada waxbarashadu aad ayaa ay u yar tahay. Inkasta oo ay dad ka dhaadhacsan tahay in qaddarka lacagta ay mu'asasaadka muxsiniinta ah ay ku bixiyaan waxbarashada ay sii kordhayo, haddana weli waa mid ilaa xad aan macno lahayn. Lafaguris nidaamsan oo lagu sameeyey sadaqada ay bixiyaan 143 mu'asaso oo ka tirsan shabakadda *the Network of Foundations Working for Development*, oo ah dadaal hay'adda *the Organization for Economic Co-operation and Development* (OECD) waddo ah, ayaa ku qiyaasay in waaxda waxbarashadu ay US$ 2.1 bilyan heshey saddexdii sano ee u dhexeeyey 2013 ilaa 2015. Tani waxaa ay u dhigantaa 9% dhammaan sadaqada ay muxsiniintu bixiyaan.

SAAMEYNTA

Arrimaha la xiriira hufnaanta, ikhtiraacaadka iyo u-sinnaanta ayaa xuddun u ah doodaha ku saabsan doorka xoogagga aan dowladda ahayn ku leeyihiin waxbarashada. Doodaha ayaa badanaa ku tilmaaman is-colaadin iyo is-aaminaad la'aan maaddaama laba ra'yi oo aad u kala fog ay isku dhacayaan. Kooxaha kala taageersan fikradaha kala duwan ayaa isku daya in ay saameyn ku yeeshaan fikirka ay dadweynuhu qabaan iyo siyaasadda waxbarashada ee taageereysa ama ka soo horjeedda door xooggan oo ay yeeshaan xoogagga aan dowlad ahayn. Waxaa ay adeegsadaan shabakado u-qareemeyn iyo galaangal, cilmibaaris, iyo maaliyadsiin, oo badanaa lala xiriiriyo iibinta badeecooyinka iyo adeegyada. Tartankan lagu tartamayo fikrado siyaasadeed iyo dano dhaqaale, oo xoogaggu ay adeegsadaan waddooyin sharci ah iyo kuwo aan sharci ahayn si uu fikirkoodu u guuleysto, ayaa culeyska jira waxaa uu yahay sidii loo joogteyn lahaa daahfuraanta iyo dhowrsoonaanta geeddi-socodka siyaasadda guud ee waxbarashada iyo sidii kooxaha danleyda ah ee kala duwanna loo xakameyn lahaa.

Kooxaha xoogagga kala duwan ma laha mowqif ka dhexeeya oo ay ka qaataan macaahidda waxbarashada ee aan dowladda lahayn. Ururrada bulshada rayidka ah ayaa badanaa ah kuwo dhaliil soo jeediya, iyaga oo welwel ka muujinaya in waxbarashada laga dhigo wax cid gaar ah ay leedahay ama laga ganacsado waxaana ay ku doodaan in waxbarashadu ay ku jirto gacan dimuqraadi ah. Sidaas oo ay tahay haddana xataa dhaqdhaqaaqa waxbarashada ku saleeya xuquuqaha, sida *the Global Campaign for Education*, ayaa xubnaha ka tirsan waxaa ay kala qabaan fikrado kala yara duwan taas oo ka dhalatey xaqiiqooyinka ka kala jira dalalkooda. Sahan xubnaha looga qaadey warbixintan daraaddeed, ayaa 43% ay muujiyeen in ay khalad u arkaan in bixinta waxbarashada laga doono faa'iido laakiin 12% ayaa taageersanaa; iskaaashiga maamulka iyo ganacsiga, ayaa saamiyada fikirka kala duwan ay kala ahaayeen 41% iyo 20%, iyada oo inta soo hartey ay muujiyeen fikir aan dhinac gaar ah u dhacsaneyn.

Shabakadaha caalamiga ah ee u qareemeeya ayaa in waxbarashada ay cid aan dowlad ahayn bixiso ama laga ganacsado u arkey in ay ku yihiin waxbarashada. Fikirkan waxaa lagu qeexay Mabaa'diida *Abdijan Principles* ee ku saabsan waajibaadyada xuquuqaha aadanaha ee Dowladaha ka saaran in ay bixiyaan waxbarasho iyo in ay nidaamiyaan kuwa aan dowladda ahayn ee ku lug leh waxbarashada. Sanadkii 2018, ayaa 10 muwaadin oo Kenyan ah waxaa ay cabasho u gudbiyeen Xafiiska Gardoonka Dadweynaha ee loo yaqaan *Compliance Advisor*

Ombudsman, oo ah habka madax-bannaan ee isla-xisaabtanka u qaabilsan hay'adda the *International Finance Corporation* (IFC), iyaga oo ku eedeeyey in hay'adda la yiraahdo *Bridge International Academies*, oo ah mid faa'iido-doon ah oo leh silsilad dugsiyo ah, ay ku xadgudbeyso jaangooyooyinka manhajka, caafimaadka iyo bedqabka iyo shaqada. Sanadkii 2020, ayaa IFC ay hakisey maalgelinta silsiladda dugsiyada ah halka Kooxda Madaxa-Bannaan ee Qiimeynta ee Bankiga Adduunka (*World Bank's Independent Evaluaiton Group*) ay bilowdey qiimeyn ay ku sameeynayso maalgelinta dugsiyada gaarka loo leeyahay.

Taageero iyo kheyraad aan loo meel-dayin oo ay hay'ado caalami ah oo badan ay siiyaan kuwa bixiya waxbarashada ee aan dowladda ahayn ayaa saameyn ku yeesha ajandayaasha. Waddooyinka uu Bankiga Adduunku u maro in saameyn ku yeesho siyaasad-dejinta waxaa ka mid ah hab la xiriira la-shaqeynta waaxda/ganacsiga gaarka loo leeyahay, oo loo arko mid ka mid ah 13 siyaasadood ee ugu muhiimsan oo lagu dhiirrigelinayo barashada oo hoos yimaada habka loo yaqaanno *Systems Approach for Better Education Results* ama Waddada Nidaamyada ee Dhalinta Natiijooyin Waxbarasho oo Wanaagsan. Waxaa uu ku taliyey in la ballaariyo dugsiyaga gaarka loo leeyahay ee bixiya waxbarashada 9 ka mid ah 10 dal. Sanduuqa ay UNICEF hayso ee *Education Outcomes Fund* ayaa maalgelieyaal ku soo jiita mashaariic natiijooyin wanaagsan taariikhiyan soo lahaa, kuwaas oo aan ku badneyn waxbarashada. Ururrada heley taageero caalami ah waxaa ka mid ah Ark, oo hawsheedii ahaan jirtey maamullidda dugsiyo ay dowladdu Ingiriisku leedahay oo hadda ku sii dartey in ay la-taliso ayna gacan ka geysato hirgelinta iskaashi maamulo-ganacsi gaar loo leyahay oo ka jira dalal ay ka mid yihiin Liberia iyo Koonfur Afrika.

Mowqifyada mu'asasooyinku waa ay ku kala duwan yihiin doorka ay la tahay in xoogagga aan dowladda ahayn ay ka ciyaaraan waxbarashada. Waxyaabaha kala duwan ee mu'asasooyinka, sharikadaha iyo kuwa kheyriga ah dhiirrigelinaya ayaa dad ku adkeynaya in loo aqoonsado in ay hal koox yihiin. Badanaa, mas'asasooyinka waxaa lagu dhaliilaa in ay isku dayaan in ay saameyn ku yeeshaan in siyaasadda meel gaar ah lagu wajaho. Mas'asasada Leman ee kheyriga ah ayaa gacan ka geysatey in jaangooyooyinka qaran ee barashada laga bilaabo dalka Brazil ka dib wada-tashiyo dhowr ah.

Ururrada shaqaalaha ee macallimiinta ayaa safka hore kaga jirey dadaallada u-qareemaynaya in la taageero in waxbarashadu ay bixiso dowladda. Ururrada shaqaalaha ayaa si taabogal ah bannaanka u soo dhigey iskuday badan oo lagu doonayey in lagu wiiqo waxbarashada ay dowladdu bixiso iyada oo loo marayo ganacsi-gelin aan loo baahneyn iyo adeegyada oo cid kale laga soo qaato. *Education International* oo ah kulan ay ku wada jiraan ururrada shaqaalaha ee macallimiinta, ayaa su'aal ka keenayey in iskaashiga maamulka iyo ganacsiga gaarka loo leeyahay ee aad looga adeegsanayey dalalka Latin America, tusaale ahaan dalalka Costa Rica iyo Jamhuuriyadda Donican Republic, ay dhibaato u geysatey macaahidda dowladda ee isla muhiimaddaas u qaabilsan. Laakiin mararka qaar, tabaha ay ururrada shaqaaluhu adeegsadaan ayaa lagu dhaliileyin ay lug-goynayaan dadaallada lagu xoojinaya waxbarashada dowladdu bixiso.

Ganacsiyadu waxaa ay u-qareemeyntooda wax-ka-beddelka waxbarashada ku saleeyaan cududda shaqaalaha. *The Japan Business Federation*, sida kuwa u-qareemeeya arrimaha dhaqaalaha ee dunida, ayuu soo saarey taloooyin la xiriira siyaasadda waxbarashada oo dad ku tirtirsiinaya casriyeyn iyo xirfadaha qarniga 21aad. Dadka qaar ayaa talooyinkaasi ku dhaliileyin ay yihiin kuwo aan la jaanqaadeynin hab-dhaqannada shaqaaleysiinta iyo tababaridda loo-shaqeeyaha. Isbahaysiga *the Global Business Coalition for Education* waxaa uu khubarrada, hoggaanka iyo kheyraadka xubnihiisa ku tirtirsiinayaa in ay siyaasaddooda hormuud uga dhigaan waxbarashada. Kuwa farta ku godaya ayaa dhinacooda gaashaanka ugu daruura in taageerada ugu wanaagsan ee la siiyo waxbarashada ay dowladdu bixiso ay tahay in ay si dhab ah uga hawlgasho ololayaasha looga soo horjeedo ka baaqsashada iyo la-baxsashada cashuurta. Waxaa sidoo kale welwel laga muujiyey sida sharikadaha tiknolojiyada waxbarashada, oo tabo suuqgeyn u adeegsada in ay dowladaha ay badeecooyin uga iibiyaan qaabab aan la jaanqaadeynin wanaagga bulshada, ayaa dadaalladooda sii xoojiyey intii ay socdeen dhibaatooyinka COVID-19 oo loo wareegey in aqoon-barashadii ay dhacdo iyada oo la kala fog yahay.

XANNAANNADA IYO WAXBARASHADA CARRUURTA YARYAR

Xoogagga aan dowladda ahayn ayaa hormuud u ah adeegyada xannaanada iyo waxbarashada carruurta ka yar 3 sano. 33 dal oo dakhligoodu sarreeyo, ayaa macaahidda gaarka loo leeyahay ay 57% ay ka ahaayeen wadarta is-qorista dugsiyada ee sanadkii 2018kii. Dalalka Australia, Ireland, Netherlands, New Zealand iyo Ingiriiska, waaxda gaarka loo leeyahay ee faa'iido-doonka ah ayaa badanaa mas'uul ka ah. Jarmalka, 73% ardayda ayaa is-qorey macaahid gaar loo leeyahay sanadkii 2017kii laakiin keliya 3% kuwa bixiya adeegga waxbarashada ayaa ahaa faa'iido-doon. 33 dal oo dakhligoodu dhexdhexaad yahay, xoogagga aan dowladda ahayn ayaa ahaa 46% carruurta is-qortey

dugsiyada ee da'doodu ka yar tahay 3 sano, taas oo mid ku dhow eber boqolkiiba ay ka ahayd Federaalka Ruushka iyo ilaa 100% oo ay ahayd Turkiga. Keliya dalal yar, oo ay ka mid yihiin Colombia, Guatemala iyo Peru, ayaa soo dhoweeyey barnaamijyo daryeelka carruurta ah oo yaryar oo bulshadu sal u tahay. Adeegyada ku dhisan loo-shaqeeyaha, oo badanaa ka jira dalalka hodonka ah, ayaa keliya si tartiib-tartiib ah uga soo if-baxaya dalalka kuwaas ka saboolsan. Culeys muhiim ah oo jira ayaa ah in shaqaalaha ka shaqeeya waaxda rasmiga ay keliya 30% ka yihiin shaqaalaha dalalka dakhligoodu hooseeyo iyo kuwa uu dhexdhexaadka yahay.

Xoogagga aan dowladda ahayn ayaa ku badan waxbarashada xannaanada ah marka loo eego waxbarashada aasaasiga (hoose/dhexe) ah. Intii u dhaxaysey sanadihii 2000 iyo 2019, saamiga ay macaahidda gaarka loo leeyahay ka ahaayeen wadarta is-qorista ardayda ee waxbarashada xannaanada ah ayaa ka kordhey 28.5% oo noqotey 37%, taas oo gaartey 55% dalalka Bariga iyo Koonfur-bari ee Aasiya. Dalka Shiinaha, iyada oo hoos imaaneysa siyaasadda 'ku-socoshada labada lugood' ayaa saamiga macaahidda gaarka loo leeyahay ay ka korodhey min 31% ilaa 57%. Dalka Viet Nam, saamiga is-qorista ardayda ee dugsiyada gaarka loo leeyahay ayaa ka soo dhacdey 60% oo ay ahayd 2003dii oo noqotey 12% sanadkii 2014kii. Saamiyada ayaa u dhexeeya 1% dalalka Yurubta Bari, oo ay ka mid tahay Ukraine, iyada oo in ka badan 95% ay tahay Caribbean-ka (t.a. Antigua iyo Barbuda) iyo Basifigga, halkaas oo adeegga ama ay bixiso bulshada (t.a Vanuatu) ama lala xiriiriyo ururro diimeed (t.a. Samoa). Waqooyiga Afrika iyo Galbeedka Aasiya, oo ay hormuud u yihiin Aljeeriya iyo Masar, ayaa ah gobolka laga soo heley hoos-u-dhacii ugu ballaarnaa ee saamiga macaahidda gaarka loo leeyahay ee is-qorista waxbarashada xannaanada ah, iyada oo 53% ay ahayd sanadkii 2000 oo ay noqotey 36% sanadkii 2019. Dhinaca kale, intii u dhaxaysay sanadihii 2000 ilaa 2018, ayaa saamiga macaahidda gaarka loo leeyahay ee Israel ay ka kordheen 5% oo ay gaareen 36% iyo dalka Kuwait oo ay kordheen min 26% ilaa 45%..

Kharashka ku baxa waxbarashada xannaanada ah ee ay bixiyaan xoogagga aan dowladda ahayn ayaa noqon kara mid aaney iska bixin karin kuwa ugu saboolsan. Sahamada qoysaska lagu sameeyo ayaa muujiyey in xogta maamul ay celcelis ahaan 20 boqolkiiba hoos u dhigtey saamiga ardayda dhigata dugsiyada aan ahayn kuwa dowladda ee lix ka mid ah toddoba dal oo ka hooseeya Saharaha Afrika. Waxbarashada ay bixiyaan kuwa aan ahayn dowladda waxaa ay badanaa ku wajahneyd baahida ka jirtey degaannada magaalooyinka ah, meelahaas oo adeegyada noocaas ah badanaa laga helo, iyo qoysaska hodonka ah, oo kharashka iska bixin kara. Saamiga ay ka noqoneyso biilka sanadka ee qoyska ee waxbarashada xannaanada ah ee gaarka loo leeyahay waa 6% kuwa ugu hodonsan iyo 17% oo ay tahay kuwa ugu saboolsan dalka Ghana; halka kuwa u dhigma ee dalka Itoobiya ay yihiin 4% iyo 21%.

Waxbarashada oo ay bixiso cid aan dowladda ahayn waxaa ay caqabad ku tahay maamulka iyo xeer-nidaaminta. Kala-duwanaanshaha xoogagga aan dowladda ahayn ayaa maamuliddooda ka dhigeysa mid adag. Dalka Cambodia ayaa xeer-nidaamiyeyaal iyo wareegtooyin u gaar ah u sameeyey dugsiyada xannaanada ee bulshada. Dalka Sri Lanka, maqnaanshaha sharci guud oo nidaamiya waaxo kala duwan ayaa waxaa uu macnaheedu yahay baaxadda shaqada dhowr wasaaradood (waxbarashada, caafimaadka iyo haweenka iyo arrimaha haweenka iyo carruurta) iyo maamullada gobollada ay isa-soo-dhexgasho. Magaalada Lagos, dalka Nigeria, itimaalka in wasaaradda waxbarashada ee gobolka ay kormeer ku sameyso dugsi xannaano ah ay sarreysey haddii dugsigaasi uu qaado ujuurooyin sarreeya (68%) marka loo eego haddii uu qaado ujuurooyin hooseeya (48%). Magaalada Naiobi ee dalka Kenya, dugsiyada bulshada ayaa la kormeeraa marar ka badan inta la kormeero kuwa diinniga, gargaarka ama kuwa faa'iido-doonka ah.

Tayada kuwa bixiya adeegyada waxbarashada ee aan dowladda ahayn aad bay u kala duwan tahay. Qaar badan oo ka mid ah dalalka dakhligoodu hooseeyo iyo kuwa uu dhexdhexaadka yahay, macaahidda waxbarashada ee gaarka loo leeyahay ayaa ay u badan tahay in aaney diyaarsaneyn oo ayna leeyihiin fursado kobcin xirfadeed marka loo eego kuwa dhiggooda ah ee dowladdu leedahay. Keliya 8% macallimiinta dugsiyada xannaanada ee gaarka loo leeyahay, laakiin 75% macallimiinta dugsiyada xannaanada ee dowladdu leedahay ayaa sameeya barnaamijka tababarka ee Adeeggga Waxbarashada ee *Ghana Education Service*, maaddaama aaney jirin shuruudo sheegaya waxa ugu yar ee looga baahan yahay macallimiinta dugsiyada gaarka loo leeyahay. In Af-Ingiriis loo adeegsado afka casharradu ku baxaan ee dugsiyada xannannada ee aan dowladdu lahayn, sida dalka Brazil oo kale, ayaa tusaale u ah xiisadda ka dhex taagan manaahij u habboon horumarka iyo fikradaha caan baxay ee laga aaminey waxa ay tayadu tahay.

Dalal yar oo kuwa dakhligoodu hooseeyo iyo kuwa uu dhexdhexaadka yahay ah ayaa leh habraacyo lagu hubinayo tayada oo dhaafsiisan shuruudo maamul oo ay tahay in la buuxiyo. Dalka Jamaica, oo inta badan waxbarashada ay bixiso cid aan dowladda ahayn, ayaa

wasaaradda waxbarashadu waxaa ay u baahan tahay kormeerayaal aqoon u leh shaqada; shaqaale kale ayaa bil walba booqashooyin korjoogteyn ah u sameeya si ku saleysan jaangooyooyin qaran oo 12 ah oo ay ka mid yihiin wada-tacaamulka iyo xiriirka ka dhexeeya ardayda, macallimiinta, waalidiinta, daryeelayaasha iyo xubnaha bulshada. Dalka Filibiin ayaa korjoogteeya jaanogoyooyinka qaran iyo u-hoggaansamiddoodu iyada oo la adeegsanayo Liisto-hubineedda Koboca Carruurta Yaryar ee Philippine *Early Childhood Development Checklist*.

Xoogagga aan dowladda ahayn ayaa ikhtiraaca oo u-qareemeeya ECCE. Taariikhiyan, aqoonyahannada ku takhasusey waxbarashada ayaa ku shaqeynayey dibadda ama geesaha nidaamka waxbarashada tooska ah ee dowladda si ay uga shaqeeyaan hiigsigooda ku aaddan waxbarasho uu ilmuhu xuddun u yahay. Cilmbaarayaasha waxbarashada ayaa dareenka ku soo jeediyey taabogalnimada muddada fog ee barnaamijyada waxbarashada carruurta aadka u yaryar, iyaga oo maamullada dowladeed ku dhiirrigeliyey in ay ballaariyaan barnaamijyada noocaas ah. Xoogagga aan dowladda ahayn ayaa u-qareemeeya carruurta aan helin adeegga waxbarasho, iyaga oo la shaqeynaya hooyooyinka xabsiyada ku jira ee dalka Chile, waalidiinta saboolka ah ee shaqeeya ee dalka Filibin iyo carruurta ku jirta macaahidda ee dalka Romania. Hay'adaha sida *the Bernard Van Leer Foundation, Aga Khan Foundation* iyo *Open Society Foundations* ayaa abaabuley taageero iyo u-qareemeyn loo sameeyo ECCE.

TACLIINTA SARE

Ku dhowaad dhammaan dalalku waxaa ay hubinta bixinta tacliinta sare u maraan xoogag dowladeed iyo kuwa aan dowlad ahayn. Guud ahaan dunida ilaa 33% ardayada tacliinta sare waxaa ay dhigtaan macaahid gaar loo leeyahay, iyada oo saamiyada ugu sarreeya ay ka jiraan dalalka Bartamaha iyo Koonfurta Aasiya iyo Latin America iyo Caribbean-ka. Kororka macaahidda aan dowladdu lahayn ee waxbarashada bixiya waxaa keeney baahi kala duwan. Macaahidda Diiniga ah-ama kuwa dhaqanka u janjeera ayaa ku xiran taariikh iyo caado, kuwaa oo buuxinaya baahida loo qabo waxbarasho 'nooc kale ah'. Macaahidda hal-doorka ah waxaa ay ka dhashaan baahida loo qabo waxbarasho 'ka wanaagsan' tan jirta, taas oo badanaa ka timaadda dadka dhaqaalaha haysta. Ugu dambeyn, macaahidda yaryar, ee aan mabda' gaar ah ku saleysneyn ayaa dhowaan soo butaacay iyaga oo ka jawaabaya baahi 'intii hore ka badan' oo loo qabo tacliin sare, gaar ahaan marka loo eego xaaladda miisaaniyadaha guud ee ciriiriga ku sugan.

Macaahidda aan dowladdu lahayn ayaa raadad ku leh tayada hannaanka. Macaahidda yaryar ee ujuurooyinka qaata ayaa ay u badan tahay in ay tacliin mowduucyo gaar ah ku wajahan ay bixiyaan, kuwaas oo badanaa u janjeera mihnad. Dalka Hindiya, ilaa 40% kuliyadaha gaarka loo leeyahay waxaa ay bixiyaan cilmi la xiriira mowduuc keliya, badanaana waa waxbarashada. Macallimiinta macaahidda aaney dowladdu lahayn ayaa ay yar tahay in ay ahaadaan kuwo shaqo joogto ah haysta – wax ka yar 20% ayaa ah kuwo shaqo joogto ah haysta dalka Senegal – waxaana ay badanaa yihiin barafasoorro shaqo joogto ah ka haya macaahidda ay dowladdu leedahay oo shaqo dheeri ah meel kale ka raadsanaya. Dalka Malaysia, waxaa ay gaari karaan 80% shaqaalaha meelo kale ka shaqeeya ee waqti gaaban u shaqeeya macaahidda yaryar iyo kuwa cusub ee aaney dowladdu lahayn. Faa'iidada oo diiradda la saaro waxaa ka dhalanaya culeysyo dheeri ah oo dhinaca tayada ah oo la xiriira diirad-saaridda suuq iyo in mudnaanta la siiyo faa'iidada halkii laga siin lahaa sii-wanaajinta tacliinta.

Tacliinta ay bixiso cid aan dowladda ahayn waxaa ka imaanaya welwel laga qabo u-sinnaanta. Dadka ladan ee dalalka dakhligoodu dhexdhexaadka yahay, saami weyn oo ay xoogagga aan dowladda ahayn ka yihiin wadarta ardayda ayaa lala xiriiriyaa u-sinnaan la'aan ballaaran oo dhinaca dhigashada macaahiddaas ah. Dalka Uruguay, in ka badan 75% dhammaan ardayda dhigata macaahidda aan ahayn kuwa dowladda waxaa ay ka yimaadaan khumuska (shan-meelood-meel) ugu hodonsan, marka loo eego in ka yar 40% oo ay ka yihiin macaahidda ay dowladdu leedahay. Sidaas oo ay tahay haddana, macaahidda aan ahayn kuwa dowladdu waxaa ay gacan ka geysan karaan in ay waxbarasho helaan kooxaha halista ugu jira in laga hor-istaago waxbarashada. Dalka Saudi Arabia, waxaa ay ballaariyeen haweenka heli kara waxbarasho iyaga oo bixiya koorsooyin haweenka u gaar ah, halka Malaysia ay fursad waxbarasho siiyaan dadka Shiineeska ah iyo kuwa hindida ah ee macaahidda dowladda looga mamnuucay tirada loo qoondeeyo isirrada kala duwan. Haddana, waxbarashada meelaha gaarka ah lagu bixiyo waxaa ay halis ku keeni kartaa midnimada bulshada.

Shuruucda guud ee nidaaminta ayaa badanaa muujiya fikirka ay dowladdu ka qabto xoogagga aan dowladda ahayn. Nidaamin adag ayaa lala xiriiriyaa ku-kalsoonaan la'aan, halka kalsooni wanaagsan oo lagu qabo xoogagga aan dowladda ahayn ay fududeyn karto aqoonsi la siiyo, korjoogteyn iyo xataa in dowladdu ay maaliyad siiso. Dalalka qaar, macaahidda faa'iido-doonka ah ayaa ku khasban in ay u hoggaansamaan dhabbe-tuseyaal adag – gebi ahaanba waa la mamnuuci karaa, sida dalalka Argentina iyo Chile, ama waxaa ay wajihi karaan xannibaado laga saaro qoondeynta miisaaniyadeed,

sida ka dhacdey dalka Filibiin oo 10% lagu sargooyey faa'iida ka soo noqota maalgelinta. Guud ahaan, hababka hubinta tayada ayaa dalalka gacan ka siiyey in ay xiraan macaahid ku lug yeeshey hab-dhaqanno ganacsi oo khayaanno ku dhisan ama bixinayey adeegyo tayadoodu hooseyso. Sanadkii 2017kii, Guddiga Tacliinta Sare ee Pakistan ayaa soo ogaadey macaahid 153 ah oo si sharci-darro ah uga shaqeynayey dalka. Laakiin badanaaba lama hayo kheyraadkii loo adeegsan lahaa aqoonsashada iyo korjoogteynta macaahidda aan ahayn kuwa dowladda.

Xeer-nidaamiyeyaasha dhiirrigeliya u-sinnaanta ayaan u badneyn sida xeerarka maamul. Qoondooyin ama shuruudo gaar ah oo ardayda lagu qaato oo loogu talogaley in lagu sii wanaajiyo sida kooxaha saboolka ah ay ku heli karaan tacliinta sare ayaan badanaa gaarin macaahidda aan ahayn kuwa dowladda. Marka ay tahay in ay ku dhaqmaan, sida dalka Hindiya, waxaa badanaa looga baahan yahay keliya macaahidda maaliyad ka hela dowladda. Intaa waxaa ka soo haray waxaa ka mid ah in macaahidda aan ahayn kuwa dowladda lagu waajibiyo in ay deeqo ama deeq-waxbarasho siiyaan qaar ka mid ah ardayda, sida dalalka Bolivia iyo Ecuador oo kale, iyo in la kabo ujuurooyinka laga rabo ardayda, sida dalalka Azerbijan iyo Kenya.

Qaababka maaliyasiinta ee macaahidda aan ahayn kuwa dowladda ayaa ay ka dhashaan raadad xooggan oo dhinaca tayada iyo u-sinnaanta ah. Badi macaahidda aan ahayn kuwa dowladda, gaar ahaan kuwa yaryar iyo kuwa aan miidda ahayn, ayaa maaliyaddoodu aad ugu tiirsan tahay ujuurooyinka ay ardayda bixiyaan. Laakiin badi dalalka ayaa dowladuhu ay gacan ka geystaan maaliyadsiinta macaahidda aan ahayn kuwa dowladda. Qaar ka mid ah shaqaalaha waxbarashada ayaa hela kab sidii shaqaalaha rayidka ah ee dowladda ee dalka Indonesia, waxaana jirta maaliyad gaar ah oo ay heli karaan macaahidda aan ahayn kuwa dowladda ee dalka Thailand. Helidda maaliyadda dowladda ayaa gacan ka geysan karta in macaahidda aan ahayn kuwa dowladda ay bixiyaan adeeg iyaga oo dhiirrigelinaya dadaallo cilmi-baaris ah ama, haddii maaliyaddu ay shuruud ku xiran tahay, ku riixi karta macaahidda in ay ka soo baxaan jaangooyooyinka dhinaca tayada ama u-sinnaanta ah.

Qoysaska ayaa dhabarka u ritey saami weyn oo ka mid ah maaliyadsiinta tacliinta sare, taas oo kordhisey baahida loo qabo taageero laga helo dowladda ama cid aan dowlad ahaynba. Dowladaha ayaa macaahidda aan ahayn kuwa dowladda u bandhigi kara in ay kabaan ujuurooyinka ardayda qaar, sida dalalka Brazil iyo Chile, ama ay kabaan barnaamijyo amaaho siiya ardayda, oo ay heli karaan dhammaan ardayda tacliinta sare ee in ka badan 70 dal. Xoogagga aan ahayn dowladda ayaa gacan ka siiya qoysaska bixiyaan kharashka iyaga oo u maraya deeqo waxbarasho oo ay bixiyaan sharikado, mu'asasooyin, NGO-yo iyo muxsiniin, iyo sidoo kale iyaga oo bixiya heshiiyo amaahinta ardayda ama dakhli-wadaag ah.

Xoogagga aan dowladda ahayn ayaa gacan ka siiya macaahidda in ay helaan maaliyad aan ahayn ujurooyinka ardayda. Hababka badanaa la adeegsado waxaa ka mid ah ku lug yeelasha hawlaha suuqyada sida kireynta dhul, ganacsi-gelinta badeecooyin iyo adeegyo, iyo in ay raasumaal ku helaan amaah iyo waraaqaha ballanqaadka ah (*bonds*). Wixii loo soo gaarey bartamihii 2020ka, waraaqaha ballanqaadka ah ee ay bixiyaan jaamacadaha adduunka waxaa ay gaareen US$11.4 bilyan oo doolar, taas oo ka badan laba-laabka tii sanadkii 2019[kii]. Deeq-bixiyeyaasha iyo muxsiniinta ayaa sidoo kale ah il dakhli aan ujuuro ahayn oo soo gala macaaahidda, taas oo ka badan kalabarka wadarta ay heleen macaahidda tacliinta sare ee Mareykanka sanadkii 2020[kii].

Xoogagga aan ahayn dowladda ayaa siyaabo kala duwan saameyn ugu yeesha tacliinta sare. Qaar ka mid ah hababka, sida cilmi-baaris la iska kaashado, galaangal, dib-u-habeyn maamul oo sida ganacsiga oo kale ah iyo u-qareemeyn, ayaa gacan ka geysan kara kordhinta daahfurnaanta xoojinta waaxda. Qaar kale, sida deeqo mug leh oo laga helo macaahidda faa'iido-doonka ah ay siiyaan siyaasiin (t.a. dalka Brazil iyo Mareykanka), ayaa laga yaabaa inuu keeno saameyn aan loo baahneyn oo lagu yeesho siyaasad-dejinta oo waxna u dhimi karta madax-bannaanida hoose ee hay'adeed.

WAXBARASHADA FARSAMADA, MIHNADDA IYO TAN DADKA WAAWEYN

Xoogagga aan dowladda ahayn ayaa gacan ka geystey ballaarinta bixinta waxbarashada farsamada iyo tan mihnadda. Dunida oo dhan, 38.5% ardayda dhammeysatey dugsiga sare, ee aan gelin tacliin sare ayaa galey macaahid gaar loo leeyahay sanadkii 2019kii. Dalka OECD, 44% ardayda ku jira barnaamijyo mihnadeed oo tacliinta sare ah oo meerto gaaban ayaa dhiganayey macaahid gaar loo leeyahay. Iskaashi lala sameeyo xoogagga aan dowladda ahayn ayaa looga dan lahaa in nidaamyada waxbarashada iyo tababarka farsamo iyo minaheed/*technical and vocational education and training* (TVET) laga dhigo kuwo la jaanqaadaya baahiyaha suuqa shaqada iyo in kor loo qaado kartidooda iyo kheyraadkooda, xataa dalalka leh nidaamyo TVET oo dowladeed oo iskujira. Meelo kale, xoogagga aan

ahayn dowladda ayaa kaabayey bixinta waxbarashada mihnadda iyada oo loo marayo habkii soo-jireenka ahaa ee soo-iibsashada, dadaallada tababarka ee madax-bannaan iyo iskaashiga maamulka iyo ganacsiga gaarka loo leeyahay, iyada oo badanaana ay isuduweyso dowladda. Dalalka saboolka ah, xoogagga aan dowladda ahayn ayaa u-sinnaanta kaga wanaagsan kuwa kale marka la eego sida kooxaha saboolka ah u helayeen tacliin TVET ah.

Loo-shaqeeyayaasha ayaa bixiya fursado rasmi ah iyo kuwo aan rasmi ahayn oo shaqo-ku-tababarasho. Sahankii Ururka Shaqaalaha Adduunka ee Kala-guurka min Dugsi ilaa Shaqo (*School-to-Work Transitional Survey*) ayaa lagu ogaadey in wax ka yar 1 ka mid ah 5 ka-qaybgalayaal ay da'doodu u dhaxaya 15- ilaa 35-sano ee joogey 33 dal ay sameeyaan ugu yaraan hal shaqo-ku-tababarasho taas oo qayb ka ahayd waxbarashadooda. Ka-qaybgalka hooseeya ee dalalka dakhligoodu uu hooseeyo ayaa lala xiriirin karaa suuqyada shaqada iyo nidaamyada tababrka oo aan rasmi ahayn. Haddii aan si dad ku filan loo nidaamin loona aqoonsan, lacagta kabka ah ee loogu talogaley shaqo-ku-tababaridda ayaa meesha ka bixi karta. Ururrada wax dhexdhexaadiya ayaa fududeyn kara wada-hadal dhex mara loo-shaqeeyeyaasha, sii wanaajin kara barashada oo hubin karana in qofku helo shaqada uu ku habboon yahay, gaar ahaan dalalka aan caadi ahaan lahayn hannaan adag oo shaqo-ku-tababarasho.

Kobcinta joogtada ah ee xirfadaha ayaa badanaa ay bixiyaan loo-shaqeeyeyaasha gaarka ah. Inkasta oo TVET-ka rasmiga ah badanaa lala beegsado shaqooyinka halista ugu jira in qalab fududeeya uu qabto, haddana baridda xirfad kale ama kobcinta xirfaddii hore ayaa badanaa ka dhaca dibadda waxbarashadii soo-jireenka ahayd. Tababarka aan tooska ahayn iyo midka uu kafaalo-qaado loo-shaqeeyaha ayaa guuleysta; waxa la soo bandhigayo waxaa uu si toos ah ula xiriiraa inta ay le'eg tahay sharikadda. Natiijooyin ka soo baxay Baraanmijka Cabbiraadda Xirfadaha ee Bankiga Adduunka ee STEP *Skills Measurement Program* ayaa muujinaya in loo-shaqeeyeyaashu ay shaqo-ku-dhex-tababaridda ay ka door-bidaan barnaamijyada tababareed ee ka dhaca dibadda shaqada ee ay bixiyaan hay'adaha rasmiga ah ee dowladda ama kuwa gaarka loo leeyahay.

Maamulidda laga wada-qaybqaato ee nidaamyada kobcinta xirfadaha waa mid aan shiddo yareyn. Nidaamyada TVET ayaa badanaa weli ah kuwo meel dhexe laga maamulo. Shuruucda qaran ee qiimeynta waxbarashada ee in ka badan 150 dal ayaa hiigsanaya in ay maamulka TVET ka dhigaan mid ka-wada-qayb-qaadashadiisu ay dhaanto sida uu hadda yahay oo una habboon hadafka laga leeyahay, inkasta oo sii-wanaajinta daah-furnaanta iyo u-habboonaanshaha xirfaduhu ay weli mudnaan siinayaan hay'adaha dowladda. Taabogalnimada nidaamyada TVET waxaa caqabad ku ah hababka hubinta tayeynta oo qayb ahaan la hirgeliyo. Wada-tacaamulka waaxaha ganacsiga gaarka loo leeyahay iyo waxbarashada ayaa ay u badan tahay in diiradda lagu saaro soo-ogaanshaha xirfadaha halkii xoogga lagu saari lahaa horumarinta manaahijta. Nidaamyada xirfadeed ee sida habboon ula jaanqaadaya is-beddelka dhaqaale ayaa ah kuwa ku tiirsan habab saddex-geesood ah, oo la shaqeynaya xoogagga bulshada iyo dhaqaalaha. Iskaashiga maamulka iyo ganacsiga gaarka loo leeyahay ee ku wajahan aqoonta iyada oo loo marayo golayaasha xirfadaha waaxaha ayaa la abuurey si loo sii wanaajiyo fahmidda baahiyaha suuqa shaqada.

Nidaamyada kobcinta xirfadaha waxaa ay ku tiirsan yihiin maaliyad ay ka helaan dowladda iyo cid aan dowladda ahayn. Marka laga soo tago qoondeymaha tooska ee dowladaha, nidaamyada TVET waxaa ay isku dayaan in ay kala duwaan ilaha ay maaliyadda ka helaan iyaga oo u maraya cashuuraha ama maaliyadaha loogu talogaley tababarrada la halmaala sharikado. Xoogagga aan dowladda ahayn ayaa sidoo kale si toos ah ugu lug lahaa iyada oo loo marayo wax-soo-iibsi ku dhisan tartan, laakiin natiijooyinku waa ay kala duwanaayeen. Loo-shaqeeyeyaasha ayaa lagu dhiirrigeliyaa in ay bixiyaan tababar iyaga oo u maraya barnaamijyada cashuurta-deeqda. Weli, sharikaduhu lacag yar ayaa ay ku bixiyaan tababarrada, maaddaama waxa dad ku dhiirrigelinayaa tababarku ay mar walba ka hooseeyaan waxa dad ku dhiirrigelinaya in xirfadaha loo baahan yahay si toos ah looga soo qaato suuqa shaqaalaha. Dowladuhu waxaa ay lacago dhiirrigelin ah siiyaan shakhsiyaadka iyaga oo dhabarka u rita kharashaadka tababarka ee tooska ah iyo kuwa aan tooska ahayn iyaga oo u mara xisaabo ama xuquuqo waxbarasho oo shakhsi ah.


Ururrada aan dowliga ahayn iyo kuwa bulshada ayaa ku xooggan barnaamijyada waxbarashadaa Dadka Waaweyn. Iyaga oo u maraya xarumaha waxbarashada, barnaamijyada akhris-qoraalka iyo kuwa la midka ah, NGO-yada ururrada bulshada rayidka ah ayaa la xiriira kooxaha nugul ee ah dadka waaweyn ee caadi ahaan dibadda ka joogey waxbarashada rasmiga ah. Xaaladaha qaar, dowladaha ayaa ku tiirsan adeegyadooda si ay u bixiyaan barnaamijyada heerka qaran ah ee waxbarashada dadka waaweyn iyo kuwo fursad labaad lagu siinayo; xaalado kale, kooxahaasi waxaa ay dureen waxbarashada dadka waaweyn ee ay dowladdu

bixiso waxaana kuwaas ugu cadcad Latin America, t.a. in ay dhiirrigeliyaan in luqadaha aan ahayn kuwa ugu waaweyn lagu bixiyo akhris-qoraalka dadka waaweyn; hadddana xaalado kale, ayaa iyana waxaa saameyn ku leh arrimaha mudnaanta u leh deeq-bixiye. Sida ay uga hawlgalaan dejinta siyaasadaha dowladda ayaa weli ah mid xaddidan, inkasta oo galbeedka iyo bartamaha Afrika, istiraatiijiyadda maamul-daadejinta iyo cid kale ka soo qaadashada adeegga ay ka dhasheen natiijooyin wanaagsan, iyada oo dowladdu ay kormeereyso ayna qaybineyso kheyraadka halka xoogagga aan dowladda ahayn ay mas'uul ka yihiin bixinta adeegga.

Waaxda ganacsiga gaarka loo leeyahay ayaa sii ballaarisey kaalinteedii waxbarashada dadka waaweyn, gaar ahaan barashada afafka.
Sharikado gaar loo leeyahay ayaa laga yaabaa in ay ku lug yeeshaan waxbarashada dadka waaweyn iyada oo loo marayo horumarka bulshada, iyada oo badanaa qayb ka ah dadaallada mas'uuliyadda sharikadaha ka saaran bulshada ama bixinta tiknolojiyada macluumaadka iyo isgaarsiinta.

Muhiimadda sii ballaaraneysa ee barashada luuqadaha iyo qiimeynta ayaa soo-jiidatey sharikado faa'iido-doon ah. ilaa 40% dadka Af-Ingiriisiga ku barta dalalka Argentina iyo Peru ayaa wax ka dhigta macaahid luuqadeed oo gaar loo leeyahay. Barashada afafka ee loo adeegsado telefoonka gacanta ayaa sidoo kale baahaysa, laakiin waa laga doodayaa taabogalnimadeeda.

TALO-SOO-JEEDIN



Dugsiyada looma kala saari karo keliya dugsiyo ay dowladdu leedahay iyo kuwo gaar loo leeyahay, noocyada dugsiyada aan ahayn kuwa dowladdu waa ay badan yihiin. Intaa waxaa dheer, doorka xoogagga aan dowladda ahayni aad buu u dhaafsan yahay bixinta adeegyo waxbarasho dugsi oo waxaa uu gaarsiisan yahay waxqabadyo kale oo heerarka kala duwan ee waxbarashada oo loo sii marayo waddooyin badan oo saameyn leh. Su'aasha u taalla siyaasad-dejiyeyaashu ma ahan oo keliya in ku-lug-lahaanshaha xoogagga aan dowladda ahayn ee waxbarashada ay ka soo baxayso jaangooyooyinkii lagu heshiiyey ee tayada, ee waxaa ay sidoo kale la xiriirtaa sida xoogagga aan dowladda ahayn ay gacan uga geystaan ama caqabad ugu noqdaan dadaallada lagu hubinayo tayada iyo u-dhammaanshaha waxbarashada.

Laba jiho oo istiraatiiji ah, oo la xiriira maaliyad-siinta iyo adeeg-bixinta, ayaa ugu muhiimsan hawsha dowladdu ee ah dhowridda iyo ka-soo-bixidda xuquuqda waxbarashada. Ugu horreyn, dowladuhu waxaa ay sanadkii 2015kii ballanqaadeen in dhammaan carruurta iyo dhallinta da'da yar ay heli doonaan waxbarasho ay dowladdu maalgeliso oo ah sanad waxbarashada xannaanada ah iyo 12 sano oo dugsi hoose/dhexe iyo sare ah. Haseyeeshee, iyada oo mid ka mid ah saddexdii dalba uu wax ka yar 4% Wax-soo-saarka Guud ee Dalka (GDP) iyo 15% wadarta kharashaadka dowladda uu u qoondeynayo waxbarashada, ayaa qaar badan ballanqaadka siinin maaliyaddii uu u baahnaa. Midda labaad, dowladaha waxaa looga baahan yahay in ay go'aansadaan sida uu u xoogganaanayo doorka ay ka ciyaarayaan bixinta iyo maareynta waxbarashada. Sida ay u arkaan in la kala doorto dugsiyada iyo xoogagga aan dowladda ahayn ayaa aad u kala duwan.

Xoogag kala duwan oo aan ahayn dowladda ayaa si sidii hore ka badan uga soo dhex muuqdey dhinacyo badan oo ka mid ah waxbarashada. Ganacsiyada ayaa kala xusha in waxbarashadu ay tahay hawl lacag laga helo iyo sida ay u suuqgeynayaan badeecooyinkooda iyo adeegyadooda, sidoo kale cidda la xisaabtameysa: keliya saamileyda mise sidoo kale kuwo kale? NGO-yada iyo ururrada bulshada rayidka ah ayaa xusha arrimaha mudnaanta leh oo go'aansadana sida ay wax uga qabanayaan: kaalinta dhimman miyey buuxinayaan mise waxaa ay u qareemeynayaan in ay dowladdu buuxiso? Mu'asasooyinka ayaa sidoo kale dejiya arrimo mudnaan u leh oo xusha sida ay saameyn ugu yeelanayaan bulshada iyo ilaa xadka ay la shaqeynayaan nidaamyada dowladda. Macallimiinta iyo ururradooda ayaa xusha waxyaabaha xoojinaya ama meesha ka saaraya kalsoonida lagu qabo nidaamyada waxbarashada ay dowladdu bixiso.

Hal-ku-dhegga warbixinta – Yaa soo xulaya? Yaa wax ku waayaya? – ayaa ah mid siyaasad-dejiyeyaasha ku tirtiriisinaysa in ay farta ku godaan xiriirrada ay la leeyihiin xoogagga aan dowladda ahayn marka laga hadlayo xulashooyinka aasaasiga ah ee la kala xulanayo: xor-u-ahaanshaha kala doorashada iyo u-sinnaanta; la kala dooranayo dhiirrigelinta hindise (yacni sii wanaajinta

tayada meel kasta oo ka mid ah nidaamka) iyo dejinta jaangooyooyin (yacni sii wanaajinta tayada dhammaan bartayaasha); la kala xulanayo kooxaha dadweynaha ee tabartoodu iyo baahidoodu kala duwan tahay; la kala dooranayo ballanqaadyadooda markaa taagan (yacni 12 sano oo waxbarasho lacag la'aan ah oo hoos yimaada SDG 4) iyo kuwa ay tahay in si tartiib-tartiib ah loo xaqiijiyo (t.a. waxbarashada ka dambeysa dugsiga sare); oo la kala dooranayo waxbarashada iyo qaybaha kale ee bulshada.

Iyada oo fikradahaa ay dad ka guuxayaan, ayaa la diyaariyey talooyinkan soo socda si ay gacan uga geystaan #SixiddaXeerarka ama #*Righttherules* si loo hubiyo in u-sinnaantu waxbarashada lagu ilaaliyo maaliyadsiinta, tayada, maamulka, hal-abuurka iyo siyaasad-dejintaba. Hadafka la hiigsanayo waa in laga faa'iideysto waxa ay xoogagga aan dowladda ahayn ay gacan uga geysan karaan bixinta waxbarasho tayo leh iyada oo aan wax loo dhimmin u-sinnaanta. Abaabulidda waxqabadkan suuragalka ah ayaa sidoo kale dowladaha culeys ku saari kara in ay si quman wax uga qabtaan tayada hooseysa iyo u-sinnaan la'aanta ka jirta waxbarashada ay dowladdu bixiso. Talo-soo-jeedinta waxaa aasaasiyan ay ku wajahan tahay dowladaha, oo looga baahan yahay in ay jawaabo ka bixiyaan shan su'aalood oo muhiim ah iyaga oo ka eegayo dhinacyada u-sinnaanta iyo u-dhammaanshaha. Haseyeeshee, waxaa sidoo kale lagu doonayaa in ay agab u-qareemeyn ahaan u adeegsadaan dhammaan xoogagga waxbarashada ee ay ka go'an tahay in ay taageeraan horumar laga gaaro SDG 4. Sidaa daraaddeed, talo-soo-jeedintu waxaa ay dhammaan xoogagga kala duwan, dowladda iyo kuwa aan dowlad ahaynta, ugu baaqeysaa in ay ka-qaybqaataan #SixiddaXeerarka.

1. MAALIYAD-SIINTA WAXBARASHADU MA WAXAY U ROON TAHAY QAAR KA MID AH BARTAYAASHA HALKA AY DIBADDA U SAAREYSO QAAR KALE??

Ka-soo-baxidda ballanqaadka ah in lacag la'aan lagu dhigto 1 sano oo waxbarashada xannaanada ah iyo 12 sano oo dugsi hoose/dhexe iyo sare – laakiin in dowladdu lacagta waxbarashada bixiso macnaheedu ma aha in dowladdu ay bixiso waxbarashada haddii la hubin karo u-sinnaanta



Dowladuhu waa in ay waxbarasho tayo wanaagsan oo lagu helo halka ay taallo ka dhigaan lacag la'aan. Waxaa looga baahan yahay in ay hubiyaan in qoysasku aaney bixin kharashka badeecadaha iyo adeegyada waxbarashada ee ay dalalkoodu ku ballanqaadeen in ay ka dhigi doonaan lacag la'aan.

Dowladaha waxaa looga baahan yahay in ay toos u kharashgareeyaan waxbarashada, iyaga oo adeegsaneysa sahamada dakhliga iyo kharashaadka qoysaska. Waxaa ay badanaa indhahooda ka weeciyaan kharashaad aan sidii habbooneyd aan loo dokumenti-gareyn oo kordhiya sinnaan la'aanta.

Dhammaan adeeg-bixiyeyaasha, dowlad iyo cid aan dowlad ahaynba, waa in ay shuruudo isku mid ah siiyaan ardayda. Ballanqaad ku aaddan in waxbarashadu ay ahaato mid ay dowladdu maaliyaddeeda bixiso macnaheedu ma aha in dhammaan waxbarashada ay waajib tahay in ay dowladdu bixiso. Laakiin dhammaan macaahidda waxbarashadu waa in loola tacaamulaa in ay qayb ka wada yihiin nidaam keliya oo leh xeerar, taageero maaliyadeed iyo habab kormeer oo isku mid ah.

Iskudday kasta oo lagu kala duwayo noocyada kuwa bixiya waxbarashada waa in loo sameeyaa qaab hubinaya u-sinnaanta. In qandaraas lagu bixiyo maareynta dugsiyada dowladda, in la kaabo kharashaadka hawlgalka dugsiyada gaarka loo leeyahay ama in maaliyad la siiyo qoysaska si ay carruurtooda u geeyaan dugsiga ay rabaan ayaa si fudud u noqon karta mid ay ka faa'iideystaan bartayaasha dhaqaale ahaan roon.


Dugsiyadu waa in aaney xulan ardayda. Dalalku waxaa ay ballanqaadeen in aan dadka lagu kala takoori doonin waxbarashada, taas oo ah mabda' ay waajib tahay in uu ka muuqdo siyaasadaha ay dugsiyadu ku qaataan ardayda. Intaas waxaa dheer, xaqa ay qoysaska iyo ardaydu u leeyihiin in ay xushaan dugsiyada ay rabaan waa in uusan uga sii darin sinnaan la'aanta.

Adeeg-bixiyeyaasha ay dowladdu maaliyad-siiso waa in aaney ardayda ka qaadin wax lacag ujuuro ah. Inkasta oo dhammaan dalalku ay tahay in ay higsadaan in ay hubiyaan in waxbarashada dugsiyada xannaada ah, hoose/dhexe iyo kuwa sare ay ahaato mid lacag la'aan ah, haddana qaar badan ayaa ka fog xaqiijinta arrintaas. Xataa macaahidda gaarka loo leeyahay ee dowladda ku tiirsan waxa ay qaadaan ujuuro.

Faa'iido-sameyn lama jaanqaadeyso ballanqaadka ah in la hubiyo in waxbarashada dugsiyada xannaanada, hoose/dhexe iyo kuwa sareba ay ahaato lacag la'aan. Nidaaminta ama mamnuuciyadda in faa'iido laga sameeyo ayaa loo adeegsan karaa wax-ka-qabashada siyaasado uga sii daraya sinnaan-la'aanta.

2. DHAMMAANO BARTAYAASHA MA HELAAN TAYADA WAXBARASHADA AY XAQA U LEEYIHIIN, MISE QAAR KA MID AH AYAA LA KHAYAAMEEYAA?

Waa in la sameeyaa jaangooyooyin tilmaamaya tayada oo lagu maamulo dhammaan macaahidda waxbarashada ee dowladda iyo kuwa aan dowladdu lahaynba



Waa in dowladuhu ay sameeyaan jaangooyooyin tayada la xiriira oo lagu maamulayo dhammaan macaahidda waxbarashada. Jaangooyooyinka tayada, oo aan la xiriirin keliya waxa la gelinayo ee sidoo kale la xiriira natiijooyinka, ilaaliyaan kuwa dhibaatada ugu badan ay ka soo gaari karto. Waa in sidoo kale ay la halmaalaan bedqabka iyo u-sinnaanta. Waa in ay u habboonaadaan heerka ay dugsiyadu joogaan ayna gacan ka siiyaan sidii ay u sii wanaagsanaan lahaayeen. Waa in la qiimeeyaa sida uu uga soo baxo dugsi kasta, mid dowladeed iyo mid kaleba, waana in looga soo warbixiyaa si cid walba ay ogaan karto.

Waa in macallimiinta dhammaan dugsiyada lagu qiimeeyaa xirfadlenimadooda. Waxbarashada iyo fursadaha kobcinta xirfadeed ee macallimiinta waa in aaney ku kala duwanaan adeeg-bixiyeyaasha. Macallimiin ku kala duwan suuqyada shaqada iyo mushaarraadka ay qaataan iyo xaaladahooda shaqo Jiritaanka suuqyo shaqo oo kala duwan oo macallimiinta iyo sinnaan la'aan ballaaran oo la xiriirta mushaarka iyo xaaladaha shaqo ee macallimiinta ayaa callaamado xooggan u ah nidaam waxbarasho oo aan si wanaagsan u shaqeyn. Dowladaha waxaa looga baahan yahay in ay si tartiib-tartiib ah wax uga qabtaan dhammaan sababaha aasaaska u ah isu-dheellitirnaan la'aantaas.

Si loo korjoogteeyo loona dhaqangeliyo jaangooyooyinka waxaa loo baahan yahay jiritaanka hababka hubinta tayada. Waa in uu joogto ahaadaa kormeerka dowladda oo loo marayo kormeerrada dugsiyada, qiimeynta iyo daraaseynta barashada, iyada oo aan loo eegeynin cidda bixineysa adeegga waxbarashada. Hababkan waa in ay ku xisaabtamaan kartida ay dowladdu u leedahay dhaqangelinta.

Waxaa dalalka looga baahan yahay geeddi-socodyo xooggan oo hubinaya tayada waxbarashada farsamada, mihnadaha iyo tacliinta sare. Inta ay dowladuhu kaabayaan shakhsiyaadka ama qandaraas ku siinayaan sharikado si ay u dhiirrigeliyaan tababarka, waxaa looga baahan yahay in ay kuwa ugu saboolsan, oo u jilicsan ka ilaaliyaan in la khiyaamo. Jaamacadaha faa'iido-doonka ah ayaa looga shakiyey in ay bixiyaan waxbarasho ay tayadeedu aad u hooseyso iyo in ay ku lug leeyihiin dhaqan-xumo.


Dowladuhu waa in ay ka hortagaan in casharrada gaarka ah ee dheeriga ah ay saameyn xun ku yeeshaan tayada iyo u-sinnaanta nidaamka. Siyaasadaha wax looga qabanayo ayaa kala duwan oo u dhexeeya min in macallinka casharrada gaarka ah dhiga lagu waajibiyo rukhsad uu wax dad ugu dhigo ilaa diiwaanno internet-ka ku shaqeeya si loo helo kormeer wanaagsan. Mamnuucidda ayaa iyana ah fursad kale laakiin waxaa ay sababi kartaa soo-ifbixidda suuqyo aan rasmi ahayn. Arrinta mudnaanta leh waa in ay ahaataa wax-ka-qabashada sababaha udub-dhexaadka u ah, mushaarka macallimiinta ee hooseeya iyo muhimadda la siiyo imtixaannada kama-dambeysta ah.

3. XEER-NIDAAMIYEYAASHU MA YIHIIN KUWO WAXTAR LEH OO SHAQEEYA MISE WAXAA KA DHASHA CAWAAQIB AAN LOOLA DAN LAHAYN OO WAX U DHIMA BARTAYAASHA SABOOLKA AH?

Waa in la sameeyaa geeddi-socodyo korjoogteyn iyo taageero oo ka wada dhexeeya oo ku habboon dhammaan macaahidda waxbarashada ee dowladda iyo kuwa aan dowladdu lahayn

Dowladuhu waxaa ay u baahan yihiin himilo iyo sharci guud oo cad oo ku saabsan sida ay doonayaan in ay ula shaqeeyaan xoogagga aan dowladdu ahayn iyo in ay himiladaasi la gaarsiiyo kuwa ay khuseyso

iyada oo loo marayo xeer-nidaamiyeyaal. Waa in xeer-nidaamiyeyaashu aanay diiradda saarin arrimaha maamulka iyo jaangooyooyin waxa la gelinayo oo aan xaqiiqo ku dhisneyn ee laakiin waa in ay diiradda saaraan geeddi-socodyada iyo natiijooyinka waxbarashada waana in muddo ka-dibba dib-u-eegis lagu sameeyaa oo wax looga beddelaa si daahfuran oo lagana wada-qaybqaato, iyada oo in ay wax ku soo biiriyaan laga codsanayo dugsiyada dowladda iyo kuwa aan dowladdu lahayn.



Adeeg-bixiyeyaasha waxbarashadu waa in mar walba ay maamulada waxbarashadu u nidaamiyaan in ay yihiin hay'ado waxbarasho ee aaney marna nidaamiyeyaasha suuqa u nidaamin sidii in ay yihiin ganacsiyo. Qaar ka mid ah adeeg-bixiyeyaasha ayaa loo nidaamiyaa sidii ganacsiyo marka ay ku hawlan yihiin xannaanada carruurta yaryar iyo waxbarashada, marka ay bixiyaan casharro dheeri ah oo gaar ah iyo tababar mihnadeed. Sidoo kale, adeeg-bixiyeyaal kale ayaa ay kormeertaa wasaaradaha daryeelka bulshada ama arrimaha diinta.

Xeer-nidaamiyeyaashu waa in ay ahaadaan kuwo fudud, daahfuran oo hufan. Arrinta yaabka leh waxaa ay tahay in kartida xeer-nidaamin ay ugu hooseyso halka ay ugu badan tahay baahideeda, oo suuragalnimada musuqmaasuq ay ugu badan tahay. Halka awoodda korjoogteynta iyo dhaqangelintu xeerar aan macquul ahayn ama aaney jirin, ayaa xeer-nidaamintu noqotaa mid aan u habbooneyn oo dhibaato un ay ka dhalato.

Dowladuhu waa in ay daacad ka ahaadaan sababaha iyo waxa ay doonayaan in ay nidaamiyaan. Geeddi-socodyada korjoogteynta iyo taageeradu waa in ay ahaadaan kuwo joogto ah, oo muujinaya in dowladuhu ay daneynayaan waxbarashada dhammaan carruurta, dugsiga ay dhigtaan nooca uu doono ha ahaadee. Sidoo kale dowladaha waxaa looga baahan yahay in ay ka shaqeeyaan in uu xiriir is-aaminaad iyo kalsooni uu kala dhexeeyo adeeg-bixiyeyaasha aan dowladdu ahayn, iyaga oo wargaarsiinaya dhiirrigelinta ku habboon si ay dugsiyadoodu ugu maamulaan si hufan.

4. FIKRADAHA WANAAGSAN EE WAXBARASHADA MA LA KOBCIYAA MISE WAA LA CABBURIYAAN?

Fududee baahinta hal-abuurka iyada oo loo marayo nidaamka waxbarashada si looga wada faa'iideysto



Siyaasad-dejiyeyaashu waa in ay yeeshaan awood ay ku aqoonsadaan hal-abuurka ayna waqti iyo meel ay ku kobcaan siiyaan fikradaha wanaagsan. Ma jirto cid ay ku gaar yihiin fikradaha wanaagsan. Waxbarashadu waa dadaal bulsho iyo nidaam kakan. Culeyska haysta siyaasad-dejiyeyaashu waa in ay dhiirrigeliyaann hal-abuurka, gaar ahaan marka guud ahaan dadweynuhu ay doonayaan in ay arrintu sideedii sii ahaato halkii ay wax cusub tijaabin lahaayeen.

Dowladdu waa in ay la shaqeysaa dhammaan xoogagga kala duwan si loo dhiso nidaam waxbarasho oo dad ka wada dhexeeya, iyada oo diiradda saareysa hab wada-tashi ku dhisan. Waxaa loo baahan yahay in la dhiso dhaqan is-aaminaad si loo dhiirrigeliyo hal-abuur. Abuurista xaaladihii loo baahnaa iyo bixinta fursado ay xoogag kala duwan ay ku wada tacaamulaan ayna isku kaashadaan ayaa nidaamka waxbarashada dowladda gacan ka siin karta in uu ka faa'iideysto fikrado iyo ilo khibradeed oo kala duwan oo uu ku sii ahaado mid waxtar joogto ah leh.

Ugu horreynba, dowladda waxaa looga baahan yahay in ay hal-abuurka ku dhex kobciso nidaamka waxbarashada dowladda. Waxaa looga baahan yahay in ay gudbiyaan farriin ah in ay ka go'an tahay in ay hiigsadaan halka ugu sarreysa. Waa in ay korjoogteeyaan barashada iyo waxyaabaha ay ku xiran tahay, in ay qiimeeyaan halka ay hab-dhaqanno wanaagsan ka dhacayaan, in ay bixiyaan kheyraad hawl-wadeennada u saamaxaya in ay

is-dhaafsadaan waayo-aragnimooyinka, ay tijaabiyaan fikradaha wanaagsan ayna ku baahiyaan.

Dowladuhu waa in ay sidoo kale casharro ka bartaan xoogagga aan dowladda ahayn. Habab madax-bannaan, xaaladda u habboon oo aan ad-adkeyn oo wax loo baro bartayaasha la fogeeyo ayaa waxaa ka dhalan kara faham cusub, oo ay tahay in dowladuhu ka faa'iideystaan, iyaga oo qiraya in karti-yaraantu ay ka hor-istaageyso in ay si habboon u korjoogteeyaan ayna u qiimeeyaan dugsiyada dowladda, iskaba daaye dugsiyada aan ahayn kuwa dowladda.

Doorka dowladdu waa in ay abuurto deegaan ku habboon oo uu ka dhaco hal-abuur. Waa in aan waxbarashada loo arkin suuq ay kuwa soo saara 'waxbarashada' ay kula tartamaan kuwa kale ee iyagana soo-saaraya. Taas beddelkeeda, waa fikradaha cusub la wadaagaa, la tijaabiyaa oo, haddii la caddeeyana, la qaataa, iyada oo dowladdu ay gacan ka geysaneyso in la faafiyo iyada oo loo marayo nidaamka waxbarashada iyo iyada oo xoogagga aan dowladda ahayn ay si iskaa wax u qabto ah u bixinayaan si looga wada faa'iideysto halkii ay ka raadin lahaayeen ujeeddooyin dhaqaale.

5. DHAMMAAN FIKRADAHA KALA DUWAN MA LA SIIYEY FURSADO ISKU MID AH SI LOO QAABEEYO DOODDA AY DADWEYNUHU KA YEELANAYAAN WAXBARASHADA?

In la joogteeyo daah-furnaanta iyo bedqabka geeddi-socodka siyaasadda waxbarashada si looga hor-istaago in looga faa'iideysto dano gaar ah



Siyaasad-dejiyeyaasha waxaa looga baahan yahay in ay tixgeliyaan fikiradaha kala duwan ee ay qabaan dhammaan daneeyeyaasha. Laakiin si la mid sida ay tahay in siyaasad-dejiyeyaashu ay tahay in ay u soo dhoweeyaan fikradaha kala duwan, waxaa sidoo kale muhiim ah in saraakiisha dowladda wax looga sheego shuruucda, siyaasadda iyo xeer-nidaamiyeyaasha waxbarashada si ay u noqdaan kuwo daahfuran. Qaar ka mid ah xoogagga ayaa laga yaabaa in ay ka shaqeynayaan kordhinta saamiga ay ka yihiin suuqa ama awoodda siyaasadeed halkii ay ka shaqeyn lahaayeen wanaagga dadweynaha.

Dowladaha waxaa looga baahan yahay in ay korjoogteeyaan ayna ka feejignaadaan galaangal ay sameeyaan dad dano gaar ah leh si ay uga hortagaan in ay saameyn aan qumaneyn ku yeeshaan siyaasadda guud. Si loo joogteeyo kalsoonida lagu qabo geeddi-socodyada siyaasadda dowladda, waxaa la qaadi karaa tiro tallaabooyin lagu dhiirrigelinayo daahfurnaanta, si ku xiran awoodda loo leeyahay, kuwaas oo ay ka mid yihiin xeerarka helidda macluumaadka oo dhiirrigelinaya in shaaca laga qaado deeqaha la siiyo xisbiyada siyaasadda iyo kulamada lala qaato saraakiisha sare ee dowladda, iyo xeerarka ka dhanka ah in saraakiisha dowladda ee ka taga shaqada oo qaata jagooyin ay ka heli karaan faa'iido u gaar ah iyo kuwa ka dhanka ah kuwa galaangalka ka shaqeysta iyo kuwa ay u shaqeeyaan ay gacanta ku dhigaan xafiis dowladeed. Talooyinkan la soo jeedinayo waxaa ay sidoo kale u habboon yihiin ururrada caalamiga ah oo dhammaantood u baahan siyaasad cad oo ay kula tacaamulaan xoogagga aan dowladda ahayn oo mudnaan siineysa u-sinnaanta iyo u-dhammaanshaha.

Korjoogteynta Waxbarashada ee Yoolalka Horumarinta ee Waara

Iyada oo ay soo-dhowdahay bartamihii waqtiga loo qabtey in la xaqiijiyo Yoolalka Horumarka Waara ee 2030ka, waxaa jira horumar muhiim ah oo laga gaarey diyaarinta qaababka guud ee korjoogteynta iyo beegsiga ay dalalku higsanayaan in ay xaqiijiyaan. Haseyeeshee, cudurka COVID-19 ee dunida ku faafay ayaa labadaa arrimoodba ku keeney caqabado waaweyn. Ma aha keliya in saameyntu ay soo gaartey agabka jaango'an ee loo adeegsado korjoogteynta horumarka laga gaarey waxbarashada, laakiin waxaa laga yaabaa in dib loogu noqdo beegsiyada la hiigsanayo laf-ahaantooda


DALALKA AYAA SOO GUDBIYEY GUULAHA QARAN EE MUDDEYSAN EE SDG 4

Qaabka Guud ee Tallaabo-qaadka Waxbarashada ee 2030ka ayaa dalalka ugu baaqey in ay dejiyaan guulo la hiigsado oo muddada dhexe ah oo u habboon (t.a. sanadka 2020ka iyo 2025ka)' ee laga gaaro tilmaamayaasha SDG 4 si loo qoro waxa uu dal walba u diyaar yahay in uu sameeyo si loo xaqiijiyo ajandaha caalamiga ah, iyada oo lagu xisaabtamayo xaaladahooda bilowga hore. Machadka Istaatistikada ee UNESCO Institute for Statistics (UIS) iyo kooxaha warbixinta GEM Report ayaa ka shaqeeyey abaabul beesha caalamka loogu jihaynayo halkaas. Ka dib markii tilmaamayaal toddoba ah loo xushey in lagu cabbiro 2019ka iyo talo-soo-jeedin loogu talogaley Baaqa Kulanka Caalamiga ah ee Waxbarashada (the Global Eduation Meeting Decleation) ee dhacay Oktoobar 2020 'si loo dardargeliyo horumarka oo loo soo jeedinayo cabbiraado u habboon oo xaqiiqo ku dhisan oo loogu talogaley tilmaamayaasha ugu muhiimsan ee SDG 4, dalalka ayaa laga codsadey in ay qiimayaasha cabbiraadda ee sanadka 2025 iyo 2030 ay soo gudbiyaan ugu dambeyn Oktoobar 2021. 39% dalalka ayaa soo gudbiyey qiimayaasha. 10% kale ayaa ku ballanqaadey in ay soo gudbinayaan, halka 14% kale ay xubno ka yihiin Midowga Yurub iyo Dalalka Caribbean Community oo leh cabbiraado heer gobol ah (**Jaantuska 3aad**).

Macluumaadka qiimayaasha laga bilaabey iyo qiimayaasha cabbiraadka qaran ee loo soo gudbiyey 2025 iyo 2030 waxaa hadda ay ka mid yihiin waddo cusub oo lagu helo xogta la xiriirta waxbarashada oo loo yaqaanno *the Global Education Observatory*. UIS iyo warbixinta GEM Report waxaa ay horraanta 2022ka soo saari doonaan warbixin halka wax laga bilaabey ah oo lafaguris ku sameyneysa natiijooyinka geeddi-socodkan.

Warbixintu waxaa ay muujin doontaa halka ay dalalka, gobollada iyo dunidu ay hiigsanayaan in ay gaaraan. Waxaa la qodobbeyn doonaa geeddi-socod si dalalka gacan looga siiyo dejinta beegsiyada waxbarashada meelaha aan weli loo sameyn laakiin sidoo kale, halkii ay u habboon tahay, si loo muujiyo raadka suuragalka ah ee COVID-19 uu ku yeeshey cabbiraadaha qaran inta ay xogtu soo ifbaxay

JAANTUSKA 3AAD:
Laba ka mid ah saddexdii dalba ayaa ka-qaybqaatey geeddi-socodkii lagu dejinayey cabbiraadaha SDG 4
Saamiga dalalka marka loo eego sida ay u soo gudbiyeen cabbiraadaha qaran ee SDG 4 ugu dambeyn Oktoobar 2021



Isha laga soo dheegtey: https://bit.ly/GEM2021_Summary_fig3
Sources: UIS and GEM Report teams.
EU = European Union; CARICOM = Caribbean Community

COVID-19

COVID-19 AYAA SAAMEYN KU YEESHEY SUURAGALNIMADII LAGU XAQIIJIN LAHAA SDG 4 IYO AWOODDII LAGU KORJOOGTEYN LAHAA HORUMARKA

COVID-19 ayaa ah dhibaatada ugu ba'an ee weligeed mar ku wada dhacdey nidaamyada waxbarashada ee adduunka. Dugsiyada ayaa la xirey 28% maalmaha waxaana qayb ahaan la xirey 26% maalmaha intii u dhaxaysey Maarso 2020 iyo Octoobar 2021. Halkii ugu sarreysey waxaa ay gaartey bishii Abriil 2020 (95%). Intii u dhaxaysey Sebtembar 2020 iyo Agoosto 2021, dugsiyada ayaa gebi-ahaanba la xirey ama qayb ahaan xirnaa kalabar maalmaha dugsiga (**Jaantuska 4aad**). Dalal ayaa dugsiyadooda ku tilmaamey in ay qayb ahaan xiran yihiin xataa marka ay badidoodu xirnaayeen

Istaatistiskada rasmiga ah ee SDG 4, badanaa, waa tii 2019kii waxaana ay muujineysaa xaaladdii jirtey ka hor cudurka dunida ku faafey. Daraaseyn uu mac-hadka UIS uu waaxaha qorsheynta ee wasaaradaha waxbarashada ee 129 ku sameeyey intii u dhaxaysey Juunyo iyo Sebtember 2020 ayaa lagu ogaadey in saddex-meelood laba ay ku khasbanaadeed in ay daahiyaan xog-ururinta ama ay dib ugu dhigaan sanad-dugsiyeedka xiga maaddaama saameyn dhexdexaad ah ama ba'an ay dhibaatadu ku yeelatey in ay ka soo baxaan shuruudihii diyaarinta warbixinnada. Maamulka sahanka ayaa sidoo kale dhibaato ba'an ay soo gaartey intii uu socdey cudurka dunida ku baahay.

Qaar ka mid ah barnaamijyada sahamada ballaaran ee qoysaska lagu sameeyo ayaa isu rogey sahamo telefoonka lagu qaado. Laakiin in ka badan 25 sahan oo la qorsheeyey ama socdey 2020kii ayaa waxaa daahey hawshii goobaha shaqada laga qabanayo laga soo fulin lahaa. Waa in natiijooyinku ay si taxaddar leh ugu xisaabtamaan goorta dhab ahaan hawsha goobaha shaqada laga soo qabtey iyo in dugsiyada degaannadaa ka dhow ay furnaayeen waqtigaan. Intaa marka laga soo tago, daraaseynta barashada ayaa ay dhibaatadu saameysey. Tusaale ahaan, sanadkii 2021 wareeg ka mid ah Barnaamijka Daraaseynta Caalamiga ah ee Ardayda ayaa dib loo dhigey muddo sanad ah.

Tiro badnaanta ilaha macluumaadka, oo ay la socoto kala-duwanaanta hababka cilmi-baarista, naamuunadaha, waqtiga iyo xaaladaha, ayaa macnaheedu yahay in hawsha diyaarinta warbixin ku saabsan raadka COVID-19 ay weli tahay mid culeyskeeda leh. In xog maamul iyo sahamo aaney ka jirin Itoobiya, Ghana iyo Senegal ayaa caddeyn hordhac ah u ah in carruurta ay ku soo noqonayaan dugsiyada ka dib marka dib loo furo, inkasta oo kor-u-kaca heerarka ku-celinta fasalladii hore uu macnaheedu noqon karo in carruurta dugsiyada ka tageysa dib un loo dhigey.

Labada arrimood ee welwelka ugu weyn laga qabo ayaa ah raadka kala go'a barashada iyo sida aan sinneyn ee ay u qaybsan yihiin dhibaatada cashar-barashada ardayda (*negative learning*) iyo dhibaatooyinka kale ee la soo gudboonaada bartayaasha saboolnimadoodu ay saa'idka tahay.

Guud ahaan dunida keliya mid ka mid ah saddexdii carruur ah, iyo mid ka mid ah lixdii carruurta ugu saboolsan ah, ayaa heli karey *internet*. Sidaa daraaddeed hababka ugu taabogalsan ee aqoon-dirsadka ayaaney heli kareyn bartayaasha ugu badan, waxaana dadaallada lagu ballaarinayo hababka noocaas ah ay ahaan lahaayeen kuwo dhibaato ku ah u-sinnaanta muddada dhow iyo muddada dhexe. Adeegsiga barnaamijyada waxbarashada loo adeegsado ee telefoonka gacanta, oo saxaafaddu ay aad uga hadashey, ayaa ahaa habka barashada casharrada ee ugu yar ee aqoon-dirsadka ah ee sahan laga sameeyey lix dal oo ka mid ah kuwa ka hooseeya Saharaha Afrika, aaney 17% ka badneyn carruurta ku isticmaala Nigeria iyo 12% dalka Itoobiya iyo dalalka Burkina Faso, Malawi, Mali iyo Uganda oo ku dhowaad jirin cid adeegsataba.

Dhibaatada soo gaarta waxbarashada waxaa ay ku xirnaan doontaa muddada dugsiyadu ay xirnaanayaan, habka barashada aqoon-dirsadka ah iyo ilaa xadka ay ardaydu helayaan caawimo, arrimahaas ay aad ugu kala duwanaayeen dalalka kala duwan ama dal gudihiis. Badi daraasadaha waxaa laga sameeyey dalalka dakhligoodu sarreeyo. Iyada oo celcelisku isku mid ahaa toddoba dal, ayaa hoos-u-dhaca barashada ay la mid ahayd 30% sanad-dugsiyeedka maaddada xisaabta iyo 35% akhriska, celcelis ahaan, haddii dugsiyadu xirnaayeen siddeed toddobaad. Laakiin dalka Faransiiska, natiijooyinka akhirksa iyo xisaabta ee ardayda fasalka 6aad ayaa sii wanaagsanaadey.

Waxaa muuqata caddeynta in raadadku ay ku xirnaayeen kala duwanaanshaha xaaladaha bulsho-dhaqaale. Dalka Mareykanka, lafaguris lagu sameeyey heerarka gudbidda imtixaanaadka ee ardayda fasallada 3aad ilaa 8aad ee 12 gobol ayaa muujisey in marka casharradii toos fasalka dhexdiisa lagu siinayey laga dhigo kuwo isku-dhafan ama gebi ahaanba lagu siiyo qaab fasal-u-ekeysiin ah ay raad xun oo ah 10 dhibcood boqolkiiba ku reebtey xisaabta iyo 4 dhibcood boqolkiiba oo ay ku reebtey maaddada Ingiriisiga. U wareegidda hab gebi ahaanba isku dhafan ama u ekeysiin fasal ah ayaa heerka gudbidda hoos u dhigey 4 dhibcood boqolkiiba degmo aan lahayn arday Madow ama *Hispanic* ah laakiin waxaa uu ku reebey

9 dhibcood boqolkiiba degmo ay 50% ardaydu yihiin Madow ama *Hispanic*.

Waa ay yartahay qiimeynta tooska ah ee barashada ee laga sameeyey dalalka dakhligoodu uu hooseeyo iyo kuwa uu dhexdhexaadka yahay. Magaalada São Paulo, Brazil, ardayda dugsiyada sare ayaa bartey keliya 27.5% wixii ay ku baran lahaayeen dugsiga haddii uusan imaan lahayn cudurka dunida ku baahay; ardayda dugsiyadooda dib loo furey ayaa ay yareyd hoos-u-dhaca waxbarashadooda. Dalka Colombia, ardayda ayaa natiijooyinkoodu hoos u dhacay shan dhibcood marka loo eego tii sanadkii hore, taas oo ka dhigan afar-meelood meel sanad-dugsiyeedka. Dalka Koonfur Afrika, ardayda fasallada 2aad iyo 4aad ayaa kala lumiyey 57% iyo 81% sanadkii xirfadaha akhriska ee 2020kii, marka loo eego kuwii ardayda fasalladaas oo kale ee ka hor cudurka dunida ku faafey.

Qiimeynta ay muwaadiniintu hoggaamiyaan ee Warbixin-Sanadeedda Xaaladda Waxbarashada ee Koonfurta Aasiya ayaa muujisey in heerarka barashadu ay hoos u dhaceen fasallada hoose. Miyiga gobolka Karnataka, dalka Hindiya, boqolleyda kuwa akhrin kara qoraal fasalka 2aad ah ee ardayda dhammaan fasallada kala duwaan ayaa hoos u dhacay laakiin hoos-u-dhaca waxaa ugu sii darnaa ardayda fasalka 4aad (oo hoos uga soo dhacay 33% oo noqdey 18%) intii u dhaxaysay 2018kii iyo 2020kii. Dalka Pakistan, sahan laga fuliyey 16 degmo ayaa lagu ogaadey in hoos-u-dhac waxbarasho oo kaas la mid ah oo la xiriira xirfadaha aasaasiga ah uu ku yimid fasallada 1aad iyo 3aad laakiin aan lagu arag fasalka 5aad.

Caddeyta kala duwan, ayaa marka la isu geeyo, waxaa ay xaqiijineysaa in xiritaanka dugsiyadu uu raad xun ku leeyahay barashada carruurta. Haddii waxa ay ku luminayaan loo qeexo sida uu dhigayo heerka ugu hooseeya ee xirfadaha ee SDG 4, raadku waxaa uu ku sii darnaan karaa dalalka dakhligoodu uu dhexdhexaadka yahay marka loo eego kuwa uu dakhligoodu hooseeyo, kuwaas oo heerarkooda uu markii horeba uu aad u hooseeyey, ama dalalka dakhligoodu uu sarreeyo, kuwaas oo dugsiyadu ay xirnaayeen muddo ka yar kuwa kale oo ardayduna ay si ka wanaagsan sida kuwa kale ay u heli kareen casharrada *internet*-ka loo adeegsado. Haddana, dhinacyo badan ayaan weli la ogeyn, kuwaas oo ay ka mid yihiin in heerarka barashada ay dib halkoodii ugu soo noqon karaan ama in COVID-19 uu raad muddada dheer ku reebi doono barashada.

Si ay u khafiifiyaan raadadka uu reebey, ayaa dalalku waxaa ay dheereeyeen ama ay wax ka beddeleen sanad-dugsiyeedka waxaana ay mudnaan siiyeen qaybo ka mid ah manhajka ama xirfado gaar ah. Saddex-meelood laba dalalku waxaa ay soo sheegeen in ay tallaabooyin wax lagu saxayo ka hirgeliyeen waxbarashada hoose/dhexe iyo sare. Dalka Filibiin, Waaxda Waxbarashada ayaa soo saartey dhabbe-tuseyaal hagaya casharro lix toddobaad soconaya oo wax lagu saxayo oo loola dan lahaa ardayda imtaxanaadka dhammaadka sanadka ka heley natiijo ka hooseysa 75% . Barnaamijka Qaran ee Casharrada Dheeriga ah ee Ingiriiska/*the National Tutoring Programme* ee Ingiriiska ayaa taageeraya koorso casharro gaar ah oo la siinayo ilaa 6 milyan oo arday sabool ah.

Cudurka dunida ku baahay waxaa uu sidoo kale culeysyo aan horey loo arag ku keeney **macallimiiinta**. Xiritaanka dugsiyada ayaa macallimiin badan ku noqdey lama-filaan u-wareegidda loo wareegey in arday meel fog joogta wax loo dhigo, kuwo aan hubin waxa uu noqon doono doorkooda iyo kuwo aan aqoon tiknolojiyada. Sahan lagu sameeeyey in ka badan 20,000 macallin oo kala jooga 165 dal, ayaa 39% waxaa ay sheegeen in uu bedqabkooda jireed, maskaxeed iyo dareen ay dhibaato soo gaartey in uu socdey cudurka dunida ku baahay. Dhinaca kale, 50% dadkii la wareystey ayaa xusey in ay jecleysteen fasaxooda. Dhibaatada ayaa keentey su'aalo la xiriira inta gelin ee loogu baahan yahay waxyaabaha ku jira waxbarashada macallinka. Marka laga soo tago aqoonta xirfadeed, macallimiintu waxaa ay u baahan yihiin in ay wax ka qabtaan baahiyo cusub oo la xiriira bulshada-dareenka iyo waxbarashada

Waxbarashada lagu gaarayo **horumar waara** iyo **muwaadinnimada dunida** waa mid loogu talogaley in wax lagaga qabto dhibaatooyinka ka jira duni si sii kordheysa isugu-xirmeysa laakiin uu mustaqbalkeedu halis ku jiro. Sidaas oo ay tahay haddana COVID-19 ayaa dibadda soo dhigey sida nidaamyada waxbarashada ay ugu guuldarreysteen ka shaqeynta mabaa'diida midnimada iyo tolweynimada dunida (*multilateralism*), waxaana sinnaan-la'aanta sii weynaaneysa ee ka jirta dal dhexdiisa ama dalal kala duwana ka dhalanaya welwel la xiriira sida loogu dhaqmayo waxa wanaagsan. Dunida ayaa u soo joogtey jawaabo arrintaa laga bixiyey oo u socda jihada kale, marka laga bilaabo sedbursiga tallaalka (*vaccine nationalism*) ilaa siyaasado ku dhisan nacaybka dadka dalalka kale iyo baahidda fikrado takoor ku dhisan. COVID-19 ayaa sidoo kale muujiyey muhiimadda weyn ee ay leedahay in dadku ay fahmaan arrimaha caafimaadka iyo daaweynta (health literacy).

Weli si biyo-kama-dhibcaan ah looma hubo raadadka ay xiridda iyo furitaanka dugsiyadu ay ku reebeen diinaaimiyaadka caabuqa ee heer bulsho. Laakiin in la yareeyo halista caabuqa lagu qaadi karo ee **goobaha barashada** ayaa waxaa lagu gaari karaa tallaabooyin kala duwan ka bilowda xirashada af-saabka, kala-fogaanta iyo

gacmo-dhaqashada ilaa ka-digidda in la wadaago alaabada iyo in marar badan la jeermi-tiro sagxadaha la taabtey. Xalal tiknolojiyad yar u baahan oo lagu sii wanaajinayo kala-helidda hawada waxaa ka mid ah in la adeegsado bannaanada furan ee dibadda ah iyo furidda daaqadaha, waa marka xilliga lagu jiro uu u habboon yahay. Wax ka yar 10% dalalka dakhligoodu hooseeyo ayaa ku soo warramey in ay heli karaan waxyaabaha aasaasiga ah oo ku fulin sida saabuun, biyo nadiif ah, af-saabyo, iyo tas-hiilaadka fayadhowrka iyo nadaafadda si ay u hubiyaan bedqabka dhammaan bartayaasha iyo shaqaalaha; saamiga dalalka dakhligoodu sarreeyo ee heli karey waxyaabahaas ayaa ahaa 96%.

Waxaa soo ifbaxaya caddeymo muujinaya in cudurka dunida ku baahey iyo eelkii uu reebey ay ciriiri-geliyaan **maaliyadsiinta** waxbarashada sababo isugu jira dakhliga dowladda ee yaraadey iyo baahiyaha waaxaha kale oo korodhey. Xog uu mac-hadka UIS ka soo ururiyey 71 dal ayaa muujineysa in saamiga dhexdhexaadka ah ee kharashka lagu bixiyo waxbarashada uu ka yahay kharashka guud uu hoos uga soo dhacay 14.1% oo uu ahaa sanadkii 2019 oo uu noqdey 13.5% sanadkii 2021[kii].

Waxbarashada xannaanada ah marka la eego, xataa meelaha la heli karey barasho aqoon-dirsad ah, ayaa culeysyada taagnaa waxaa ka mid ahaa jiritaan la'aanta macallimiin tababaran, in barashada aqoon-dirsadka ah la waafajiyo baahiyaha carruurta yaryar, korjoogteynta iyo qiimeynta horumarka carruura iyo waxa laga yeelayo degaannada guryaha saboolka ee aan laga helin taageero dad ku filan. Xiritaanka tas-hiilaadka iyo is-dhexgalka xaddidan ayaa carruurtu ku waayeen nashaad-gelin dhaafsiisan kan ay ku helaan guryahooda.

Waxbarashada iyo tababarrada farsamada iyo mihnadda ayaa ay dhibaato soo gaartey maaddaama ilaa 80% barnaamijyadu ay diiradda saaraan xirfado gacan-ka-qabasho ah iyo xirfadaha guud ee loo yaqaanno *soft skills*, ee barashadooda u baahan tahay goob-joobnimada qofka. Diyaarinta macallimiinta ayaa ahayd arrin culus, maaddaama aaney lahayn kartidii gudbinta casharada aqoon-dirsadka ku baxa, iyada oo islamarkaana barnaamijyadooda waxbarashada ee jaango'an ay khalkhal ku yimid. Waxaa muhiim ah in la adeegsado habab kala duwan oo aan lagu tiirsanaan keliya xalalka gudbinta aqoon-dirsadka ee ku saleysan tiknolojiyad sare. Isla mar-ahaantaana, waxaa jira tusaalooyin muujinaya adkeysi oo uu socdo tababarka lagu taageerayo qaybaha ay dhibaatadu sida ugu weyn u saameysey.


Waayo-aragnimada loo leeyahay barashada meel fog ka dhacda waxaa ay ku badneyd **tacliinta sare** marka loo eego heerarka kale ee waxbarashada. Sahan lagu sameeyey 53 dal, ayaa 3 waxaa ay ku soo warrameen in

JAANTUSKA 4AAD:

In ka badan 20 bilood, ayaa dugsiyadu ay ugu yaraan qayb ahaan xirnaayeen 55% maalmaha

Saamiga maalmaha oo loo eegey xaaladda furnaanta dugsiga, bishiiba, Febraayo 2020 ilaa Oktoobar 2021

GEM StatLink: https://bit.ly/GEM2021_Summary_fig4



Isha laga soo dheegtey: UIS (2021c).

ay gebi ahaanba tacliinta sare ka dhigeen mid *internet*-ka ka dhacda, 19 ayaa lahaa habab aasaasi ahaan ku dhisan *internet*-ka halka 28 ay adeegsanayeen habab barasho oo iskudhafan oo isugu jira mid goobo fog la kala joogo iyo mid fool-ka-fool ah. Dalalka dakhligoodu dhexdhexaadka yahay marka laga bilaabo Calombia ilaa Masar iyo min Shiinaha iyo Federaalka Ruushka, ayaa diyaariyey qaabab waxbarasho oo ku dhisan *internet*-ka. Laakiin sahan lagu sameeyey ardayda dalalka Afrikada ka hooseysa Sahara, keliya 39% ayaa dhiganayey macaahid bixiya fursado barasho ka dhacda meelo kala fog. Dalalka Midowga Yurub, 41% ardaydii shaqeynayey intii ay waxbarashadu u socotey ayaa waayey shaqooyinkooda, 29% si-ku-meelgaar ah halka 12% ay si abadi ah u waayeen shaqadooda..

Dalalka Ingiriisiga looga hadlo ee arday badan oo caalami ah ay waxbarasho u tegi jireen, sida Australia, New Zealand, dalka Ingiriiska iyo Mareykanka ayaa waxaa hoos u dhacay **ardaydii imaaneysey**. Iyada oo ilaa saddex-meelood meel ardayda jooga Australia ay ahaayeen kuwo ajnebi ah, ayaa arrintani waxaa ay macaahidda tacliinta sare ku keentey halis maaliyadeed. Ardaydii waxbarashada ku jirey iyo kuwii qalinjebiyey ayaa ku caddilmey dalalkii ay waxbarashada u joogeen iyaga oo rabey in ay ku noqdaan dalalkooda.

Xirfadaha **akhris-qoraalka iyo xisaabta ee dadka waaweyn** ayaa muhiim u ah fahamka arrimaha caafimaadka iyo daaweynta (*health literacy*) iyo taabalgalnimada ololayaasha tallaalka waana in ay qayb aan ka go'in ka noqdaan wax-ka-qabashada xaaladaha degdegga ah iyo qorsheyaasha dib-u-dhiska. Dalka Hindiya, haweenka ka-qaybgaley barnaamijka akhris-qoraalka ee dadka waaweyn ayaa COVID-19 u lahaa aqoon ka sarreysa tan ay u leeyihiin kuwa dhiggooda ah ee aan wax-akhrin/qori karin. Aqoonta xisaabta ayaa ahayd tan sida joogtada ah loogu saadaalin karey hoos-u-dhaca u-nuglaanshaha beenta laga faafinayey COVID-19. Laakiin xataa ka hor cudurkan dunida ku baahey, ayaa aqoon-dirsadku uu ahaa hab aan la jecleyn in lagu bixiyo barnaamijyada barashada akhris-qoraalka bilowga ah. Dalka Brazil, xeer-nidaamiye ayaa caddeeyey in fasallada la halmaala manhajka waxbarashada aasaasiga ah ay waajib tahay in loo bixiyo si fool-ka-fool ah.

BEEGSIGA 4.1. WAXBARASHADA DUGSIYADA HOOSE/DHEXE IYO SARE


Ka-hor cudurka dunida ku faafey, 260 milyan oo carruur, kuwa hadda qaangaaraya iyo dhallinyaro jira da'da dugsiyada hoose/dhexe iyo sare ah ayaan dugsi dhiganneyn. Tirada ayaan wax sidaas ah iska beddelin tobaneeyo sano. Mashruuc ay iska kaashanayaan *GEM Report* iyo mac-hadka UIS ayaa hadda socda si la isugu dhafo oo la isugu biiriyo ilo sahan oo maamul iyo kuwo qoysas, loo buuxiyo waxyaabaha ka dhiman xogta maamulka oo loona diyaariyo garaaf cad oo muujinaya sida ay wax ahaayeen waqtiyada xiriirsan. Tani waxaa ay wax ku dhiseysaa oo ay sii amba-qaadeysaa hawshii kooxda *GEM Report* oo isu keeneysa ilo kala duwan si loo qiyaaso heerka kama-dambeysta ah. Bar *internet* oo cusub, EEG (www.education-estimates.org), ayaa habka ka dhigeysa mid ay si wanaagsan ay u soo gaari karaan dalalka. Heerarka ardayda dhammeysata dugsiyada hoose/dhexe ayaa ku dhow ama dhaafey 90% dhammaan gobollada kala duwan marka laga reebo Afrikada ka hooseysa Sahara, halkaas oo keliya laba ka mid ah saddexdii carruur ahba ay dhammeystaan dugsi hoose/dhexe, inkasta oo heerku uu ka sii kordhayo 65% oo uu gaarayo 76% haddii lagu daro kuwa fasalka ugu dambeeya gaarey waqti aad u dambeeya (**Jaantuska 5aad**). Dalalka Afrika ee ka hooseeya Sahara, 23% carruurta dhigata dugsi hoose/dhexe iyo 31% kuwa qaangaaraya ee fasallada sare ee dugsiga dhexe ayaa da'doodu ay aad uga weyn tahay heerkaas waxbarashada, taas oo sharxaysa sababta gobolkan uu u leeyahay farqiga ugu ballaaran ee u dhexeeya heerarka inta waqtigii la rabey ku dhammeynaya iyo kuwa ugu dambeyn dhammeynaya waxbarashadan

Guud ahaan dunida, dalalka laga fuliyey daraasadda *the Trends in International Mathematics and Science Study* (TIMSS) ee lagu eegayo aqoonta ardayda ee Xisaabta iyo Sayniska, celceliska kororka sanadlaha ah ee muddadii u dhaxaysay 2015kii ilaa 2019kii ee saamiga ardayda xaqiijiyey heerka ugu yar ee aqoonta loo baahan yahay waxaa uu ahaa 0.3 dhibcood boqolkii fasalka 4aad iyo 0.5 dhibcood boqolkiiba oo uu ahaa fasalka 8aad. Dalalka ka sare marey celceliskaas waxaa ka mid ah dalka Chile, halkaas oo saamigu uu ka kordhey 41% oo uu ahaa 2003dii uuna noqdey 57% sanadkii 2011 iyo 70% sanadkii 2019kii, yacni heerarka kororkiisu ayaa ugu yaraan ahaa saddex-laab uu xawaarihiisu ka sarreeyey celceliska. Meelo kale, sida Jordan iyo Ramania, koror yar ayaa ka jirey ama kororba ma jirin. In la gaaro 10% ugu dambeeya ayaa adag xataa meelaha la haysto kheyraad badan.

JAANTUSKA 5AAD:

Tilmaamaha ardayda waqtigii la rabey kaga baxaysa dugsiga ayaa si aad u weyn hoos ugu dhigaya tirada carruurta ugu dambeynta dhammeysata dugsiga, gaar ahaan dalalka Afrika ee ka hooseeya Sahara

Heerka dhammeysashada iyo dhammeynta dugsiga ee goor dambe, oo loo eegey gobollada, 2000–20



GEM StatLink: https://bit.ly/GEM2021_Summary_fig5

Isha laga soo dheegtey: Lafaguris ay kooxda GEM Report ku sameeyeen xogta sahan lagu sameeyey qoysaska

Dalka Mareykanka, 86% ardayda ayaa gaarey heerka ugu hooseeya ee caalamiga ah ee TIMSS sanadkii 1995 halka 87% ay gaareen sanadkii 2019; dalka New Zealand, saamiga ayaa si xooggan hoos uga soo dhacay kii 1995 oo ahaa 89% waxaana uu gaarey 82% sanadkii 2019.

BEEGSIGA 4.2. WAXBARASHADA XANNAANADA AH EE CARRUURTA YARYAR

Xogta Heerka Koboca Carruurta Yaryar ee carruurta da'doodu tahay 36 ilaa 59 bilood ayaa muujinaysa in kala-sarreyntii hantidu ay inta badan sideedii ahayd ama ay korodhay. Habka lagu soo saaro tilmaamahan, oo diiwaangelinaya boqolleyda carruurta yaryar ee sidii la rabey u kobcay caafimaad ahaan, barasho iyo bedqabka dhimmir-bulsho, ayaa si ballaaran loo cusbooneysiiyey. Barashadu waxaa ay ka soo bilaabataa guriga. Muddadii u dhaxaysay 2012-19kii, ayaa 62% carrruurtu ayaa waxqabadyo afar ama ka badan ah waxaa ku mashquulinayey qof weyn oo guriga la joogay tiro dalal dakhligoodu hooseeyo ama dhexdhexaad yahay ah. Boqolleydu waxaa ay ka sii hooseysey 20% dalalka Gambia, Sierra Leone iyo Togo. Caqabad muhiim ah oo hortaagan waxqabadyada carruurta xiise-gelinaya sida in wax lala akhriyo ayaa ahayd helitaan la'aanta buugaagta. Celcelis ahaan, wax ka yar rubuc carruurta ay da'doodu ka yar tahay 5 ayaa guriga ku haystey ugu yaraan saddex buug. Kalabar dalalka, wax ka yar 1 ka mid ah 10 kii carruur ah ayaa haystey; 8 dal oo ka hooseeya Saharaha Afrika, ayaa wax ka yar 1% ayaa haysteen.

Xuquuqda loo leeyahay waxbarashada waxaa ay bilaabataa marka uu ilmuhu dhasho. Marka uu ilmuhu gaaro 3 jir, 90% maskaxdiisu waa ay kobocday. Ka-qaybgalka carruurta ka yar 3 jirka ee barnaamijyada xannaanada hore iyo waxbarashada ayaa aad u xaddidan, inkasta oo ay gaarto wax ka badan 20% da'da 0 ilaa 1 iyo in ay gaarto 60% da'da 2 jir dalal badan oo dakhligoodu dhexdhexaad yahay ama uu sarreeyo. Xataa dalalka dakhligoodu uu sarreeyo, helidda daryeelka xannaanada iyo waxbarashada carruurta yaryar ay weli aad ugu xiran tahay heerka bulsho-dhaqaale ee ilmaha. Dalalka Faransiiska iyo Ireland, farqiqa u dhexeeya ka-qaybgalka carruurta da'doodu u dhaxayso 0- ilaa 2 sano ee qoysaska saboolka ah iyo kuwa hodonka ah ayaa ka badan boqolkiiba 50 dhibcood. Guud ahaan dunida, 75% carruurta ayaa dhiganayey waxbarashada xannaanada ah hal sano ka hor inta aaney gaarin da'dii rasmiga ahayd ee ay geli lahaayeen waxbarashad aasaasiga ah ee sanad-dugsiyeedkii dhammaanayey 2020ka. Heerka dhigashada carruurta ee xaaladda la waafajiyey ee dalalka dakhligoodu hooseeyo ayaa ahaa kalabarka (45%) kan dalalka uu dakhligodu sarreeyo (91%).

BEEGSIGA 4.3. WAXBARASHADA FARSAMADA, TAN MIHNADDA, TACLIINTA SARE IYO TAN DADKA WAAWEYN

TVET ayaa weli ah mid aaney maaliyad fiican siisin oo badanaana ay dayacaan dalal badan, inkasta oo dalal ay ka mid yihiiin Armenia, Brazil, Burundi, Costa Rica, Indonesia iyo Uruguay ay15kii sano ee la soo dhaafey si weyn u kordhiyeen heerarka ka-qaybgalka. Dugsiyada sare ee mihnadda aaney u ekeyn kuwo beddel u ah oo dadka soo jiidanay, si ka duwan sida shahaadda dugsiga sare ee caadiga ah, haddii aaney jirin diblooma mihnadeed oo dad siineysa fursad si toos ah loogu gudbi karo tacliinta sare, sida ka dhacda rubuc ka mid ah dalalka dunida. Dhinaca kale, 30% dalalka, dhammaan kuwa ka soo qalinjebiya dugsiyada sare waxaa ay haystaan fursad ay toos ugu gudbi karaan tacliinta sare.


Saamiga ardayda guud ahaan dunida u gudba tacliinta sare waxaa uu ahaa 39%, isaga oo ku socda koror celceliskiisu yahay 1 dhibic boqolkiiba sanadkii tan iyo sanadkii 2000. Xogtan maamul mar walba ma waafaqsana xogta sahanka ee ardayda dhigata (**Jaantuska 6aad**). Is-qorista ardayda ayaa laga yaabaa in ay hoos-u-dhigto ardayda dhigata haddii ay macaahidda dhigtaan arday badan oo aan istaatistikada rasmiga ah loogu darin sababo la xiriira aqoonsi la'aan. Dhinaca kale, is-qoristu waxaa ay ka badbadin kartaa ardayda dhigata haddii arday badan ay magac-u-yaal ahaan isu qoraan, gaar ahaan marka lacag la'aan lagu dhiganayo oo xaaladda ardayda ay la socdaan adeegyo la kaabo. Sidoo kale, xogta maamul waxaa ay la xiriirtaa da'da magac-u-yaalka ah ee ah shanta sano ee xigta ka dib marka laga qalin jebiyo dugsiga sare, laakiin waxaa badan dad badan oo dhigta tacliinta sare iyada oo ay da'doodu taas hore ka weyn tahay, gaar ahaan dalalka Afrika ee ka hoosee Sahara.

Caadi ahaan qofku inta uu dhallinyar yahay ma laha awood uu horey isaga bixiyo kharashka tacliinta sare. Qiilka dhaqaale ee loo hayo in la wadaago kharashka tacliinta sare waxaa ay aad ugu xiran tahay kuwa doonaya in ay soo galaan in aaney wajahin caqabado la xiriira deyn-qaadasho. Amaah kala duwan oo ay heli karaan ardayda ayaa laga heli karaa in ka badan 70 dal waana mid sii kobocdey oo gaartey suuq hal tiriliyan oo doolar ah. Dalal badan, ayaa saamiga dakhliga deyn-qaataha uu ugu baahan yahay in uu dib-u-bixiyo

JAANTUSKA 6AAD:

Xogta is-qorista tacliinta sare waxaa ay yareysan kartaa ama ka badbadin kartaa tirada dhab ahaan dhigata tacliinta sare

Saamiyada wadarta dhigata iyo kuwa is-qora tacliinta sare, 2015–19



Isha laga soo dheegtey: https://bit.ly/GEM2021_Summary_fig6
Xogta keydsan ee UIS database.

amaahaha ardayda aad u sarreeyaa, gaar ahaan kuwa qalin-jebiyey ee ugu saboolsan. Dib-u-habeyn wanaagsan oo lagu sameeyo siyaasadda ayaa la halmaashey in laga guuro daymaha aadka loo isticmaalo ee waqtiyo lagu bixiyo oo loo wareego daymo bixintoodu ay ku xiran tahay dakhliga u soo hara.

Dalalka uu dakhligoodu sarreeyo badidoodu, loo-shaqeeyeyaasha ayaa ah cidda ugu badan ee bixisa waxbarashada iyo tababarrada dadka waaweyn, taas oo muujineysa baahida loo qabo siyaasado lagu beegsanayo shakhsiyaadka dibadda ka jooga suuqa shaqada. Xataa kuwa shaqo haysta, waqtiga lagu qaadanayo tababarka ayaa laga yaabaa in uu leeyahay muhiimad la mid ah tan uu leeyahay kafaala-qaadku, taas oo muujineysa baahida loo qabo in dowladdu ay gacan ka geysato sida barnaamijyo fasax waxbarasho. Xog waqtiyo kala duwan laga ururiyey lix dal oo dakhligoodu sarreeyo ayaa muujineysa in waxbarashda dadka waaweyn ay yool ay joogto u raadiyaan u yahay koox mug leh oo laga tiro badan yahay, gaar ahaan dadka aqoontoodu sarreyso.

BEEGSIGA 4.4. XIRFADO SHAQO LAGU BEDDESHO

Keliya 10 ka mid ah 91 dal ee laga hayo xog ayaa badi dadka waaweyn ay sheegeen in ay ugu yaraan sameeyaan 5 ka mid ah 9ka xirfadood ee tiknolojiyada macluumaadka iyo is-gaarsiinta ah (ICT) ee la korjoogteeyey dunida oo dhan si la isu barbardhigo. Ku dhowaad kalabar dalalka, dadka waaweyn badidoodu ma laha wax xirfad ah. Badi dalalka dakhligoodu hooseeyo iyo kuwa uu dhexdhexaadka yahay, dhallinyaro tiro-yar oo aan dhammeysan ugu yaraan dugsiga dhexe ayaa leh xirfad un ka mid ah kuwa ICT-da. Dalalka Ciraaq, *Jamhuuriyadda Dimuqraadiga ah ee Dadka Lao*, iyo Sierra Leone, xataa celceliska dadka aadka wax-u-bartey ayaa leh wax ka yar laba ka mid ah sagaalka xirfadood. Helidda qalabka iyo *internet*-ka ayaa ah caqabad kale: xataa kuwa ay da'doodu tahay 20- ilaa 24-sano jir, 98% haweenka iyo 90% ragga dalka Chad ayaa sheegey in aaney weligood isticmaalin internet; saamiyada u dhigma ayaa ahaa 61% iyo 63% ee dalka Jamhuuriyada Dimuqraadiga ah ee Dadka Lao iyo 36% iyo 31% oo ay ahaayeen dalka Tunisia.

Qaababka loo xalliyo dhibaatooyinka waaweyn iyaga oo loo kala qaybiyo tiro qaybo yaryar (*Computational thinking*) ayaa lagu dayaa manaahijta qaranka. Dalka Finland ayaa fikirka logordamka (algorithmic thinking) iyo barnaamij-sameynta (*programming*) ka dhigtay in ay khasab tahay in lagu dhigto laga bilaabo fasalka 1aad isaga oo ah waxqabad koorsooyin kala duwan oo ka mid ah manhajka (*cross-curricular activity*). Dib-u-eegis lagu sameeyey siddeed dal oo dakhligoodu sarreeyo sanadkii 2019kii, ardayda marar badan ICT u isticmaalayey hawlaha dugsiga khasab ma ahayn in ay keenaan darajo ka sarreysa kuwa kale ee dhiggooda ah, oo ardayda waayo-aragnimo u leh barnaamij-u-sameynta kombuyutarrada khasab ma ahayn in ay xirfadahaas ku adeegsadaan meelo aan la-halmaalin barnaamij-sameyn.

Aqoon maaliyadeed (*Financial literacy*) ayaa ah xirfad muhiim u ah maciishadaha dalalka casriga ah iyo guud ahaan nolosha dadka waaweyn, laakiin qof walba ma haysto fursad uu dugsiga ugu barto xirfadaha maaliyadeed. Barnaamijka Qiimeynta Caalamiga ah ee Ardayda ee 2018kii waxaa ka mid ahaa cutub khiyaari ah oo lagu qiimeynayey aqoonta maaliyadeed, oo ay adeegsanayeen 20 nidaam waxbarasho oo ka-qayb-qaatey barnaamijka. Waa ay yareyd in gabdhuhu ay sheegaan waxqabadyo fasalka lagu sameeyo oo la xiriira mowduucyo maaliyadeed ee dhammaan dalalkii ka-qaybqaatey, inkasta oo ay jirto xaqiiqda ah in waxbarasho maaliyadeed caadi ahaan ku jirto xisaabta, oo ah maaddo aan khiyaari ahayn oo ay caadi ahaan qaadato.

BEEGSIGA 4.5. U-SINNAANTA

Sinnaan la'aanta labada jinsi ayaa ah welwel weyn oo jira, xataa haddii in la fahmo culeysyo badan oo ka jira heerar kala duwan iyo goobo kala duwan ay u baahan tahay in la fahmo farqi aad u yar. Waxbarashada dugsiyada sare waa heerka ay gabdhaha qaangaaraya laga yaabo in uu culeyska ugu ba'an soo wajaho (t.a. dalalka Benin, Chad iyo Niger) laakiin waxaa sidoo kale laga yaabaa in ay faa'iido ka helaan iyo in xaaladuhu si degdeg ah ugu noqdaan kuwo iyaga u roon. Arrintan ayaa ka socota dalal badan oo kala duwan, oo ay ka mid yihiin kuwa uga fogaan badan marka ay timaaddo xaqiijinta SDG 4 marka loo eego kuwa dhiggooda ah ee ku yaalla gobol gaar ah, oo ay ka mid yihiin Cambodia, Congo, the Gambia, Ghana, Malawi iyo Rwanda.

Hantida, oo ay u badan tahay in loo cabbiro heer qoys, mar kasta kama tarjumeyso wax la'aanta ku gaarka ah ilmaha. Dalal badan, 10% carruurta aan wax haysan waxaa ay la joogaan qoysaska ugu hodansan sidoo kale in ka badan 30% carruurta qoysaska ugu saboolsan ma aha kuwo aan wax haysan. Heerka wax-haysasho la'aanta ilmaha ayaa noqon kara saadaaliye adag oo dheeri ah oo saadaalin kara natiijoyinka waxbarashada laga sugayo.

Carruur tiradoodu ay badan tahay ayaa taga dugsiyada ay gacanta ku hayaan kooxo hubeysan oo aan dowlad ahayn. Kooxahani ayaa sababo tiro badan u haysta xulashada in ay bixiyaan waxbarasho, haddii ay tahay mid loo marayo gacan-ku-hayn toos ah, waxqabadyo gaar ah, t.a. oo lagu sameeyo marhajka, ama in kuwa hadda bixiya adeegyada waxbarashada loo oggolaado in ay hawshooda sii wataan. Waxbarashada ayaa ahayd midda ugu qiimo badan adeegyada ay dalbadaan dadka rayidka ah; in lagu guuleysan waayo bixinteeda ayaa waxaa ka dhalan karta caro.

Waxaa jira culeysyo la xiriira kala duwanaanta afeed ee waxbarashada. Dalalka afrikada galbeed iyo tan dhexe, oo ay ka mid yihiin Chad, the Gambia iyo Togo, wax aan ka badneyn 5% carruurta ay da'doodu tahay 7 ilaa 14 sano ayaa gurigooda ugu hadla luuqadda cashar-gudbinta. Hab siyaasadda cashar-gudbinta ku dhafaya ilaha xogta luuqadeed, qiyaasaha carruurta ku jirta da'dii dugsiyada iyo heerarka is-qorista dugsiyada ayaa tilmaameysa in 37% carruurta ku nool dalalka dakhligoodu hooseeyo iyo kuwa uu dhexdhexaadka yahay ay wax ku barteen luuqad aan ahayn tan guriga ay uga hadlaan: 27% ayaa ku hadla luuqado dadkooda laga tiro badan yahay oo qoran waxaana 10% ay ku hadlaan luuqad aan loo badneyn, iyada oo mid walba ilaa xad leh dad yar oo ku hadla.


BEEGSIGA 4.6. BARASHADA AKHRIS-QORAALKA IYO XISAABTA

Guud ahaan dunida, dadka qaangaarka ah ee da'doodu tahay 15 iyo ka weyn, 83% ka mid ah haweenka iyo 90% ka mid ah raggu waa kuwo wax qori/akhrinna kara, marka laga eego akhris-qoraalka labada jinsi– waxaa u dhexeeya farqi ah 7 dhibcood boqolkiiba. Wax ka badan mid ka mid ah afartii haween ee dhallinyaro ah ee ku nool dalalka Afrika ee ku nool Sahara wax akhrin/qori karta, halkaas oo akhris-qoraalka dhallinyarada dheddigga ah ay korodhey wax ka yar boqolkiiba hal sanadkii. Marka si guud loo eego dunida, tan iyo sanadkii 1999 ayaa hoos-u-dhaca ku yimid tirada haweenka aan akhrin/qori karin ee Bariga iyo Koonfurta-bari ee Aasiya waxaa ku dhowaad soo buuxiyey kororkii ka dhacay Afrikada ka hooseysa Sahara. Intaa waxaa dheer, arrinta maskaxda la gashadey ee ah in dhammaan ardayda dhammeysata dugsiga sare ay yihiin kuwo wax akhrin-qori kara ayaa waxaa uu macnaheedu yahay in heerka akhris-qoraalka ee dhabta ah horey looga badbadiyey. Ku dhowaad kalabar kuwa dhammeysta dugsiga dhexe ee 18 dal oo xogtooda dhowaan sahan lagu soo ururiyey ayaan gaarin heerkii aasaasiga ahaa ee akhris-qoraalka, kaas oo lagu qeexay in uu akhrin karo weer fudud (**Jaantuska 7aad**).

JAANTUSKA 7AAD

Xataa kuwa dhammeysta dugsiga sare maskaxda lama gashan karo in ay barteen akhris-qoraalka

Heerka akhris-qoraalka ee kuwa ay da'doodu tahay 20 ilaa 24 sano, heerka ay ka gaareen dugsiga, dalal la soo xushey, 2015–19



Ogow: Cabbirka dhibicda waxaa uu saamigal u yahay cabbirka dadka iyo heerka ay ka gaareen waxbarashada.
GEM StatLink: https://bit.ly/GEM2021_Summary_fig7
Isha laga soo dheegtey: Lafaguris ay kooxda GEM Report ku sameysey xogta DHS.

Dhinaca kale, xaqiiqda ah in maaddaama uusan qofku dugsi soo dhigan aysan macnaheedu ahayn in uusan wax akhrin-qori karin, ayaa muujineysa muhiimadda ay leedahay in akhris-qoraalka lagu barto meel ka baxsan dugsiga. Marka la eego qiyaasta dadweynaha aan wax akhris-qori karin, dadka waaweyn ee is-qora barnaamijyada waxbarashada dadban waa 1% ama ka yar dalalka Bolivia, Honduras, Mozambique, Qatar iyo Suriname, halka 2% ay ka yihiin Bahrain iyo Peru, 3% oo ay ka yihiin Colombia iyo Thailand, 4% Saudi Arabia iyo 8% oo ay ka yihiin Jamhuuriyadda *Dominican Republic*.

Xogta laga hayo xataa waxbarashada xisaabta fudud waa ay yar tahay. Cabbir beddel ah oo lagu cabbiri karo aqoonta aasaasiga ah ee xisaabta ayaa loo xisaabin karaa boqolkiiba inta si sax ah u sheegi kara da'dooda, taasoo muujineysa sida qofku uu u adeegsan karo tirooyinka hoose ee fudud. Inkasta oo badi dadka, xataa kuwa ugu saboolsan, ay ka sarreeyaan heerka ugu hooseeya ee la qaadan karo, cabbirkan waxaa uu u habboon yahay qiimeynta sida ay taariikhiyan ku socotey barashada xisaabta. Lafaguris lagu sameeyey xogta sahanka qoysaka iyo tirokoobka dadka ayaa dad u saamaxaysa in la eego aqoonta xisaabta ay u leeyihiin kooxaha dadkii dhashey intii u dhaxaysey 1960-meeyadii iyo 2010-meeyadii ee 42 dal oo ah kuwa ka hooseeya Saharaha Afrika. Waxa soo wanaagsanaadey muddadaa ayaa aad u yaraa oo mana ay xaqiijin dadka ugu saboolsan. Kororka guud ee aqoonta xisaabta ee Afrika waxaa ku dhowaad gebi-ahaanba keeney kor-u-kaca tegista dugsiyada.

BEEGSIGA 4.7. HORUMARKA JOOGTADA AH IYO MUWAADINIMADA DUNIDA

Beegsiga 4.7 ayaa wax ku sii kordhinaya inta kale ee hadhey ee ka mid ah ajandaha SDG 4 marka laga eego wax ka qabashada waxa ay bartayaashu u baahan yihiin in ay bartaan si ay u gaaraan is-beddellada uu ku haminayo SDG 4. Saamiga dugsiyada bixiya xirfado nololeed-oo ku saleysan waxbarashada HIV iyo jinsiga ayaa badanaa hooseeya, gaar ahaan heerka aasaasiga ah, t.a. 2.5% dugsiyada hoose/dhexe ee dalka Burkina Faso iyo 6% dalka Niger. Sidaas oo ay tahay haddana Hagidda Farsamo ee Caalamiga ah ee Dib-loo-eegey ee QM ee Waxbarashada Jinsiga ee *UN Internaitonal Technical Guidance on Sexuality Education* ayaa ku talineysa in la baro baaluqidda iyo imaanshaha dhiigga caadada ka hor inta aaney bartayaashu isku arkin, yacni da'aadda 9 ilaa 12 sano. Agabka Dib-u-eegista iyo Qiimeynta Waxbarashada Jinsiga ee UNESCO's Sexuality Education Review and Assessment Tool ayaa bud-dhig ka dhiganaya warbixin caalami ah oo shaamil ah dhowaan soo baxdey oo tilmaameysa horumarka la xaqiijiyey waxbarashada jinsiga. 24 dal oo la qiimeeyey,

keliya 3 ayaa loo arkey in manhajkoodu uu ku jiraan casharro 'heer sare ah' oo ku saabsan caafimaadka jinsiga iyo taranka oo loogu talogaley da'aadda 9 ilaa 12 jir, iyo 5 dal oo iyana loo arkey in ay leeyihiin casharro 'sugan'.

Daraasadda Caalamiga ah ee Waxbarashada Madaniga iyo Muwaadinnimada ee 2016 *International Civic and Citienship Education Study* ee laga sameeyey 23 dalalka dakhligoodu yahay dhex-dhexaadka sare iyo kuwa uu sarreeyo ayaa lagu ogaadey in boqolleyda ardayda si dad ku filan u fahamsan arrimaha la xiriira muwaaddinimada dunida ay u dhaxeeyeen 40% oo ay ahayd Jamhuuriaydda Dominican Republic, Latvia iyo Netherlands ilaa ku dhowaad 70% oo ay ahayd Croatia, Jamhuuriyadda Korea iyo Sweden. Daraasadda *the Trends in International Mathematics and Science Study* (TIMSS) ee 2019 ayaa muujisey in keliya 30% ardaydu ay heleen aqoon ku filan oo ku saabsan cilmiga deegaanka. Waxbarashada is-beddelka cimilada ayaa looga danleeyahay in ay dadka gacan ka siiso in ay fahmaan, wax-ka-qabtaan, khafiifiyaan oo ay la-qabsadaan raadka is-beddelka cimilada. Taxane cusub oo ah taariikhda dalalka ee war-gaarsiinta iyo waxbarashada is-beddel-cimilada oo ay soo saarayaan kooxda warbixinta *GEM Report* iyo mashruuca Korjoogtenta iyo Qiimeynta War-gaarsiinta iyo Waxbarashada Cimilada ee *The Monitoring and Evaluating Climate Communication and Education* ayaa bixineysa fursad wax la isku-barbardhigi karo. Kooxda ugu horreeysa oo ka kooban taariikhda 20 dal ayaa ka kooban dhammaan gobollada iyo kooxaha dalalka dakhliga ku kala duwan. Koox labaad oo ka kooban warbixinnada ilaa 50 dal ayaa la qorsheynayaa in la daabaco sanadka 2022-ka. Lafaguris hordhac ah ayaa tilmaameysa in keliya 40% shuruucda warbarashada qaranka iyo 45% qorsheyaasha ama istiraatiijiyadaha waaxda barashada diiradda lagu saarey is-beddelka cimilada.

BEEGSIGA 4.A. XARUMAHA WAXBARASHADA IYO DEEGAANNADA BARASHADA

Barasho tayo wanaagsan ma dhici karto haddii deegaanku uu yahay mid aan u habbooneyn, kaba sii daranne haddii uu halis gelinayo bedqabka carruurta. Baaqa Dugsiyada Amaanka ah (*the Safe Schools Declartion*), oo ah ballanqaad siyaasadeed oo dowladaha ka dhexeeya oo ardayda, macallimiinta, dugsiyada iyo jaamacadaha lagaga ilaalinayo in la weeraro marka ay jirto colaad hubeysan, ayaa waxaa hadda ansaxiyey 112 dal. Waxaa sii xoogeysanaya caddeynta loo hayo in ciqaabta jireed aaney keliya ku xadgudbeynin xuquuqaha carruurta, laakiin ay sidoo kale saameyn ku yeelaneyso natiijooyinka waxbarashada. Ciqaabta jireed ayaa hadda si buuxda looga mamnuucay dugsiyada 156 dal.

Dugsiga ayaa noqon kara meesha keliya ee carruurta qaar ay ka helaan tas-hiilaadka biyaha, fayadhowrka iyo nadaafadda. Dalka Liberia, qoysas yar ayaa haysta tas-hiilaad nadaafadeed oo gaarsiisan heerka aasaasiga ah ee caalamiga ah, laakiin 69% dugsiyada ayaa leh tas-hiilaadkaas. Haseyeeshee, dugsiyada yaryar, oo aasaasiyan ku yaalla degaannada miyiga ah ee fog, ayaa loo qaadan karaa in aaney u badneyn in ay ka soo baxaan shuruudaha tayada ee kaabayaasha marka la barbardhigo dugsiyada waaweyn. Dalka Cabo Verde, 22% dugisyada hoose/dhexe ayaa sanadkii 2018 aan lahayn tas-hiilaadka aasaasiga ah ee gacmo-dhaqashada. Haseyeeshee, 22% ee dugsiyada hoose/dhexe ee ugu yaryar ayaa ay dhigtaan keliya 2% ardayda dalka. Sidaa daraaddeed, caalami ahaan, saamiga ardayda dhigta dugsiyada aan lahayn tas-hiilaadka aasaasiga ah ayaa ay u badan tahay in uu aad uga hooseeyo saamiga ay dugsiyadaasi ka yihiin tirada guud ee dugsiyada.

Marka laga soo gudbo tas-hiilaadka la taaban karo, dhinacyada kale sida qaabka uu u nidaamsan yahay sanad-dugsiyeedka – marka laga bilaabo sida maalmaha casharrada la dhigayo loogu qaybiyo toddobaadyada iyo sanadaha ilaa saacadaha la dhiganayo iyo sida loo nidaamiyo maalinta dugsiga la dhiganayo laf-ahaanteeda – ayaa cawaaqib muhiim ah ku yeelan kara tayada iyo u-sinnaanta nidaamyada waxbarashada. Qaabka sanad-dugsiyeedka ee dalal badan ayaa badanaa ku saleysan taariikhdii uu uga tegey gumeysiga halkii uu ku saleysnaan lahaa xilliyada dalalkaas, oo waxaana uu si liidata ula-jaanqaadaa meertooyinka beer-tacbashada degaanka. Sidoo kale waqtiga uu bilaabanayo dugsiga ayaa muhiim ah. Marka laga soo tago in uu carruurta siinayo waqti hurdo oo ku filan, waxaa uu u muuqdaa in uu si wanaagsan u waafaqsan yahay meertada hurdada iyo soo-jeedka carruurta qaar-gaareyso, oo ay firfircoonnidoodu ugu wanaagsan tahay xilliyada barqada iyo fiidka.

BEEGSIGA 4.B. DEEQAHA WAXBARASHADA

Wadarta gargaarka lagu kaabayo dhaqdhaqaaqa ardayda ayaa kor u kacay 30% intii u dhaxaysay 2015kii ilaa 2019kii, taas oo horey u ahayd US$3.4 bilyan oo gaartey US$4.4 Bilyan. Wadarta gargaarka deeqaha waxbarashada ee la siiyey dalalka dakhligoodu hooseeyo ayaa laba-laabmey intii u dhaxaysay 2015kii ilaa 2019kii, kaas oo dhaafey kororkii is-qorista ardayda tacliinta sare. Laakiin marka xisaabta lagu daro dalalka dakhligoodu hooseeyo iyo kuwa uu dhexdhexaadka yahay, tirada ardayda dibadda tagta ayaa ka badnayd kororka gargaarka deeqda waxbarashada. Celcelis ahaan, halkii arday oo caalami ah, waxaa uu sanadkii 2019 heli karey gargaarka deeq waxbarasho oo ka yar kii uu heli karey 2006dii. Xogta aan dheellitirneyn ee la heli karo ayaa muujineysa in aan la xaqiijin hadafkii la tiigsanayey ee

ahaa in si mug weyn loo ballaariyo deeqaha waxbarasho ugu dambeyn 2020ka. Laakiin deeq-bixiyeyaasha ayaa hadda sidii hore uga dhow in ay deeqo waxbarasho ay siiyaan dalal soo koraya oo intii hore ka badan marka la barbardhigo sanadkii 2015kii, waxaana kaba sii muhiimsane, yar in dalalka deeqahaasi helayaa ay ku tiirsanaadaan hal ama laba deeq-bixiye oo muhiim ah.

Aragtida loo yaqaanno 'maskax-gororka/*brain drain*', oo kuwa soo dhammeysta deeqda waxbarashada aaney ku soo noqoneynin dalalkii ay markii hore ka yimaadeen, ayaa waxaa hadda beddelaya faham kale oo kaas ka sii tifaftiran oo ah 'maskax-wareejin/*brain circulalation*'. Qiyaaso dhowaan la sameeyey ayaa muujinaya in dadka dalalkoodii hore dib ugu soo hijroonaya ay qayb muhiim ah ka yihiin dadka isu-soconaya ee dalalka ka hooseeya Saharaha Afrika iyo kuwa Latin America, iyo in muhaajiriintani ay yihiin kuwo celcelis ahaan ka waxbarasho wanaagsan dadka kale. Dalalka qaar ayaa aqoonsan in xataa haddiii muwaadiniintooda xirfadaha sarreeya leh ee aan soo noqoneynin mustaqbalka dhow laga faa'iideysan karo haddii si habboon loola shaqeeyo. 22 dal oo Latin American iyo Carribbean-ka ka mid ah ee lafagurista lagu sameeyey Heerkooda Siyaasadaha Muhaajiriinta (*Emigrant Policies Index*), ayaa 8 ka mid ah waxaa ay lahaayeen shabakado maskax-wareejineed oo rasmi ah (*formal brain circulation networks*). Khariidadeyn hore oo lagu sameeyey siyaasadaha qurba-joogta ee u degsan 35 dal, oo ka kala tirsan dhammaan gobollada adduunka, heerarka dakhliga iyo noocyada dowladeed ee kala duwan, ayaa waxaa lagu ogaadey in laba-meelood saddex ay lahaayeen nooc un ah shabakado cilmi-sayniska la xiriira iyo in kalabarna ay waajib kaga dhigeen in ay dalka ku soo noqdaan ardayda dibadda loogu diro deeqaha waxbarasho.

BEEGSIGA 4.C. MACALLIMIINTA

Xog la heley ayaa muujinaysa in gobolka Afrikada ka hooseysa Saharaha uu yahay dunida oo dhan kan ay ugu hooseyso boqolleyda macallimiinta gaarey jaangooyooyinka qaran ee loo dhigey: 57% oo ay yihiin kuwa wax ka dhiga dugsiyada xannaanada (marka loo eego 83% oo ka yihiin Latin America iyo Caribbean-ka), 67% oo ay yihiin kuwa dugsiyada hoose/dhexe (marka loo eego 85% oo ay ka yihiin Waqooyiga Afrika iyo Galbeedka Aasiya) iyo 61% oo ay ka yihiin kuwa dugsiyada sare (marka loo eego 78% oo ay ka yihiin Bartamaha iyo Koonfurta Aasiya). Sidaa daraaddeed, saamiyada ardayda/macallimiinta tababaran ee Dalaka Afrika ee ka hooseeya Saharaha marka loo eego celcelis ahaan dunida, inkasta oo uu waxyar soo roonaanayey laga soo bilaabo sanadkii 2015[kii.]

Xataa macallimiinta tababaran ayaa laga yaabaa in aaney ku tababarneyn maaddada gaarka ah ee ay dhigayaan.

Macallimiinta dhiga maaddooyin aaney takhasus u lahayn ayaa aad ugu badan dunida badideeda. Ugu yaraan nidaamyo waxbarasho oo 40 ah oo sanadkii 2018kii qayb ka ahaa Sahankii Caalamiga ahaa ee Baridda iyo Barashada, ayaa in ka badan 10% macallimiinta sayniska ee fasallada dambe ee dugsiyada dhexe dhigaa aaney qaadan waxbarshado ama tababar maaddada ay dhigayaan la xiriira. Waa sidaas oo kale macallimiinta xisaabta. Dalalka Georgia iyo Saudi Arabia, wax ka yar 60% macallimiinta sayniska iyo xisaabta ayaa qaatey tababar maaddooyinkaas la xiriira oo qayb ka ah waxbarashoodii tooska ahayd. Barista maaddo ka baxsan takhasuska macallinka waxaa ay sababtaa welwel laga qabo u-sinnaanta, maaddaama aaney ardayda oo dhan sidaas wada ahayn, ama uusan u bareynin, macallin aan takhasus u lahayn maaddada, taas oo caadi ahaan ku badan degaannada miyiga ah iyo dugsiyada ku yaalla miyiga oo u adeega ardayda aan dhaqaalaha haysan.

Qiyaaso cusub oo mac-hadka UIS ka bixiyey tilmamaha mushaarka macallimiinta, iyo sida ay xaaladdoodu tahay macallimiinta marka loo eego xirfadaha kale taas oo u baahan heer waxbarasho oo isku dhow, ayaa muujinaya in celceliska farqiqa u dhexeeya macallimiinta heerarka kala duwan ee waxbarashada ee dal gudihiisu uu guud ahaan yar yahay marka la barbardhigo farqiyada u dhexeeya dalalka kala duwan. Dalalka uu dakhligoodu sarreeyo, ee caddeyntu badideedu ka imaaneyso, macallimiinta ayaa ay u badan tahay in ay qaataan mushaar ka yar tan xirfadaha kale ee u dhigma ee qaybaha kale (**Jaantuska 8aad**).

Tilmaamaha mushaarka macallimiinta ayaa looga dan lahaa in uu ahaado mid beddel u ah dhiirrigelinta macallimiinta. Laakiin cunsurro kale oo intaa ka badan ayaa saameyn ku leh dhiirrigelinta, sida ay muujineyso lafaguris dhowaan lagu sameeyey shaqo-ka-maqnaanshaha macallimiinta ee siddeed dal oo ka tirsan bariga iyo koonfurta Afrika. Xataa sida ay tilmaamayaan warbixinnada uu macallinku iska diyaariyo, saamiga kuwa shaqada ugu yaraan toddobaadkii mar maqnaada ayaa is-bedbeddelaya marka la eego Kenya oo uu ka yar yahay 10% iyo Rwanda iyo ku dhowaad 30% oo uu yahay Suudaanta Koonfureed. Macallimiinta ayaa sheega in ay u maqnaayeen sababo caafimaad (62%) iyo kuwo qoyska la xiriira (35%), taas oo ay ku xigto sababo la xiriira jawiga (gaar ahaan roobab culus iyo kuleyl badan), arrimo hawl rasmi ah iyo gaadiid la xiriira.

WAXBARASHADA KU JIRTA YOOLALKA HORUMARKA WAARA (SDGS) EE KALE

In guriga ay ku haystaan tamar (koronto) ayaa door mug leh ka qaadan karta in carruurta loo saamaxo ka-qaybqaadashada waxqabadyada waxbarashada. Barnaamijka koronto-siinta miyiga ee dalka Bhutan ayaa

gacan ka geysatey yareynta isticmaalka qoryaha la shito oo horseeddeyna xaqiijinta 0.8 sanadood oo dheeri ah oo dugsi-dhigasho ah, iyada oo raadadka uu ku yeeshey gabdhaha ay ka badnaayeen kuwa wiilasha. In dugsiga lagu helo koronto ayaa gacan ka geysan karta sii-wanaajinta deegaanka barashada iyo sii ballaarinta helidda kheyraadka barashada. Barnaamijka Gacansiinta Maareynta Waaxda Tamarta/*the Energy Sector Management* ayaa soo ogaadey in 72% dugsiyada dalka Kenya ay ku xirnaayeen hannaanka guud ee korontada dalka, halka dalka Itoobiya ay ku xirnaayeen keliya 22%. Waddooyinka ayaa gacan ka geysta wax-ka-qabashada saboolnimada oo dhiirrigeliya horumarka dhaqaale iyo bulsho, taas oo ay ka mid yihiin natiijooyinka waxbarashada. Waaxda Antioquai ee dalka Colombia, ayaa sii-wanaajintii waddooyinka dhulka miyiga ah lala xiriiriyey natiijooyinka waxbarashada ardayda jooga dhulka miyiga ah ee sii wanaagsanaadey.

Suxul-duubka loogu jiro in yoolalka SDG la xaqiijiyo ugu dambeyn 2030-ka, ayaa keeney in horumar mug leh laga gaaro sii wanaajinta tiknolojiyada tamarta la cusbooneysiin karo, taas oo ay kaabeyso maalgelin weyn oo lagu sameeyey in loo guuro tamarta qorraxda iyo dabeysha laga dhaliyo. Waxaa jira in uu kobcayo wacyiga ku aaddan in loo baahan yahay in si waari karta tamarta loo isticmaalo loona soo saaro. Haseyeeshee, sii-wanaajinta meelah aka mid ah yoolalka ee aan suuq u lahayn sida kuwa kale – t.a. in si loo siman yahay loo helo tiknoolajiyo nadiif ah oo wax lagu karsado, khubiir-ku-noqoshada tamarta la cusbooneysiin karo, kaalmo maaliyadeed oo dalalka horumarkoodu ugu hooseeyo laga siiyo dhisidda kartidooda, kobcinta cudud shaqaale oo kala duwan oo sinnaan ku dhisan – ayaa culeys lagala kulmey. Waxbarashada ayaa gacan dad ka siisa xaqiijinta ujeeddooyinka la xiriira waaritaanka. Macaahidda waxbarashada waxaa looga baahan yahay in ay sii wanaajiyaan fahamka ardayda ee caqadaha la xiriirta waaritaanka tamarta iyo waxyaabaha kale. Wacyiga dadweynaha ayaa gacan ka geysan kara is-beddel bulsho oo ballaaran. Waxaa loo baahan yahay in xawaare aan horey loo soo arag lagu socodsiiyo kobcinta kartida xirfadeed si loo taageero in loo guuro hab-nololeed aan dhibaato u geysaneyn deegaanka (*geen transition*)

KORJOOGTEYNTA MAALIYADDA

Saamiga uu kharashka ku baxa waxbarashada ka yahay wadarta kharashka dowladda oo sanadkii 2000 ahaa 13.8% ayaa kordhey oo gaarey 14.1% sanadkii 2019. Xog dhowaan laga heley 71 dal ayaa tilmaameysa in saamiga uu hoos dib ugu soo dhacay oo uu gaarey 13.5% sanadkii 2021, taas oo tilmaameysa in raad xooggan uu ku reebey COVID-19. Dalal 151 ah oo xog laga ururiyey intii u dhaxaysay 2014-19, ayaa 48 dal, ama 32% xaqiijin waayeen labada cabbir ee kala ah in 4% GDP-ga dalka iyo 15% wadarta kharashka dowladda lagu bixiyo waxbarashada. Dalalka qaar ayaa aad ugu wanaagsan in ay fuliyaan mashaariic lagu gaarayo dadka ugu saboolsan. Dalka Algeria ayaa gunno waxbarasho oo u dhiganta US$23 sanadkii siiya 3 milyan oo ah arday dhigata dugsiyada aasaasiga ah iyo kuwa sare: 38% kuwa ugu saboolsan iyo 10% kuwa hodonsan ayaa hela taageero.


Gargaarka la siiyo waxbarashada ayaa halkiisa taagnaa oo ahaa 15.3 bilyan sanadkii 2019. Taabogalnimada gargaarku ayaa macnayaal kala duwan u kala leh dad kala duwan. Mid ka mid ah qeexidaha ayaa diiradda saaraysa lahaanshaha uu dalku leeyahay iyo natiijooyinka, daahfurnaanta iyo isla-xisaabtanka, iyo iskaashi horumarineed oo loo dhan yahay. Saamiga kaabidda miisaaniyadeed ee tooska ah uu ka yahay wadarta gargaarka ayaa hoos uga sii dhacay 6.6% oo uu ahaa sanadkii 2002 oo gaarey 2.5% sanadkii 2019kii.

Lafaguris lagu sameeyey warbixinnada sahanka miisaaniyadda qoysaska ee 100 dal oo isugu jira kuwo dakhligoodu uu hooseeyo iyo kuwo uu dhexdhexaad yahay ee sanadihii 2010-yadeedii ayaa lagu ogaadey in waxbarashadu ay 3.2% ka ahayd wadarta kharashaadka qoyska, iyada oo gaartey ilaa 6% ama ka badan dalalka Haiti iyo Lebanon iyo dalalka Afrika ee ka hooseeya Saharaha, oo ay ka mid yihiin Rwanda, Uganda iyo Zambia.

JAANTUSKA 8AAD:

Macallimiinta ayaa ay u badan tahay in ay qaataan mushaaraad ilaa xad ka hooseeya kuwa xirfadaha kale ee dalalka dakhligoodu sarreeyo laakiin ay qaataan mushaaraad sarreeya qaar ka mid ah dalalka dakhligoodu hooseeyo ama uu dhexdhexaadka yahay

Celceliska mushaarka macallimiinta marka loo eego xirfadaha kale ee la-barbar dhigi karo ee u baahan waxbarasho la mid ah, sanadka ugu dambeeya ee la heli karo 2015—19



GEM StatLink: https://bit.ly/GEM2021_Summary_fig8
Source: UIS database.

Xooggaga aan dowladda ahayn ee qaybta ka ah waxbarashada:

YAA SOO XULA? YAA WAX KU WAAYA?

Doorka xoogagga aan dowladda ahayn waa uu dhaafsiisan yahay keliya bixinta waxbarashada heerarka kala duwan iyo ka mid ahaanshaha kuwa saameynta ku leh. Dib-u-eegisteedii ilaa hadda horumarka laga gaarey xaqiijinta SDG 4, oo uu ka mid yahay raadka hadda soo-ifbaxaya ee uu reebey cudurka dunida ku baahey ee COVID-19, ayaa Warbixinta 2021/2 ee Global Education Morintoring Report waxaa ay dowladaha ku dhiirrigelineysaa in ay dhammaan macaahidda, ardayda iyo macalimiinta u arkaan in ay qayb ka yihiin hannaan keliya. Jaangooyooyinka, macluumaadka, dhiirigelinta iyo isla-xisaabtanku waa in ay dowladaha gacan ka siiyaan ilaalinta, ixtiraamidda iyo ka-soo-bixidda waxbarashada ay cid walba xaqa u leedahay, iyaga oo aan indhahooda ka weecineynin xuquuq-u-lahaanshaha ama dhiig-miirashada (Previlege or explotation). Waxbarasho ay dowladdu maaliyaddeedu bixiso khasab ma aha in ay ahaato mid ay dowladdu toos u bixiso laakiin waa in wax laga qabto u-sinnaan la'aanta geeddi-socodyada waxbarashada, natiijooyinka ardayda iyo xaaladaha shaqada ee macallimiinta. Hufnaanta iyo hal-abuurku, halkii ay ka ahaan lahaayeen sir ganacsi, waa in la baahiyaa oo ay cid walbana ku dhaqantaa. Si taas loogu xaqiijiyo, waa in geeddi-socodka dejinta siyaasadda waxbarashada uu mar walba ahaadaa mid daahfuran oo la isku halleyn karo si loo hor-istaago in cid gaar ah ay danaheeda ku fushato.

Hal-ku-dhegga warbixinta – Yaa soo xulaya? Yaa wax ku waayeya? – ayaa ah mid siyaasad-dejiyeyaasha ku tirtiriisinaya in ay farta ku godaan xiriirrada ay la leeyihiin xoogagga aan dowladda ahayn marka laga hadlayo xulashooyinka aasaasiga ah ee la kala xulanayo: xor-u-ahaanshaha kala doorashada iyo u-sinnaanta; marka la kala dooranayo dhiirrigelinta hindise iyo dejinta jaangooyooyin; la kala xulanayo kooxaha dadweynaha ee tabartoodu iyo baahidoodu kala duwan tahay; la kala dooranayo ballanqaadyadooda markaa taagan oo hoos yimaada SDG 4 iyo kuwa ay tahay in si tartiib-tartiib ah loo xaqiijiyo (t.a. waxbarashada ka dambeysa dugsiga sare); oo la kala dooranayo waxbarashada iyo qaybaha kale ee bulshada.

Warbixinta shanaad ee Korjoogteynta Waxbarashada Caalamiga ah / Global Education Report waxaa kaabaya laba agab oo internet-ka ku jira. PEER, oo ah kheyraad wada-hadal siyaasadeed oo sharaxaad ka bixineya waxqabadka xoogagga aan dowladda ahayn iyo xeer-nidaamiyeyaasha nidaamyada waxbarasho ee dunida; VIW, oo ah bar internet oo cusub oo isku-biirineysa ilaha oo bixineysa heer cusub oo dhammeysashada waxbarashada muddo ka-dibba.

unesco
Global Education Monitoring Report

4 QUALITY EDUCATION

Sustainable Development Goals